# BICIID MAGAZINE



## INTII AAD DOWLAD SUGE NOQON LAHAYD ADIGU DOWLAD NOQO!

*Badbaadi xogteenna*
*Oo ku keydi Biciid.*

Biciid

*01.2023* *NUQUL 01* *info@biciid.com*

# Biciid Magazine

## MAANKAAGA GODLI

Madal kulmisa maanka ummadda, si loogu daryeelo xogihii baylahoobay sanooyinkii burburka. Biciid waxaa lagu keydiyaa; *Sawraca, suugaanta, sooyaalka, deegaanka, duurjoogta, dhirta, dhaqanka, xiddigiska, xoolaha, hiddaha, haadda & afka ummadda.*



Biciid



- URUURIN
- KEYDIN
- FAAFIN

INTII AAD DOWLAD
SUGE NOQON
LAHAYD ADIGU
DOWLAD NOQO!

# TUSMADA NUQULKA 01

**QOREYAASHA** 06

*Bilaal Qaasim Fiqi [Aar Aw Fiqi]*
*Muna Axmed Cumar*
*Maxamuud Cali Aadan [Hoorri]*
*Cali Maxamed Ileeye*
*Ibraahim Axmed Cali*
*Mahad Jebiye*
*Maanmaal Buureed Gurxan*
*Cali Siciid Saalax*
*Axmed Soomaali*
*Cabdiraxmaan Odinga*
*Xoosh Docol Curdan*

GALLADIN 07
MAXAAN KU DOORANNAY BICIID 08
OGAALKA BICIIDKA 10
CIYAARO DHAQAMEED 16
HUBKII HORE EE SOOMAALIDA 22
GURGUR IYO GAADIID 34
CIMILO WAREEN 50
XIDAARKA AFKEENNA 56
CAWSHA 64
AGAB & HABABKA XOOGSIGA BADDA 66
MAGAC BIXINTII HORE EE SOOMAALIDA 74
GEEDKA DACARTA 82
QUDUNQUUTO 85
GODADKA MAANSADA 88
TAAWIN 94
AWDAL 98

# SUMMADDA BICIID MAGAZINE

*SUMMADDA rasmiga ah ee Biciid, ma ahan mid la beddelay ilaa iyo intii la sameeyey 2019, Oct. Waxa ay ka turjumaysaa muuqa Biciidka dalkeenna ku noolaa sannadihii 1940'dkii ka hor intii aan gumeystihii Ingiriisku dabargoyn. Summadda Biciid, waa muuqa Biciidkeenna. Sababta aan u doorannay Biciid ayaa ha in uu dalkeenna ka dabargo'ay Biciid loo yaqaannay Biciid Soomaaliga. Summadda Biciid, waxaa sameeyey shirkadda naqshaydaynta iyo qurxinta Dookh. Halkaan hoose waxaa ku yaalla hababka adeegsiga iyo midabbada summadda Biciid.*







OCHRE ORANGE
#E5833A

EERIE BLACK
#1E1C1B

Biciid

# QOREYAASHA



## BILAAL QAASIM

*Qore, tifaftire.*

*BILAAL QAASIM FIQI [AAR AW FIQI] - Xubin guddiga Afsoomaaliga heer ummadeed. Qore daneeya arrimaha gaarka ah ee Soomaalida. Qore arrimaha bulshada iyo xogaha duugan ee ummaddeenna.*



## MULLAAXO

*Qore, tifaftire.*

*MUNA AXMED CUMAR [MULLAAXO] — Qoraa/qore arrimaha Soomaalida ku xeeldheer, lem maqaallo iyo buugaag ka lagu faaqiday arrimaha Soomaalida iyo xiriirka kala dhexeeya bulshooyinka kale.*



## HOORRI

*Curiye, Qore, tifaftire.*

*MAXAMUUD CALI AADAN [HOORRI] — Qoraa/qore, curiye tiriya badaha kala duwan ee suugaanta. Qoraa daneeya arrimaha Soomaalida, suugaanta kana mid ah guddiga Afsoomaaliga heer ummadeed.*



## CALI ILEEYE

*Qore/qoraa, Curiye, tifaftire, turjume.*

*CALI MAXAMED CABDIRAXMAAN NAALLEEYE [ILEEYE] - Curiye suugaan, turjume soo rogay dhawr buug, qoraa, taxliiliye maanso, aqoonyahan, ahna cilmibaare arrimaha dhaqanka Soomaalida.*



## IBRAAHIM

*Qore, Cilmibaare, tifaftire.*

*IBRAAHIM AXMED CALI [IBRAAHIM SUUFI] - Qoraa ka tirsan macadka cilmibaarista DJibuuti, ahna xubin ka tirsan guddiga Afsoomaaliga heer ummadeed. Daneeye arrimaha Soomaalida ahna cilmibaare dhaqan.*



## MAHAD JEBIYE

*Qore/qoraa, Cilmibaare.*

*MAHAD SICIID FAARAX [MAHAD JEBIYE] - Cilmibaare arrimaha dhirta iyo deegaanka, Lataliyaha arrimaha ganacsiga ee Madaxweynaha Puntland, ganacsatade sare, jeediye TEDX.*



## MAANMAAL

*Qore, Curiye & tifaftire.*

*CABDIRISAAQ MAXAMED XUSEEN [MAANMAAL] - Qore ka tirsan wasaaradda waxbarashada iyo barbaarinta Puntland, ahna curiye laama maansada. Qore, daneeya arrimaha suugaanta, dhaqanka iyo xogaha duugan ee Soomaalida. Cilmibaare dhaqan.*



## CALI SAALAX

*Qore & tifaftire.*

*CALI SAALAX SICIID [CALI-DAAD] - Qore, tifaftire ahna curiye tiriya laamaha kala duwan suugaanta. Reer xeebeed ku gaammuray nolosha bad-dhaca. Ka tirsan Hay'adda Cunnada Adduunka [WFP].*



## AXMED

*Qore & Tifaftire*

*AXMED DAAHIR AADAN [AXMED SOOMAALI] — Qoraa daneeya arrimaha Soomaalida gaarka u ah. Cimilbaare dhaqan, qore leh maqaallo cuddoon oo ku saabsan arrimaha Soomaalida gaarka u ah.*



## ODINGA

*Qore & Tifaftire*

*CABDIRAXMAAN JAAMAC XASAN - Qore, daneeya arrimaha dhaqanka, taariikhda iyo xogaha gaarka ah ee Soomaalida. Cilmibaare u dhuungala arrimaha gaarka ah ee Soomaalida. Bare afka iyo suugaanta Soomaalida.*



## XOOSH DOCOL

*Aasaase, qore & Naqshadeeye.*

*XOOSH DOCOL CURDAN - Qore, daneeya arrimaha dhaqanka, taariikhda iyo xogaha gaarka ah ee Soomaalida. Xubin ka mid ah guddiga Afsoomaaliga heer ummadeed. Aaasaasaha Biciid. Tifaftire iyo qore.*

## FARRIIN IYO AFEEF

*FARRIIN: Haddii aad tahay qoraa/qore daneeya arrimaha Soomaalida gaar ahaan qeybaha; Sawraca, suugaanta, sooyaalka, deegaanka duurjoogta, xiddigiska, xoolaha, dhirta, dhaqanka, hiddaha, haadda iyo afka — waxa aad la soo xiriiri kartaa Biciid, si nuqullada dambe loogu soo saaro.*

*AFEEF — Dhammaan qoreyaasha ku xardhan qeybta sare, waxa ay xogtaan u keydiyeen si dirsanennimo ah oo aysan ka doonayn macaash duunyo. Waxaa se damiirkooda dirsanennimo siiyey in ay xogaha Soomaalida ee hayaan/baareen ku keydiyaan meel uun si jiilasheennaan iyo kuwa dambe ba uga faa'iidaystaan.*

# GALLADIN

*Dadka nimaan galladin aadanaha gebi ahaantiis*
*Eebbahiis ma garan karo hadduu guulo badan siiyo!*

من لا يشكر الناس لا يشكر الله

## CAAWIN

*Waxa aan si gaar ah ugu mahadcelinyanaa hay'adahaan aan dowliga ahayn ee ka qeyb qaatay sannadkaan soo saarista nuqulka koowaad ee Biciid. Nuqulkaan oo ka kooban 10 cutub oo ka kala yimid qeybaha kala duwan ee uu ka shaqeeyo Biciid. Bandhigga Buugaaga Muqdisho oo garabkii koowaad iyo dhiirrigelintii koowaad ka gaystay soo saarista Biciid, waa aan u galladnaqaynaa.*

*Hay'adda Maxalliga ah ee Tadamun Social Society | TASS, oo dhab ahaantii garab iyo gacal u noqotay soo saarista nuqulkaan.*

*Sawirka Jaldiga: Pinterest.*
*Naqshadda: Dookh Press.*

THE MOGADISHU BOOK FAIR

NEW HORIZON Culture · Civic Education

Tadamun Social Society | TASS

SOLAR4ALL The future of energy is now
WWW.solar4all.so
+252907772606

## LAJAAL

*Biciid Magazine, waxa uu gallad aan dhammaanayn u hayaa cid walba oo ka gacan ka gaysatay soo bixidda Biciid. Waxa aan si gaar ah ugu mahadcelinaynayaa bahda aqoonmaalka Soomaalida oo maankooda iyo maalkooda ku caawiyey sidii loo keydin lahaa xogaheenna baylahda ah. Biciid oo ah jariiraddii koowaad ee isku hawsha keydinta xogaha Soomaalida waa mid si bilaash ah ummadda ugu keydisa xogahooda. Ujeedka Biciid na waa — Uruurinta, Keydinta iyo Faafinta xogaha Soomaalida. Bahda Biciid, waxa ay u mahadcelinayaan shirkadda qurxinta iyo naqshadaha casriga ah ee Dookh Press, oo gacan ka gaysatay naqshadaynta nuqulkaan. Sida oo kale na qeyb ka qaadatay soo saarista nuqulkaan. Sidaas si la mid ah waxa aan u mahadcelinaynaa walaal Axmed Ibraahim Cawaale iyo Maxamuud Warsame Faarax oo qeyb lixaad leh ka qaatay soo saarista nuqulkaan.*

*Biciid marna ma illowsana, in ay mahadceliso qoreyaasha maankooda ugu hiilliyey ummaddooda kuwaas oo qoraallo dhidibtiran ku qoray nuqulkaan. Cid walba waa ay u furan tahay in ay ku qorto Biciid, haddii aysan qormadaasi ka baxsanaynujeedka Biciid.*

DOOKH PRESS

Biciid

Cilmibaaris

*Cilmibaaris, waa mareegtii u horrayso ee dhulka Soomaalida laga hirgeliyo taas oo lagu keydiyo cilmibaarisyada kala duwan, ayna ku kulmaan cilmibaareyaasha Soomaalidu.*

CC BY NC ND

*Xuquuqda Biciid©2023 | 01.2023*
*Xuquuqda nuqulkani waxa ay u dhawrsan tahay Biciid, lama beddeli karo lama na minguurin karo xogta qormooyinka nuqulkaan iyaga oo aan fasax qoraal ah laga haysan bahda Biciid. Haddii aad u baahan tahatid caawin fadlan nala soo xiriir — info@biciid.com | +252907754115, Garowe.*

**XIRIIRKA BICIID**

*Biciid Magazine,*
*Garoowe Puntland Soomaaliya,*
*Jidka Islaan Maxamed,*
*Dariiqa 4, dhismaha Target,*
*Qeybta hoose.*

*+252907754115*
*www.biciid.com*
*info@biciid.com*

*Guddiga horumarinta Afsoomaaliga iyo Akaddeemiyadda dhaqanka, cilmiga iyo suugaanta qaranka.*



**XOOSH DOCOL CURDAN**
Aasaasaha & Maammulaha
Biciid Magazine, Garowe.

# MAXAAN U DOORANNAY
## BICIID MAGAZINE?

17th Oct, 2019.

# INTII **AAD DOWLAD SUGE** NOQON **LAHAYD ADIGU DOWLAD** NOQO.

## HALHAYSKA BICIID, 2023

Watad iyo walaac ka dhashay hubanti la'aanta xogaha Soomaalidu, waxa uu dhaliyey in Soomaali badani si kaliyaalle ah ugu istaagaan dhawrista xogaha Soomaalida. Badi waxa ay ka ahayd in ay jeclaayeen, halka qaar kale ula jeedeen maad iyo maxaa tiri, waxaa se jira qaar faro-ku-tiris ah oo uu walaacaas ka demi waayey, tan iyo markii ay dareemeen in loo baahi qabo cid maalin uun isku soo ururisa xogaha Soomaalida. Dayac tirobeel ah ayaa haysta xogaha Soomaalida, iyada oo aan horey loo ibofurin xogihii hore ee Soomaalida, kuwii diimmoonaa aan la faagin, halka kuwii wax uun laga ogaadayna ay adag tahay in ay maanta gaaraan dadka Soomaalida in yar mooyaane! markii ay dhacday dowladnimadeennii waxaa xogaheennii ku dhacay saddex dhibaato;

01. **Kala firiqsanaanta xogaha Soomaalida.**
02. **Dhumista & waayidda xogaha Soomaalida.**
03. **Xogsiin la'aanta bulshada Soomaaliyeed.**

Saddexdaas dhibaato, waxa ay gogoldhig u noqdeen in dadka Soomaalidu moogaadaan xogahooda dhabta ah, halka dhallaankeenna lagu abbacay xogo ay leeyihiin dadyow kale sida waddammada deriska ah iyo kuwii Soomaalida gumeysan jiray. Wasaaraddii Waxbarashada, Akaddeemiyaddii dhaqanka, Matxafkii Qaranka, Madbacaddii Qaranka, guddiyadii horumarinta & adeegga afka, iyo dirsaneyaashii bulsho ee ku dedaali jiray in ay gufeeyaan godadkii daloolay dhammaan waxa ay noqdeen hawlgab aan u hollan dantii ummadeed maaddaama saameyn lixaad leh uu ku yeeshay qaran jabkii Soomaalidu.

Hadda ba, iyada oo laga duulayo xal u helidda saddexdaas dhibaato ee ka dhashay qaranjabkii Soomaalida, waxaa **October 17, 2019** dhidibbada loo taagay **Biciid**, oo ah gog ujeedkiisu yahay; **Ururinta, Keydinta & Faafinta Xogaha Soomaalida**. Si taas loo gaaro, waxaa lagama maarmaan noqotay in la ogaado geeddiga halka laga ambaqaadayo, waxa aan xadaynay **12 mawduuc** oo ay xogaha Soomaalidu ka dhiigayaan kuwaas oo kala ah; **sawra, suugaanta,sSooyaalka, deegaanka,duurjoogta, xiddigiska, xoolaha, dhirta, dhaqanka, hiddeha, haadda iyo afka.** Ma ahan in intaan keli ah lagu koobayo uruurinta xogaha Soomaalida, waxaa se jira qorshe xilli walba lagu ballaarin karo afyaalka iyo hortebinta uu Biciid u darban yahay. Ujeedkeenna innaga oo aan ka beyrayn waxa shardi ah – In xogaha la soo baaro/uruuriyo, ka dib la hufo si loo keydiyo, ka dibna la faafinayo.

Biciid, marna ba ma noqon faa'iido doon lacageed, balse waxa uu u taagan yahay sidii loo gufeyn lahaa dululaatigaas maran. Waxaa qora qoreyaal kala duwan. Waxa uu na ka kooban yahay;

01. **Jariiradda** - Waxa ay u soo baxdaa si sannadle ah, bil walba Nov. 20 ayaa la soo daabacaa.
02. **Goosan** - Buug yare si kooban loogu daabaco mawduuc gaar ah xogtiisa sida; dhirta, xiddigiska iwm.
03. **Keydka** - Waxaa xogo ka kooban 43,800+ uu aruuriyey qoraa sare Cabdalle Cumar Mansuur isaga oo kaashanaya Marwo Annarita Puglielli ee Università degli Studi Roma Tre, kaas oo lagu soo wareejiyey bahda Biciid. Xogtaan waxaa lagu baahin doonaa badibdeed mareegta *www.biciid.com*, marka loo dhammeeyo agabkii ay ku hawlgeli lahayd.
04. **Hidde** - Waa gog lagu keydiyo dhammaan muuqa iyo magaca hiddeha [heritage] ummaddeenna.
05. **Afwaan** - Waa barnaamij xiriir ah oo xogaha looga reebo dadka waaweyn ee aan wax qorin wax na akhrin iyaga oo loo diyaarinayo hab muuq iyo maqal ah ama qoraal ah.
06. **Mareegta** - Mareegta www.biciid.com, waxa ay ka kooban tahay dhammaan qorsheyaasha loo dejiyey Biciid, si ay u gudato waajibkeeda adeeg.
07. **Qamuuus:** Qaamuuskaan oo ka koobnaan doona in ka badan 200,000 eray, waxa uu isku meel ku kodlin doonaa 3'da qaamuus ee haatan jira kuwas oo afka laga dheegto — Keenadiid, Mansuur & AGA. Qaamuuskaan ayaa awood u yeelan doona in akhristeyaasha erayo ku daran ka dib markii la ansixiya na waxa ay ku biiri doonaan erayada.

Si aad u heshid in ka badan 10,000 qormo/qoraal oo aan ka qornay 12'ka mawduuc fadlan goobaha wax laga baaro ku qor calaasha; **#BiciidMagazine.**

Waa maxay Biciid?
CUTUBKA 01.



# OGAALKA BICIIDKA

## IYO SOOMAALIDA

Maanmaal
Buureed Gurxan

**SARYANKII GARBAHA WEYN LAHAA GOOB KA KICI WAAYE.**

Ismaaciil Mire Cilmi



Biciidku waxa uu ka mid yahay ugaadha kuweeda ugu waaweyn ee loo yaqaano ishinka. Inkasta oo aan biciidka lala barbar-dhigi karin Geriga iyo wixii la hal-maala, haddana xagga qaro iyo qotan-mugeed, waxa ay aad isugu soo dhow yihiin Goodirka, sii ba nooca aan Yerista ahayn ee Ishinka ah.

Haddaba haddii aan tilmaan buuxda ka bixiyo astaamaha muuqaal-dulleed ee biciidka; Biciidku dhanka ekaanshaha waxa ay aad isugu soo muqaal ekaansho dhow yihiin lo'da.

“

# WAXAA LAGU QIYAASAA IN MIISAANKA CULEYSKA JIREED EE BICIIDKU UU YAHAY, CULEYS JIREED GAARAYA ILAA 200 KIILO.

— CULEYSKA BICIIDKA DALKEENNA KU NOOLAA.

Waxa uu Biciidku leeyahay qoor dhumuc buuxda leh, iyo qaro jidheed oo lexaad leh oo isku joogta. Waxaa lagu qiyaasaa in miisaanka culeyska jireed ee biciidku uu yahay, culeys-jireed gaaraya ilaa 200 kiilo. Xagga taaga dhererkiisuna waa inta u dhaxaysa 110cm ilaa iyo 120 cm oo garabka ku joogta.

Dhanka midabka, biciidku waa mid midabkiisu yahay cawliin-dameeriya, xaga hoose iyo afka waa u cad yahay, halka uu saynta dibka, daamanka, salaanta, sararaha, iiyo jeenyaha korkooduna ay yihiin kuwo midabkoodu yahay madow-bacadda oo diilimo ah. Biciidka kiisa lab iyo kiisa dhedigba waxay leeyihiin geeso dhaadheer, kuwaas oo dhererkooda lagu qiyaasay inay gaarsiisan ilaa 120 sentimitir.

Sida ay kasmooleyda ugaadha taqaana ay isku raacsan yihiinba, biciidku waxa uu ku dhaqmaa deegaanka aboobta ah, ee inta badan biyo ka dheerka ah, sida dhulka bocoodda ah, soolasha, dulaha-buuraha iyo hawdka. Biciidka kiisa lab waxaa la yiraahdaa Saryan, halka kiisa dhedigna loogu yeedho Goloso, marka uu yaryar yahayna waxa loogu yeedhaa Sarawo.

Afka So'maaliga oo ah af hodonna, ayaa biciidku marka uu yahay koox ama wadar isla socota oo wada jalabuuteenaysa, ayaa waxa loogu yeera Raxan-biciid ah, halka deegaamada qaarna loogu yeero ereyga Yahaab-qamaamaley ah.

Haddaba tirada ugu badan ee wadarreed ee uu gaaro Biciidku marka uu goob isugu yimaado, waxaa lagu qiygaasaa inay gaarto tirada u dhexeysa 35 ilaa 40 madax, oo isugu jirta Saryan, Biciic iyo Sarawoda. Haddaba raxan biciida oo intaas le'eg, in la arko, waxa ay dhacdaa xiliga barwaaqada ah, ee ay u soo wada waraab tagaan, meelaha dhuumaha ah ee biyo-mareenka leh, ee ku yaala dhulka aboobta oomanaha ah ee ay inta badan ku saakimaan.

Biciidku waxa uu ku jiraa ugaadha kuweeda ugu dhiifanaanta iyo digtoonida badan. Dabeecad ahaan, biciidka agaha u dhow marka uu wax ka dareemo ama





uu shakiyo, waxaa u caado ah in uu sida ugu dhakhsaha badan falankeeda u galo inuu ka qaxo baraduu ku sugnaa, waxaa uu na isla markiiba bilaa baa kudaaco, uu kaga fogaanayo cadowga soo abbaaray, mana kala joojiyo oradkaas xawli iyo kaynaanka ba'an ah, ilaa uu tago kana gaadho abbaaraha in u jirta daaqsin geel bartii uu ka soo baqo cararay ee uu uga soo qaxay cadowgii bariisan lahaa. Talow cadowga baadi-goobaaya ee had iyo jeer bartii

**Sawirka**: Pinterest.com

Biciidka kiisa lab iyo kiisa dhedigba waxay leeyihiin geeso dhaadheer, kuwaas oo dhererkooda lagu qiyaasay inay gaarsiisan ilaa 120 sentimitir.

uu cag dhigaba ku raad-joogaa ma dugaag baa? Mise waa dad? Su'aashaas jawaabteedu waa labadaba, dadkiyo dugaagguba waa u cadow.

Biciidku cararkiyo baydadka uu biciidku inta badan sameenayo, ee uu kaga fogaanayo cadowgiisa kala duwan ee soo weeraraya, haddana maaha mid uu mar walba ku guuleysto in uu kaga badbaaddo, taas oo ay ugu wacan tahay, cadowgiisa sida daran ugu jira baadi-goobkiisa ah siday gacan ugu dhigi lahaayeen.

Bal haddii aan soo qaato suugaan inoo tusmeynaysa baydadka biciidku sameeyo marka uu arko dugaag iyo dad soo galay aguhu joogo, waxa ila foolaadsan inaan soo qaato dhawr tuduc oo ku jiray tix uu Abwaan Bide Faarax Gaas(AHUN). Sida aad ka dheeganaysaan meerisyadan, wuxuu abwaanku inoogu manqaxaya "isagoon badbaaddayn oo laga il horeeyey oo shiishka laga buuxsaday, sida uu biciidku u buub-diddo ee uu cararayo goortuu arko beydriga(ninka ugaarsadaha ah)". Wuxuu Abwaan Bide Faarax yiri:

Biciidku ba hadduu dido dhulkuu budul ku jeexaaye
Beydarigu raadkuu guraa dabo basleeyaaye
Berrinkuu istaagaa ma oga belo inay taale
Markase shiishka laga buuxsadoo beerka lagu gooyo
Isagoon badbaadaynin buu orod bilaabaaye
Bilcilkiyo caddaadiyo dhirtoo baaxad iyo xoog le
Kama baydho kii dilay haddii uu ku soo baxo'e
Markuu boqol talaabiyo ka badan burrarka sii jiidho
Oo dhiig ka soo baxo intuu qooyo boggagiisa
Alla ba waa baxnaaniyo inuu gaadho dhawr beriye
Bahardaadsay geesaha intuu geliyo booraane
Isagoo barraad laa halkaa lagu birreeyaaye
Inta baalka liyo dumarku wey bililiqaystaane.

Dadka marka laga yimaado, haddii aan in yar ka taabto ka na tilmaamo cadowgiisa dugaagga ah ee mar walba ku raad-jooga bartuu cag dhigaba, waxaa ka midda shabeelka, yeyda, iyo odaygii boqorka kaynta ahaa, waa kii shaashlaha ahaa ee la oran jiray ukuli. Caadi ahaanna, waxaa jirta sida biciidka oo kale, inay bahda habar-dugaaggi u wada goobaan una raadiyaan dhammaam ugaadha kale ee biciidka kula nool duurka, maadaama



Sawitrka: Reddit.

# MAXAA LAGA YIRI BICIIDKA

01.

"Meel bur cowsa leh oo biyo u dhow baadigoobyoo Biciidku ba waa".

02.

"Wallee Saryan Goonidaaq ahi ma hargalo".

"

Saryan labkiisa, Booldhay labka yar, Gaban dheddigga yar, Alaan qaalinta, Gosol ama Biciid waa dheddiggiisa weyn.

~ Qeybaha qamaanleyda Biciidka.

ay noloshoodu ku xiran tahay hilibka, taasina waa mid Biciidka laga la siman yahay oo aan isaga kaligii gaar ku ahayn.

Inkasta oo uu Biciidku ka mid yahay ugaadha geyigeena ka sii dabargo'aysa, waxaa jirtay in ay dadku ugaadhsan jireen, sida aynu kor ku soo xusnay, waxa aynuna sheegnay in cadowga labaad ee Bbiciidka ugaadhsada in uu ahaa dadka, gaar ahaan ragga, wax se' isweydiintu tahay, dadku maxay u ugaadhsan jireen oo ay biciidka ka dheefi jireen? Waa weydiin mudan in la isku jalbeebo, haddii aan se' idiinka jawaabo, sida aynu sooyaalka ku hayno, heerarkii ay soo martay geedi-socodka nolosha dadkeena, sii ba waayihii aanay jirin magaalo iyo meel wax kale laga soo iibsado, nolosha dadkuna ay ahayd mid ku xirnayd cad iyo aano, ayaa haddana waxaa jirtay in dadka gebi ahaantiisba aanay nasiib u wada yeelan, inay wada helaan cad iyo caano, isla markaasna ay jireen dad aan haysan xoolo ku filan oo baahidooda nololeed dabooli karayey ama se' ay jireen dad aan neef xoolo ahiba u soo hoyan oo ay noloshoodu ku tiirsanayd kuna xidhnayd inay ugaadhsadaan biciidka iyo kumaananka kale ee ugaadha ah ee jalabuteynaysay deegaanka ay berigaas ku noolaayeen.

Biciidku waxa uu ku dhaqmaa hawdka, saraaraha, suduha iyo waraqyada xiraanka ah ee biyaha iyo cowsku ka dhaw yihiin. Waa doog daaq, cowska ku nool ah, waa nugul biyo ku jiid ah. Labkiisu waa Sarayn, halka dhedigiisa loo yaqaano Biciid.

## NOLOSHA BICIIDKA!

Biciidku waxa uu ka mid yahay ugaarta aadka isu ilaaliya, sida la sheega na ma ahan ugaarta dagaalka badan oo kulul, mar la dadeeyey baa la weyddiiyey - "War Biciid maxaa bu baqdaa adiga oo warmahaas madaxa kuu suran yihiin?". Markaas baa laga waariyey maahmaah Soomaalida caan ka ah; **"INTII DHOGORTAADU DHAN TAHAY BAA LA DHAWRSADAA".**

"

### DADKU MAXAY U UGAADHSAN JIREEN OO AY BICIIDKA KA DHEEFI JIREEN?

Sida la aamminsan yahay ciidamadii baandada Ingiriiska iyo kuwii faashiistaha Talyaanniga ayaa ahaa awooddii ugu weynayd ee keentay in badi la dabargooyo ugaartii geyiga Soomaalida, ka dib markii ay dalka keeneen hub casri ah.

Waxaa jira dhawr nooc Biciidka ah, waddammada Cummaan iyo Yemen waxaa ku nool mid cad dusha sarena daliig ku leh. Africa waxaa ku nool mid eyddin ah dusha sare na madow, halka Biciid Soomaaligu ahaa mid ciiro-doonbaas leh. Saanta Biciidka waxaa laga jartaa gaashaanka, waxaa se dhawaan jirta iyada oo saamihiisa gaar ahaan surkiisa laga sameeyo qoofalka oo ah dabar lagu xiro awrta tabaadiga ah gaar ahaan baarqabbada geela.

Ugu dambayn, waxaa jirta suugaan tiro beel ah oo lagu halqabsaday Biciidka, ha ahaadaan kuwo ammaan ah, kuwa tusaalayn ah iyo kuwo dano kale laga lahaaba.

Saryankii garbaha weyn lahaa goob ka kici waaye
Wuxuu gooni-daaqii habsaday gubadadii Hawde.
– ISMAACIIL MIRE
****

Garanuugta yaacdiyo ninkaan Goodirkaw celiyey
Een Biciidka geeska u qabtiyo Faraw gadoodaaya.
– CABDILAAHI MACALLIN DHOODAAN
****

Goobyaalka Deerada mankiyo gurata maanjeenta
Geri jeenya dheeriyo Biciid Goray-haldhaa qooqay.
– HADRAAWI
****

Saryan gooni-joogiyo Biciid Geesku Hadhinaayo
– CALI MOOGE
****

Wiyil geesleh gaatame Biciid Goray hadaafaaya
Goodir xaradhleh Garanuugta iyo Geriga dhaadheerba.
– CALI XASAN AADAN - BANFAS
****

Mar biciidka dibadeed hadduu oon la dalandoolo
Oo luguhu diiq iyo noqdaan, diriq sidoodiiye,
Bogguna duugta gaaroo, indhuhu dibinta ooyaan
Duurinnada yahaabkii, markuu dool u soconaayo
Dibintiyo qanaantii markuu sare u daynaayo
Socodkii dorraad maalintuu dib ugu soo laabo
Darkaa loo fariistaa, si aad daanno u gayso!
— COLOW YAASIIN GEEDDI.
****

Sida laba Biciid
Waaqla lawyadiyo
Luqmaha isla galay
Laboodiga lidkii
Laf inuu jabshoo
Ka libaysto raba.
– HEES

Meel bur cawsa leh
Oo biyo u dhaw
Baadigoobyoo
Biciidkuba waa!
– HEES LO'AD

# CIYAARO DHAQAMEED

DHAQANKA



DHAQANKA

# WAA MAXAY CIYAAR

Af iyo eray ahaan lama manqixi karo gosha uu ka soo hirtay erayga "CIYAAR", balse waxaa cad in magacaan oo iddiis ba afkeenna ka mid ahaa laga soo raray meeshii uu ku jiray ee ahayd CIYAAR, taas oo ah FALAAD, loo bixiyey dheesha. Sida cad waayeelku ma jeclayn ciyaarta oo badi dhallintaa jalwisa. Marna waxa ay noqon karaan eray isrogid sameeyey oo ay ka mid yihiin - "Ci'+yar" ama "Ci'+yeer". Waxaa se cad in dheeluhu ay ahaayeen soo jireen bulshada Soomaalida mudka iyo maraqa dhigay.

# WILGO

Mar kale magaceedu waa **Wiglo**, waa ciyaar caan ka ah deegaannada xeebta ku teedsan, ilaa markii dambe ay u gudubtay magaalooyinka waaweyn iyo jararta miyiga inta ba. Ciyaartaan dumarku wax kaalin ah kuma laha aan ka ahayn jiibta, jaanta iyo hoorinta dambe.

Sida la sheego ciyaartaan oo ku bilaabatay erayo isi samirsiin ah, kol dambe waxa ay isu rogtay mid leh jiib iyo jaan balse durbaanku ka maran yahay maaddaama aan raggu durbaanka garaacin. Miraha iyo laxanku waa u gaar, waxa ay ka kooban tahay labo ilaa saddex meeris.

Dhulka oo dheer, hirarka badda oo garaacaya doomaha xawaasha ah, caashaqa dekedaha iyo calmashada berrigu waxa ay hilow yaab leh ku irkicisay dhowga (crew), si uu isu samirsiiyo waxa uu ku khasbanaaday in uu helo miro uu isku madaddaaliyo, halkaas ayaa ka dhasheen miraha Wilgadu.

Marka hore, si loo soo kiciyo cid walba oo aagga ka dhow waxa lagu bilaabaa meeris oo isku mid ah, laakiin la iska dabo hoorinayo. Meerisyadaan oo sacabku la socod ayaa soo hiyi kicinaya mid walba oo la'aa meel u irkado, kolkaas baa badda la soo galaa - labo saf ayaa loo kala jabaa. Haddii rag iyo dumar la yahay na qaab hilqo ah baa loo istaagaa.

Woyaale woyaale woyaaley
Woyaale kalaynu leenahayey!



**sawirka:**
Biciid Magazine

marka ciyaarta soo godlata na waxaa la galaa ujeedka oo aan laga ballamin. Ujeedka ciyaaartaan ayaa noqda saddex ilaa afar horimood;

01. Samirsiin.
02. Jacayl
03. Colaad
04. Noloasha

Aan ku bilaabowno kuwa si mutuxan u qeexaya samirsiinta iyo arrimaha la xiriira deliytada nolosha.

[01]

Nin dhintiyo nin dhoof jira ooy
Dhuuboy, midna sooma dheelmado ee.

[02]

Qalbi tegey calool talan galay
Dhuuboy dhul tumaati dheeraa.

[03]

Gudcur dama habeen gu' ka tegey
Ganaane ma loo arooraayey.

[04]

Ganaane biyoobey geel ma maree
Go'doy waa la kala gu' weyn yahayey

Colaadda
Colaaduhu waa joogto mar haddii ay jiraan kala jororsiga baadka iyo biyaha. Nin walba waxaa u illan awlaxiisa, seebka warmaha dhigo, seeftu jeeni suran, gabooyaha lagama saaro mariidda, farasku waa looshane oo lagama dego, mar geel la dhacayo, mar carshin loo taxaabayo iyo mar aano la goobaya ba maankay ku guntan yihiin.

Wilgadu markii ay gaartay dadyowga miyiga, waxa ay ka qaateen labo badood oo noloshooda taabanaysa kuwaas oo ahaa - Jacaylka iyo Colaadda.
Bal aan eegno miraha colaadda laga curiyey;

[01]

Jidkaan kaaga sii horreeyaaye
Warmaha jalawdooda soo raacey
[02]

Belaayo rag baan u baalidayoo
Birtay nimay gaadhey
Baan ma leheyey?

[03]

haddii raggu duulo duur magallee
dagaal-ramataannu leenahayey.

[04]

Libaax laba jeeni dhiig darayoo
Lad weyn ka jibaadayaan ahayeey

[05]

Libaax dalandoolay duur ma ceshee
Digooy dalku waysku yaallaayey

Mar haddii raggu isu keliyeystay, nin walba waa kii ka sheekee jabkiisee, miyaadan u joogin iyada oo nin walba ka warrammayo heerka uu ku gaarsiisan yahay jacaylku? Waa tan ee bal eeg!

[01]

Rataab iyo raatub bayga luntaye
Rubboy mayla raadineysaayeey?

[02]

hadday Dhudi caano ii dhiibtoy
Intaan dhamo sooma dhaafeen!

[03]

Haddii reerku guuro Caasha-rubboy
Rakuubka ma kuu kireynaayeey?

[04]

Anoo dharcad sooma dhuuman karee
Dhurwaayo ma soo hagoogtaayey?

[05]

Dhaqaale adduun dhib loo aragyey
Maxaa Dhudi dhaami loo yiriyeey?

[06]

Arayeey Sahlooy, samir iga idlaa
Saddexdii habeen sannad iiga badanaa!

Ciyaarta Wilgadu waxa ay ka mid tahay ciyaaraha waddankeenna aad looga sii illaawayo, haddii aan dhaadinna waxa ay ku dambaynasaa toobiyihii ay mareen kuwo badan oo iyada ka horreeyey. Maxaa ka xusuusataa miraha Wilgada? Magaalooyinka laga ciyaaro (jiray) kuwee ayaa aad ka soo gaartay?



# WILGO

Ciyaartaan oo awalkeedii ahayd ciyaar ay dhawga maraakiibtu maammiyeen waxa ay si xawli ah ugu fidday badi dhulkii Soomaalida, iyada oo nin ba u sii gudbiyey ninka kale, barbaartu na ay ka dhigteen madadaalo iyo haasaawo warran.

Ciyaartaan fiditaankeeda degdegga ah waxa u sabab ahaa - ciyaaraha barbaarta oo geyiga ku yaraa iyo dareen hadalka nafsadeed ee qof walba rabay in uu uga nefiso hawkarkii shaqo ee miyiga yaallay oo ay ugu horreeyeen tartankii ka dhex jiray helidda iyo kala meersiga dumarka.

Tagtadii dhaweyd dumarku waxa ay ahaayeen kuwo lagu kala meersado hanti badan, nin walba na hantida uu bixiyo yaa gabadhu la ayni ahayd kuna qiimo iyo qaayo go'nayd. Ciyaartaan xilliyadii dambe waxaa ka farcamay ciyaaraha - Hirwada & Dhaantada kuwaas oo miisaan ahaan ka beddelan. Mar haddii miisaankii is beddelay waxaa iyana is beddelay jiibtii, jaantii, yeertii iyo hoorisyada. Kuwa dambe waxaa ku soo biiray dumar maaddaama ciyaartaan ay ragga gooni u ahayd.

Miraha iyo badi xogta waxa aan kaa soo xigannay buugga uu qoray Axmed Cartan Xaange, ee la dhaho - Folk Songs from Somalia (Ciyaaraha Soomaalida).

Woyaale woyaale woyaaley
Woyaale kalaynu leenahayey!

~ Dhextaasha Wiglada

DHAQANKA

# HIRWO

Tan iyo markii ay miyiga galbeed ilaa kan waqooyi iyo xeebaha ay ku fidday ciyaartii shaacday ee Wilgadu, waxaa soo baxay ciyaaro kale ka abuurmay siiqadeedii balse uga duwanaaday meelo gaar ah.

Hirwadu/Hurwo waa ciyaar la siiqo iyo saan ah Wilgada balse uga duwan jiibta iyo jaanta. Sidii aan ku soo xusnay qormadii Wilgada ma lahan jiib iyo jaan waxa ayse leedahay cod loo jejebsho sidii la jeclaysto iyada oo aan laga tegayn jidkii miisaanka miraha.

Wigladu markii ay gaartay Galbeedka waxa ay isu rogtay ciyaartaan cusub oo loo baxshay Hurbo ama Hirwo, waxa ay uga duwan tahay Wiglada 5 qodob oo kooban.

## JIIB & JAAN

Hirwadu, waxa ay leedahay Jiib iyo Jaan wada socda - Jiibtu, waa in xiddigga curinaya erayada oo ah gole ka fuul laga dabo hooriyo, tan ayaa sahlaysa in miraha la qabto iyada oo ka dhigan qurxin iyo xusuusin iyada oo weli ba codka la jiidaya. Halka Jaantu tahay - sacabka iyo qoobka dhulka lagu tumayo si ay u yeelato cod dig-dig ah. Sacaka iyo Saanta la isku daray waxaa loo yaqaanno Jaan.

## MIRAHA

Curinta miraha HIrwadu, waa ay ka duwan yihiin dhanka miisaanka. Miraha Wigladu waa ay ka dheer yihiin miisaan ahaanna waxa ay u ku fadhiyaan 12 alan. Halka Hirwadu ay tahay barka Wilgada 6 alan.

## QALAB

Hirwadu, marka ay u sii dhawaato Dhaantada, waxaa lagu laraa qalab ciyaareed sii macaanaynaya codkii xiddigga/ xiddigta. Qalabkaas waxaa ka mid ah durbaanka, jaliiladaha oo ah looxyo la isku garaaco iyo haddii biro helo.

## DUMARKA!

Arrinta afraad oo ay uga duwan tahay, Wiglada waa in loo siman yahay, maaddaama Wigladu ay ku bilaabatay ammaan dumar iyo hilow ay qabeen dhowga doomaha/ maraakiibtu, tani waa ay ka duwan tahay oo waxaa wada qaadi kara rag iyo dumar kii soo gaara. Mar haddii ay yeesheen xiddig iyo xiddig(ta) waxaa meesha imaanaysa isxifaalayn, iskudaadin iyo xujooyin. Wigladu intaas midna ma leh.

## XILLIGA

CIyaartaan waxaa la dheelaa habeenkii, iyo barqosinkii inta qaboonada ah oo ay milicda libdhadu jaban tahay, xooluhu doogsin daaqa yihiin. Balse, hirwada xilligii ay kugu soo dhacdaa la cammirtaa.

Ciyaartaan waxa ay ku bilaabaynasaa labo meeris oo gaagaaban;

Hirwooy, naa Hirwooy!



Goor habeena
soo dhacayeey
Hirwooy!

Intaas ka dib, waxaa isi soo xulaya raggii iyo hablihii aagga ka dhawaa oo mid walba waalidkii ka soo dhuuntay. Markaas baa la cammirtaan ciyaartaan. Waxaa u soo horreeya hablaha, maadda jiibta ragga ay maqleen, marka uu arko hablo soo hullaaban buu ku sii bilaabayaa;

Markaan ka rugsiiyo
Meel rawaxooy
Gashaantimo roorayaa imaneey!

Maadaama aan waalidku jeclayn in hablahoodu aadaan ciyaartaan, dhaqanka na ay aad ugu dhegganaayteen, isaga oo la dardaarmaya gabdhihii buu leeyahay;

Haddii ballantii
Dhab kaa yahay
Biyaan doonin
Been ku soo sheeg!

Markaas baa loo tumayaa dhex taashii ciyaartaan oo ahayd;

"Ha Hurba,
Ha hubra,
Hurba Xaaxa!".

Gashaantihii baa qaatay, oo u sheegay in ballankoodii galabta wax iska beddelay oysiinaya na in aan waalidku ogaan waxa ku soo kufinayaan warkooda;

Sakhaawe ragoow
Sidii ma jirtee
War hoy ha la
Saamo gaabsado ee.

Ciyaartaan, Hurbada ma sii waarin waxaa na markii ay magooshay oo gahayrtay godkeedii ku soo ciriiriyey ciyaarta ilaa iyo haatan caanka ah ee Dhaantada loo yaqaanno iyada oo la miisaan ah Wiglada. Sidaas ayaa loo dhahaa - Wigladu waa hooyada dhashay - Hirwada iyo Dhaantada.

**"HA HURBA,
HA HUBRA,
HURBA
XAAXA!".**





"XEER LAHOW AMA XOOG LAHOW!".

~ Halqabsi, Garta.

# HUBKII HORE EE SOOMAALIDA

Bilaal Qaasim Fiqi, Muqdisho

Tan iyo aamanuu, iyo markii ifkan la taagay—udbo li'i, aadanuhu dirir u joog buu ahaa. Meel uu joogaba, ina Aadan, salabkujoog buu wada ahaa oo, har iyo habeen, gobannimo u dirir buu ahaa. In uu noolaado oo weliba gobannimo ku naaloodo ayaa uu dhab ahaan u jeclaa. Markaas buu inta wax kasta oo kale iska hilmaamay buu si kamadambays ah u qaayibay: u halgamista xor ahaanshiyihiisa. In kasta oo ay dadaalladaas raggu, badi, ku go'i jireen, haddana dumarku ka ma ay marnayn oo shidaal bay ahaayeen; li'idoodna Soomaalidu goobo badan bay faro marnaan iyo rag badan oo darka Aakhiraad ku biiray ka la soo noqon lehaayeen.

Haddaba, Soomaalida oo ummadahaas ka mid ah ayaa aynu isla eegi doonnaa halgankeeda xorriyadeed iyo hubkii ay ku dagaal gali jirtay qayb ka mid ah.

Waa waax dambeedkii qarnigii 19'd ee tagay. Arladu waa nabdoon tahay oo saancadde iyo saanmadoobe toona cag ma soo dhigin. Sabadu waa barwaaqo oo dhowaanahan abaari ka ma ay kicin. Dadku waa dareen la' yahay. Dhulku taysihii dhowaa buu biyo badan ka hirqaday. Meel walba oo godan baa gu'gii dhowaa buuxiyay. Balliyada iyo waraha, haraha iyo jidhaamaha, intaba, rah baa ka "jiiq" leh, lo' baa ka dinaahyiyaysa oo wegenno fardo ah baa ka dananaya. Hootanuugyadu harqoodaalka aqallada ayay, inta dhergeen, ku nasanayaan. Roobku xilliyada la sugo Eebbe ma baajo, gaar ahaan, samuuladka , nugushiga iyo kabrarka . Afarta meesi ayaa kobtii loo dhaqaaqaba sariiran. Dhirtu waa ay magoolan tahay, oo qunbayowgii subag baa hif ka ah. Neef uu waraabe la tagay iyo baraar ay golli gadday cidina isma weydiiso, saa tirsi xoolaad cidina u ma kansho hesho e. Safraha magaalooyinka xeebaha leh ka soo sodcaala ee barnida sida, cidina wax badan u ma oga, saa wax la jaciirto cad iyo caano ayaa u liito e! Taar iyo taleefan, iyo telefishinba la ma wesharin, la mana aqoon. Isgaarsiintu maansada, oo la wada okoban yahay, baa ay ahayd. Wax geela ka weyn oo nafta la ag dhigi karay cidina ma ay malayn jirin!

Wax ay sidaas ahaataba, waxa geyigii Soomaaliyeed ee midaysnaa ku habsaday gumayste ka la jaad ah asii isku ujeeddo ah. Gumayste ka midaysan hal aragti oo ah "ka la qoqobista Soomaalida iyo ka la saanyashada dhulkeeda iyo dadkeeda".

Mar kaliya ayaa waxa isdhalanrogay habnololeedkii geelleyda, kalluunsatada ama beeraleyda ahaa, habkii nolol ee ay Soomaalidu tiqiin ayaa 'jaantaa rogan' noqday; markaas buu la yimid weji hor leh oo maantaas Soomaalidii joogtay, in yar mooyee inta kale, si weyn u saameeyay.

## "WAA SOOMAALINNIMO, WAA MIDOW OO WAA ISGARABSI!"

Haddaba, si qorshaha saancaddaha loo daadifeeyo, is-ahaanshaha Soomaalidana loo dhowro, waxa la huri waayay in hubkan casriga ah ee aan waranka, gamuunka, leebka, ableyda, magliga, iyo gaashaanka la daruuro ahayn in halganka gobannimaddoon loo kaashado, si gumaystaha awood u babacdhigi karta looga hor geeyo. Sida uu sooyaalku na barayana, Soomaalidii jeerkaas wadar-oggol bay ugu wada madaxruxday, una soo dhowaysay.

Hubka, kolka, degaannada Soomaalidu degto soo gaari karay waa uu yaraa, sicirkiisuna waa uu badnaa. Sidaas daraaddeed, Soomaalidii jeerkaas, in ay hubka noocyadiisa ka la geddisan wada hesho ma ay fududeen. Se intii ay midigta ku hubsato ayaa ay ku furo adaygi jirtay, oo iska caabbinta saancaddaha u kaalmaysan jirtay. Hubkaas ayaa dhawr siyaaloodba, Soomaalida, ku soo gali jiray: b) in ay xoolo nool ku soo beddeshaan, weliba geela; t) in ay gumaystaha ka soo furtaan; j) in ay heshiis waanwaan dhaafsiistaan; x) in askartii Soomaaliyeed ee gumaystaha la safnaa ay la soo goostaan iyo habab kale.

Hubkaas badnaa, annaga oo suugaanta uga meeldayeenna, waxa aan ka xusi karnaa:



SAWIRKA | Nick O'Hare, 2009



# 01

## JIKRE

Jikruhu waxa uu ahaa qori uu Faransiisku sancayn jiray; Soomaalidana Jabuuti buu ka soo gali jiray, iyo Xabashida. Hal xabbo oo weyn buu qaadi jiray, cod weynna waa uu lehaa. Daraawiishtii baa si aad ah ugugu dagaalami jirtay.

## "ANIGANA JIKRAY* I LA HELEEN SHALAY JIHAADKII DHEH!"

*~ Sayid Maxamed Cabdille Xasan, Darwiish.*

Hubka si guud waxaa loo qaybiyaa labo nooc oo kala ah; Hubka qabow iyo guud. Hubka guud Soomaalida waxa uu soo gaaray wixii loo gaaray 1800, waxa uu na ka yimid dhulal kala duwan. Caalamku waxa uu ku dagaallamayey hub isku mid ah wixii ka horreeyey dagaalkii labaad ee adduunka. Wixii se dagaalkaas ka dambeeyey waxa uu kala noqday reer Bari iyo Galbeed. Hubka galbeed waxaa hoggaaminayey Maraykanka, halka tumaalka barigu na uu ahaa Ruushka.

Dagaalkii koowaad iyo kii labaad ba waxaa lagu dagaallamayey qoryo fudud oo shucays ah, kuwo dambaaburada gubata iyo noocyo kala duwan oo aan tiiro dheerayn. Wixii loo soo gaaray dagaalkii labaad waxaa bilowday qoryo boobeyaal ah oo dadka gaarsiiyey dabargo' iyo in ay ku dhammaadaan fuuqa iyo baalootada dhexdooda. Tiirada qoryaha waxaa lagu cabbiraa budka xabbadda la dhigo [the Chamber] iyo dhereka dhuunta, waxa ay tiiradu ku shaqeysaa qaacidadii karaarka, fogaanta iyo waqtiga | **v = s/t.**



# 02

## HARTI RIFLE

Qori xabbad kaliyaale ah oo ay Soomaalidu adeegsan jireen. Waxa la farsameeyay hilaaddii qarnigii 18aad, nin la oran Robert Hart Rifle oo Maraykan ahaa baa maamiyay. Dhulalka Soomaalida ayaa uu soo gaaray dhammaadkii qarnigii 19d ee tagay.

## "HARTI* IGU MA TOOGTEEN INTUU, HIISHA II GALO E."

*~ Sayid Maxamed Cabdille Xasan, Darwiish.*

Soomaalida markii la joogo, hubka ugu badan waxa uu ka soo gaaray labadii xulufo ee aan soo sheegnay. Xulufadii Bariga waxaa Soomaalida ka soo gaaray - Masar iyo Ruushka, Masar markii koowaad waxa ay ciidammadii Soomaalida siisay qorigii Xakiimka ahaa, halka Ruushku Soomaalida ku anqariyey qorigii Kaarabiinka ahaa.

Waxaa se hubka ugu xooggan ka soo gaaray Soomaalida saddex qolo oo reer galbeed ah; Maraykan, Ingiriis iyo Talyaanni oo berigii hore la xulufo ahaa reer bariga. qoryaha fudud markii laga soo gudbo Soomaalidu waxa ay tuman jirtay hub dhankooda ka yimid oo ay ka mid ahaayeen seefo, mindiyo, toorrey, warmo, hootooyin, gaashaammo, fallaaro iyo mariido. Sidaas si la mid ah hubka qabow ee Soomaalida ka soo gaaray waxa ay ka yimaadeen - Hindiya, Bakistaan, shaam iyo dalal kale oo reer bari ah.



# 03

## JIRIRGEYRKA

Qori 11 xabbadood qaaadi jiray; Kow iyo Tobanle.

**"JIRIRGEYRKA* NUUR CIISE WAA 'JUUQ' MIDAAN ORANE."**

*~ Ismaaciil Mire Cilmi, Darwiish.*

# 04

## DABOFUR

Qori ka mid ahaa qoryihii lagu dagaalami jiray.

**"Markii dabafurka* laysku riday lagu darbaysiiye."**

*~ Ismaaciil Mire Cilmi, Darwiish.*

**FIIRO!** Waxa kale oo jiray qori la magac ahaa, khasnad lahaa, oo 10 xabbo qaad ahaa; iyo hal xabbo oo dhuunta loo joojiyo. Sagaashanleydii qarnigii tagay ayaa ay Soomaalidu aad u adeegsan jirtay.



**SAWIRKA:** Rifle. National Museum of Amarican History, 1899.

# 05

## KAARABIIN

Kaarabiin/Carpine iyo rayfal waxa ay tilmaamayaan qori hal kaliyaale ah. Kaarabiinku waxa uu ka mid ahaa qoryihii u horreeyay ee Ruushka naga soo gaaray, waa xabbad kaliyaale iskiis isu cabbeeya. Salaan sharafta ayaa ay, markii dambe, ciidamadu u adeegsan jireen. Dowladda Ruushka ayaa ciidanka Soomaaliya ku hubaysay sannadkii 1964'tii. Waxaa kale oo jiray qori la dhaho Beebeshaa [PPSH-1] oo isaga na ay siiyeen isla xilligaas.

**"Adoo kor saaran kaara weyn
Ma kaaga tuuray kaarabiin!*"**

*—Shirib, 1990s.*

# 06

## SHANLE

Waxa uu ka mid ahaa qoryihii ay Soomaalidu haysatay, khasnaddiisa oo shan xabbo qaad ah ayaa loogu magacdaray. Shanle-Boqorna waa la yiraahdaaye. Ciidamada boqortooyadii Baargaal ayaa jeer ku hubaysnaa. Waa buntuq shan xabbadoole ah oo Talyaanigu boqor Cismaan hadiyad ugu keenay si uu Daraawiish isaga celiyo.

*"Shanle-dheere* inuusaan wax tarin tebiya oo geeya."*

*~ Sayid Maxamed Cabdille Xasan.*



## "GIRIINOOFKA* WADA QAATA OO GALA DIFAACIINNA."

~ *INDHACADDE.*

## 08. UUSTAR DHEERE [ULSTER]

Qori ay Soomaalidu jeer ku dagaalami jirtay. Qorigaan oo cabbirkiisu ahaa 10.35 mm waxaa sameeyey oo dalka soo geliyey gumeystihii Ingiriiska. Waxaa aad looga isticmaali jiray gobollada waqooyiga. Qorigaan waxaa la sameeyey 1870'kii waxaa na loo diiwaangeliyey [UPG ama U.V.F].

"Aji iyo Midgaba wuu dilaa uustar* buuxsamaye"
~ *Ayax-Dhowre Maxamed Dagaal.*

## 09. QOOSA DHEERE

Waxaa sida oo kale la dhahaa Rayfal/Remigton Rifles. Dhammaadkii boqolguuradii 19aad ayuu soo galay geyiga Soomaalida. Waa qori kaliyaale u dhaca.

*"Haddii rayfal* ruquraha barkado wuu ridaa madage."*
~ *Lamayaqaan.*

*"Haddaan ruunka u saaro, asaan rayfal* ku dhaado*
*Allay rootis dhaqaaqu, wax ragaadsan miyaa!"*
~ *Sayid Maxamed Cabdille Xasan.*

## 07. GIRINOOF/GRINOV

Waa boobaha Ruushku sanceeyo. Waxa uu u dhigmaa oo la jaal yahay PKM qoriga la yiraahdo ee Soomaalidu u la baxday: Bardalool, Dabamiishaar iyo Dabajeex. Haddii la doono gaadiidka yaryar ayaa la saartaa.

**"GOOLADAHA U GALAY WIILASHII GAARKA LOO DHIGAY GIGTA SABANKA GIRIINOOFKA* IYO GUMACA BAARUUDDA GARIIRKII KA BAXAY LA MOOD GUGACA ROOBAADE."**
~ *Axmed-Subkane Dhaqane Xasan.*



*Uustar, waxaa ku dagaallamay qoladii midnimo doonka ahayd ee Britain iyo goonigoosadkii waqooyiga Ireland. Kooxdii goonigoosadku markii ay heshay qorigaan dowladdii Britain waxa ay bilowday in ay magacii hore ka beddelaan oo ku calaamadiyaan [UPG - Ulster Provisional government], halka kii hore uu ahaa [U.V.F - Ulster Volunteer Force], kooxda goonigoosadka ayaa dowladda dhexe ka soo xadday 4600 qori.*

**Isha:** *http://www.deactivated-guns.co.uk/obsolete-calibre-firearms/an-extremely-rare-ulster-provisional-government-upg-and-ulster-volunteer-force-u-v-f-marked-vetterli-rifle-model-1870/87/prod_6765.html*



# 10

## ALLAMMAAN

Waxa uu ahaa mid ka mid qoriyihii ay Soomaalidu ku diriri jirtay. Waxa uu dalka ka soo galay dowladda Masar, oo ciidammada xoogga dalka Soomaaliya ku hubeysay xilliyadii kala duwanaa. Waqti rasmi ah lama hayo walow la sheego in uu xilligii xorriyad doonka soo galay dalka.

**"ALLAMAAN MARKAAN KUGU RIDANA OODDA WAAD JEBINE"**

*~ Saalax Sayto, G/dhexe.*

# 11

## MAADHIIN YARE

Waa qori ka mid qoryihii ay Daraawiishtu, sida aadka ah gumaystaha ugu la diriri jirtay. Xabbadii la doono in rido dhuunta ayaa loo galin jiray oo khasnad rasaasta kaydisa ma uu lahayn.

**"RAGGAAN SUMACA MAADHIINKA* IYO SAANNADDA U BUUXSHAY."**

*~ Sayid Maxamed Cabdille Xasan, Darwiish.*

**"OO SHAMACA MAADHIINKA* YARI LAG IYO SHII GAARO."**

*~ Sayid Maxamed Cabdille Xasan, Darwiish.*



SAWIRKA: MAADHIIN
Life museum in Ladoga lake station, 1943.

**“MAADHIIN* TURAABKAA KA BADAN TUURLA KAGA QAADNAY.”**

*~ Sayid Maxamed Cabdille Xasan, Darwiish.*

**“MAW QARINNAY MAADHIIN* QACLIYO QABAR AAN LOO SHEEGIN.”**

*~ Sayid Maxamed Cabdille Xasan, Darwiish.*

# 12

## XAKIIM

*Waa qori ka mid ah qoryihii ay Soomaalidu ku diriri jirtay. Waxaa ciidanka Xoogga dalka ku hubeeyey Masaarida, 1960'kii.*

**“WAXAAN KAAGA HOOGSADAY XAKIIM* XEELAD LOO RIDAYE.”**

*~ Lamayaqaan.*

# 13

## LABOMAARRE

*Sanco Faransiis buu ahaa. Jabuuti baa laga keeni jiray iyo, kolkolka qaar, Xabashida oo uu Faransiisku siin jiray. Waxa uu ahaa buntuq yeer weyn oo Daraawiishi aad u haystay.*

**“LABAMAARRE* INUU TIIRSAN YAHAY TEBIYA OO GEEYA”.**

*~ Sayid Maxamed.*



*Qorigaan waxaa CXD Soomaaliyeed ku hubeeyey dowladdii masar, qorigaan ayaa caan ka noqday dagaalkii Soomaali Galbeed iyo kii Israa'iil ee Masar 1956.*



Waa ogogtii 1960'dkii waxaa sawirkaan ka muuqda Gen. Daa'uud, Cabdirashiid C. Sharmaake iyo Siyaad Barre. Waxa aad dhammaan ka arki kartaa CXD oo ku hubaysan qoriga Xakiimka oo ay dowladdii Masar ku hubaysay ciidankii Soomaalida markii Soomaaliya xorriyadda qaadatay.

Sawirka: www.element.envato.com



## 14

## SADDEX MAARRE

Faransiis buu ahaa. Jabuuti baa laga keeni jiray iyo, kolkolka qaar, Xabashida oo uu Faransiisku siin jiray.

**SADDEXMAARRE MAANTUU INDHAHA MILIC KA LEEFSIIYEY WAAYAGII LA MAAMMULAY MARKAY MARO CAD TAAGEENE**

*~ Cali Seenyood Guullane, Mudug*

## 15

## TOBANLE

Qori ka mid ah qoryihii ay Soomaalidu adeegsan jirtay. Sida ku cad magaciisa waxa uu qaadi jiray oo hal bun ka yaraysan jiray qoriga kow iyo tobanlaha la dhaho. Waxa uu ku jiraa, qoryihii ugu fududaa ee ay Soomaalidu ku dagaallami jirtay. Qorigaan waxa ay isku bahyihiin qoryaha khsnadyareyaasha la isku dhaho.

"TUKIHII INTAAN NIMAN U WARAY TOBANLE* SOO QAATAY."

*~ Ismaaciil Mire Cilmi.*

## 16

## SUMUC

Waa qori ka mid ah qoryihii ay Soomaalidu ku dagaal gali jirtay, weliba Daraawiishta.

"ALLOW MARKII SUMUCU* JOW' LEEYAHAY ALLOW BAQE JAANTA YAAN WARIN."

*~ Sayid Maxamed Cabdille Xasan.*

Qoriga sumucu waxa uu Soomaalida dhexdeeda ka noqday caan, ilaa ay gaartay in xabbadda caadiga ah loo aqoonsado SUMUC.

**Nuqul 02 | 2024, November.**
Haddii aad haysid nuqullo ku soo hagaaji: info@biciid.com

# 17

## MAARRE

Waa buntukh sancada Faransiiska ah oo Daraawiishtu aad u haysatay.

### "MAARRAHA* MARKAAN U LA TAGAA MOWDKU KA ADEEGI!"

*~ Sayid Maxamed Cabdille Xasan.*

### "GEBAGABA U TOOXNOO KUFRIGA MAARRE* KAGA TEEDNAY."

*~ Ismaaciil Mire Cilmi.*

### "HIGTA SUMACA MAARRAHA* HANQARA HUNGUNKA BAARUUDDA."

*~ Sayid Maxamed Cabdille Xasan*

### "HADDII SEEFO IYO MAARRE* IYO SUMUC LA II QAATO. CADAAWUHU HADDAY IGU SOLAAN SAKHRA NAAREEDDA. MEESHIYO SAWAAKIMI HADDII LA IGA SEERAARSHO."

*~ Sayid Maxamed Cabdille Xasan.*

Waxa gabayga loo qaadayaa waa qalqaalsamiye
Waxa geela qaaliga ka dhigay qiimuhuu yahaye
Qarfo Hawda waxa loogu wadi waa qatimayaaye
Fardaha qoolka waxa loogu guri qoob ka orodkiiye
Wax loo qaadan gaashaan inuu qaashka celiyaaye
Qadhle awra waxa loo rartaa qaadka iyo xooge
Qarash waxa magliga loogu guray qaab hakuu galo'e
Wax qabiibka loo tumanayaa qaarar gooyada
Lo'da waxa qunbaha loogu luli qaabka dhayda ahe
Waxa qayli loo xidhanayaa qurux asluubeede
Qaraafiicda waxa loo toshaa saydha qodaxeede
Qoys weyn waxaa loo dhistaa qani gobaadeede
Waxa gabadh qaryada loo togtaa guur ha kuu qumo'e
Wax munaafaq loo quudhsadaa qawlka beenta ahe
Waxa qoorta loo jari kufriga qiil ku waajibaye
Waxa qaari loo raadsadaa waa qisada diine
Culimada waxaa loo quweyn waa qob iyo dhowre

Qalin duurre waxa looga tegey waa Qur'aan yariye
Cabdullaahi waxa loo qudh jaray waa qabiil li'iye
Qoon adag hadduu leeyahoon loo quturi haynnin
Qooq laguma toogteen ninkii qaaliga ahaaye
Qarqarada jinaadkii dhurwaa kuma quraacdeene
Intuu qalamsadoo cuno gadaal qaaqda ma hayeene
Qalbigay xumuunsada markaan qaalanow dayo'e
Qab iyo luuli qaabkuu lahaa qeeyadii midabka
Qarqarootintii socodka iyo qalanja laafyoodka
Qun u hadalka qaadhaanka geed quudka bixintiisa
Qasadkii buruudkiyo markay Qaawo ololayso
Qayraamintii waranka iyo qabas kulaylkiisa
Fulay baa qamaadee ninkii qalo la'aantiisa
Goortaan qiyaas fiiriyaa lay qunbiciyaaye
Qori deleb sidiisaa wadnaha lay qadh-qadhiyaane
Anaa quusan waayee bahdii qoonsi malahayne
Huwan qoorigeeda ha xushiyo qaara geedo lehe
Haw xilato qabay xoorleh iyo Qadow karuurkeede
Qol dugsoon intay jiifsadaan qaac ha loo shido'e
Kulligoodba qayl qayl dhaliyo qaraf ha eedeene
Waa qaran maxaa loo lahaa qolada Haaruuna?

*~ Sayid Maxamed C. Xasan, Darwiish.*

Suugaanta colaaddu waxa ay ahaayeen kuwa loo tuman jiray hubka, danaha siyaasadda, is haynta beelaha, kala jiidashada baadkiyo biyaha, aanooyinka, iyo colaadda siyaadeed oo qaamuuska Soomaalida ku soo biirta sannadihii 1540'd, markaas oo ay bilowdeen kala jiidashada deegaannada, kala riixashada iyo deegaamaysiga dhulalka qoomiyadaha.



## FG:

BILAAL QAASIM FIQI

**QEYBTA 02, wax ay ku soo bixi doontaa nuqulka labaad ee Biciid, 2024 haddii Eebbe idmo, taas oo xoogga saari doonta hubkii Soomaalidu samaysan jirtay gaar ahaan hubkii la tumi jiray. Seefihii, warmihii, hootooyinkii, mariiddii, amlayada iwm.**





"

**HIYINNIMO WAX LAGU QAATO IYO, KU HINJI AWR BAA LEH!**

— SAYID MAXAMED CABDILLE XASAN

# GURGUR & GAADIID



**NIN OORI IYO AWR SAN LEH BAA ABAAR KA BAXA**

**— MAAHMAAH**

Guud ahaan geelu waa godol iyo gaadiid. Godol waa dhaqmaada caanahiyo taranta leh dheddigaan ujeedaaye, gaadiidna waa inta rarka iyo hilibka loo xigtaysto labkaan uga socdaaye waana halka qoraalkaygani daarran yahay ammintaan.

Labka oo rati lagu garan ogyahay markuu dhasho waa qurbac markuu ubadnimada ka yara korana qaan baa loogu yeeraa, wuxuu hal gu' iyo wax la jira usoo gaarana waa ba'naan waa markuu ugu garmaamada iyo laacdanka badan yahay, markuu gu'yo ku darsadana qaalin ayaa la yiraahdaa. Aarannimadu waa halka go'aanka looga gaaro oo laba midood ayuu noqon, in la layliyo oo lagu agabbaro hoggaanka, dabarka iyo rarkaba ama in aan la laylyin oo sidaas faraha looga qaado iyagoo la quuddarraynayo inuu baarqab noqdo oon weydnimo lala rabin ama la naaxinayo si loo gato ama loo qasho.

> **Saqda dhexe haddii lagu lalabo socotadii geeddi. Koromada sagaal jiray haddii keeno lagu saydho. Aqalada sintoodii haddii sibirta loo laabo.**
>
> **CUMAR ISTEELLIYE**

Qaalinka marka la laylyo oo rarka lagu bilaabo waa buubaal ama buub oo wax culus lama saaro si uusan u buubin una dheelliyin, hadduu ridana wax u gaarin isaga iyo saabaankaba. Markuu si wacan u rar barto raray ayaa la yiraahdaa waana la dhaansadaa aqalkana inta fudud baa la saaraa marka la guurayo, haddii la gureeyana maqashaa la saaraa, rarayga haddii markii roob da'o geela lagu daro inta kalena la rarto waxaa la yiraahdaa karinle, markuu qooqan yahayna karinta ayaa lagu gartaa inuusan baarqab ahayn. Karinlaha haddii loo baahdo in la daa'furiyo waxaa la siiyaa ciir lagana mayraa dhebida. Karinluhu waxaa jira mar uu qooqo haddane daa'furi waayo ama dadqaad noqdo waana marka badanaa la dhufaano koron ayaana la yiraahdaa. Markii awrka muddo dheer la rarayay ee aqalka intiisa fudud, in maqasha loo gureeyo iyo dhoomaha culus ba uu kasoo gudbo waa gurgurshaa ama madhuudhaa hebed noqday waa hayin aan didmo looga baqayn waa kan kaliyee hoggaankiisa ilmaha xataa lagu aamino, waa biyammadaadshe iyo xaaswalwaal waayeelka socod gabay iyo ilmaba loo gureeyo, waa kan kabaalada laysu dhaafsho, dhigahana lagu xoonsho, udubdhexaadkana inta layskula qabto lagu lammeeyo.

Baarqabku waa awrka aan hoggaan iyo dabartoona aqoon rar iska daaye waana kan awr ugu xoogga badan waxaana lagu gartaa baarkiisoo buuxa, inaysan keeno ka muuqan, dabarna ka muuqan, markuu geela ku jirana waa sheemid badan yahay oo hal baal geela kama raaco, lama daa'furiyo inuu idiis u daa'furo mooyaane, had iyo goorna markuu da'furo geela wuu ka leexdaa oo wuu gooni daaqaa maalinkii dhibic roobeed dhulka taabatana geeliisuu raadsadaa isagoo qooqanna soo galaa ugu danbayna baarfurankaad ku garataa. Si kale awrta gaarka loo hayo een geelna lagu darin lana laylyin baarfuran waa la yiraahdaa. Awrku isagoon geel ku jirin markuu qooqo waxaa la yidaahdaa ban ka qooq.

Dawaad ama tawaadu waa astaan awrta u gaara markay qooqan yihiin ee dhebi sibraha ku gaashimeeyaana dawaaduna waa ku diiqalyaysaa. Waxaa jira awr aan doobta ridin waxaana la yiraahdaa gullaal ama goray ciil oo waa guuxaa uun, waxaa ka ag dhawr oo iyana guuxaas leh awrtaan doobi dillaacsan. Doobinta, miliciyo liska iyo dhebi-dhisadku waa gaydhad iyo car iyo cafaariigsi dagaal.

## HOGGAANKA IYO DABARKA

Hoggaanku waa xarig laba mitir iyo wax la jira dhan ugu yaraan aanse cabbir go'an lahayn. Hoggaanka waxaa awrka looga xiraa surka qaynba sandaalkaa loo suraa oo keeno baa la yiraahdaa, awrka aan aadka u dheerayn ama jigada lehna waa la dacayaa oo miciyaha qalka hoose baa dacayga looga soo qabtaa. Marka la rarayo awrta buubka ahna hoggaanka ayaa jeenyaha iyo surka layskula xiraa qarqarsi baana la yiraahda.

Dabarku waa hoggaan barkiis buu saaweeyaa ama wixii ka yar, awrtana dabarkoodu waa jaadad badan yahay, seetadu waa inaan awrka dhudhummada laysku saarin

**C/RAXMAAN** ODINGA

*Qoraa daneeya arrimaha Soomaalida gaar ahaan sooyaalka, dhaqan iyo afka. Xubin ka tirsan qoreyaasha Biciid.*

*Boorama, Soomaaliland*
*@AxmedSoomaali*

wayse kala duwan tahay oo seeto dheer iyo seeto gaaban baa jidha, mar kale qabbir baa jira oo isna ah in awrka hal jeeni lagu istaajiyo ama labada jeeni laysku saaro, qaabka uu markuu qabbiran yahay awrku u socdana awr-rable ama rable baa la yiraahdaa waana qaab uu awrku labada jeenyood mar wada qaadayo.

## JIGO

Sida aadanuhu u kala lisan yahay, yaa xooluhuna u kala anshi duwan yihiin. Awrta waxaa jira qeyb fool adaygoodu xad dhaaf yahay, kuwo hayin (Baarri) ah, kuwo dhexdhexaad ah iyo kuwo fiig ah. Sswirkaan hoos waxaa kaaga muuqda 3 rati oo xariirsan. Ka la garqaaday ma ahane, labada kale dhab u fiiri gaar ahaan hoggaanka iyo saynta uu ugu maran yahay hoggaanku.

Ratiga ugu dambeeya waa rati jigo leh. Jigadu waa in ratigu hoggaan diid noqdo oo halkii uu ku raaci lahaa surka gadaal u dhidbo, ka dibna dhaqaaqa daaya ama gaabiya sida ka muuqata sawirkaan.
Ratigu in uu jigo yeesho waxaa keena; Bayrta, Gaabiska, dabeecaddiisa canaadka, xanuun, qooqa, iyo dad diidnimadiisa Inta badan, ratiga jigada leh ama gaabiska ah waa loogu hormariyaa si uu san saynta u goys awrta uu ku xariirsan yahay. Margi balaqa awkee hoggaan, lagu makaabbeeyey

## KEENO

Waa hab u gaar ah Soomaalida, kaas sahlaya hoggaansanka awrta, ma jirta cid kale oo la wadaagta Soomaalida qaabkaan quruxda badan, naxariistuna ku dheehan tahay ee awrta loo hoggaansho. Carabtu, waxa ay adeegsataa **DACAY** keli ah, in qalka ama bishinta hoose uun laga xiro ka dibna sidaas lagu hoggaansho.

Halka Soomaalidu, marka hore xarigga hoggaanka ah surka neefka uga xirto, si uu san u siriqsamaynin, ka dibna xarigga lagu soo laabyo sanqaroorka neefka, laabiddaas xarigga ee sanqaroorka lagu soo laabayo waxaa la dhahaa **KEENO**.
Haddii uu ratigu mid jigada (madax adayga) yaqaanna yahay, waxaa loogu daraa **DACAY**, si uu u dheereeyo.

Keenadu waxa ay awrta ugu jirtaa booska Xakamuhu ugu jiro gammaanka ama Fardaha. Qaabka uu hadda ninkan sawirka muuqda samaynayo waxaa la dhahaa **KEENAYN**! oo la micne ah keeno ku xirid.

Waxa aan ku soo afmeerannaa, gabaygii ugu qiimaha badnaa ee laga marsho awrka iyo waxtarkiisa oo uu lahaa abwaan geela ku falnee ee Cumar Xuseen — [**Cumar Isteelliye**].

*Soomaali aradkeedu waa siigo iyo qiiqe*
*Salka lama fadhiyo nimaan lahayn suluxii heemaale*
*Ana waan sahladay waxaan miyiga siinad ku lahaaye*
*Gu' saranseeray roobkoo ku simay Sud iyo Gaaroodi*
*Saqda dhexe haddii lagu lalabo socotadii geeddi*
Koromada sagaal jiray haddii keeno lagu saydho
Aqalada sintoodii haddii sibirta loo laabo
Qarqarsiga haddii lagu sakalo sayncaddaha dhaartay
Heeryada haddii lagu sawiro suunka iyo bayda
Samay markaad tidhaahduu adhxaha sare u qaadaa
Waa wuxuu Ilaahay sandahay saad u eegtaaba'e
Sideed loola iyo tiirki iyo saamihii adari
surradii ubbada teedsan iyo saabka iyo haanta
Intaasaa la wada saarayaa saa'id weheshaaye
Siqiirkii dhalaankana guray uga sameeyaane
Goortii suryada loo furuu sare u boodaaye
Salinkiyo wax lagu caawiyaa suuradaa adag'e
Meeshiyo salaadiyo hadhkuu socod u jeedaa'e
Dadka oo surmiyay bay furaan sool abaar badan e
Dabadeedna seetada xiggtaa la isu saaraaye

Kan xariirta la isugu maree, dabo mushaaxaaya Tallaabada iyo maydaanka socod, ways matalayaan.

“ Cabdullahi M. Dhoodaan

Geela qeybtiisa la rato waxa la dhahaa - Gaadiid. Soomaalida labka geela ayaa rartaan. Godolku waa dheddiggiisa.

— Waxa ay ku kala duwan yihiin godol iyo Gaadiid.




~ **Sawirka:** Christine Young, 2021

### AWR LA HADAL

Aqoonta aadanaha iyo inta xiriirka la lehba waxa ay isku fahmaan af ay ku xiriiraan, isku gartaan kuna kala daw maraan. Aqoonta aadanuhu waxa ay saldhigatay markii ay fahmeen la dhaqanka nooleha kale; sida ayda, dhirta, bisadaha, kuwa ilma aragtayda ah iyo xoolaha oo nolosha aadanaha ku yeeshay samayn taban iyo mid togan inta ba. Si aadanaha iyo xooluhu isu fahmaan waa in la helo erayo mug leh oo ay isku fahmaan. Iyada oo laga faa'iidaysanayo kasmo-nafeedda xoolaha aadanuhu waxa uu xoolaha ku tabobaray erayo kooban oo aan badnayn sida hadallada joogtada ah ee ay aadanuhu ku xiriiraan dhexdooda, si loogu sheego in uu neefku sameeyo fal gaar ah oo markaas aadanuhu ula jeedo sida uu neefku u fahmay! Eebbe ayaa mahadsan arrintaas noo laylyey.

**"Wuxuu [EEBBE] idiin layliyay waxa cirka ku sugan iyo waxa dhulka ku jira oo dhammaantood xaggiisa ay ka ahaadeen; intaa waxay calaamad [cibro qaadasho] u tahay duul fakaraya".**

~ Jaathiya, 13.

Aqoonta duunya la hadalka ee ay aaduhu gaareen waxaa sal u ahaa baahiyaha dadka iyo duunyada isu qabeen tan iyo bilowgii rabbaayadeynta xoolaha. Noloshooda ayaa isku tiirsanayd, mid ba gaar buu ugu baahi qabay kan kale. Nolosha aadanuhu nacfiga duunyaday ku xirnayd, halka nacfiga duunyadu na ku xirnaa dedaalka aadaha.

Si aadanuhu u helo nolol tayo leh waa in uu tayo u yeelo xoolaha uu ka helayo nolosha waa in uu; U sahamiyaa, col ka jiraa, subaaca ka dhiciyaa, hayaamiyaa, daaweeyaa, u saan xulaa si uu helo dhalyo wanaagsan, dhalco iyo dhacdinna ka jiraa si uu san baylaha iyo abaaji u noqon. Sidaas si la mid ah, xooluhu waa in ay aadanaha siiyaan nolosha aadanuhu u baahan yahay, nolosha dadka iyo duunyadu waa isku
qoofalan isku qabbiran.

Tan iyo markii ay suuro gashay in dadka iyo duunyadu isla hadlaan waxaa fududaaday xallinta baahiyaha qaar. Ratigu haddii uu cabaado asaga oo la rarayo micnaheedu waa in uu si uun u diiddan yahay xammilka la saarayo. Haddii ninka ratiga raraya uu dhaho JUUW, micnaheedu waa in ninku doonayo in ratigu fariisto si loo raro. Aqoonta duunya la hadalku waxa ay ku baxdaa dhawr qaab;

**01. Suugaan**
**02. Hummaajin**
**03. Hawraar.**

Sannadkii 2011 ayaa xoolo-yaqaanno reer Holand ahi garteen in haddii lo'da loo shido muusiko ay ka caano badan tahay marka aan loo shidin! Arrintan, Soomaalidu waxa ay ogayd weligeed iyo waaqeed, tan iyo intii xoolaha ba ay la olkameen una faarumaysteen dhaqashadooda. Haddii aysan u heesin marka ay waraabinayaan, marka

Geela qeybtiisa la rato waxa la dhahaa - **Gaadiid**. Soomaalida labka geela ayaa rartaan. **Godolku** waa dheddiggiisa.

~ Waa ku kala duwan yihiin godol & Gaadiid?

01.
**"Awr kala guurta ma xumee, uur kala guraa xun".**

02.
**"Awr xammil waa qaadaa, balse xarig xun ma qaado".**

03.
**"Dad xeer baa xira, ratina xarig".**

ay dheelmayaan, marka ay daajinayaan, marka rarayaan iyo marka ay hayaaminayaan ba way adkayd in ay si fudud ku gaaraan dantooda. Iyaga oo ka faa'iidaysanaya baahida kasmo-nafeed (Psychology) waxa ay soo dejiyeen in af ay kula xiriiraan xoolaha.

Salsalka, hees-hawleedyada iyo oojintu waa hababka suugaaneed ee lagu la xiriiro xoolaha.

Humaajintu - waa bajin, weecin ama ul/gacan u taagid si loo celiyo, cayriyo, loo kiciyo, loo kexeeyo ama loo dhaqaajiyo ba. Halka Hawraartu tahay hadallo ku lammaan ama la socda humaajinta ama ba iskood u taagan ba. Badi se waxaa la socda fal si hawraartaasi u dhaqan gasho. Bal aan kor istaagno hawraaro gaar ah oo loo adeegsado awrta xilliyo kala duwan:

**Juw/Juu':** Fariiso. Marka ratiga la farsiinayo si loo raro ama rarka looga dhigo.

**Du':** Leexo. Waxa ay u soo dhawdahay marar badanna lagu beddelaa - Dooh.

**Joo':** Istaag. Marka la doonayo in ratiga la istaajiyo, gaar ahaan marka aad kaxaynasid oo gadaal socotid oo aadan gaari karin.

**Dooh:** Hako. Dooh, waa erayo loo adeegsado meelo badan gaar sida marka ay awrtu ariga ku durduriyaan, marka ay diddo, marka joojinayo, maka la hakinayo, marka la celinayo iyo marka
la kala celinayo inta ba.

**So':** Soo dhaweyso. Marka la rabo in la seeteeyo ama la qabbiro ama la caymiyo, si loo soo dhaweeyo, isu toosiyo, ama lugaha isugu soo dhaweeyo. Meelaha qaarkoodna waxaa la dhahaa - Dhaweyso. Meelaha qaarkoodna waxaa laga dhahaa - Dhusu. Sida oo kale waxaa la micno ah - Dib. Sida oo kale, waxaa la adeegsadaa - Uso.

**Dhigo':** Soo dhigo surka. Si loo keeneeyo, waxaa la dhahaa surka soo dhigo. Gobollada qaarno waxaa lagu celceliyaa isla erayga *Keeno, keeno, keeno* [...].

**Samay:** is toosi. Ratigu marka uu fadhiyo, bogga iyo beerka ba waxa uu ku ballaarshaa dhulka, hadda ba ratiga si loo caynsho waa in uu kor u qaado bogga, si uu u qaada na waa in aad u sheegtid oo dhahdid - Samay oo la mid ah - Samayso. Halka gobollo kale laga isticmaalo Bannayso. Gobollada qaarkood labada xaraf ee u dambeeya baa laga soo qaataa - SO'.

**Sirig:** Dil. Marka labo rati la isku dirayo, inta midkood dabada laga juqeeyo baa la raaciyaa erayga SIRIG. Halka gobollada qaarkood laga adeegsado - Hirgo. Halka meelaha qaarkoodna laga dhao - **Qabo**.

**Oho:** Soo dhaqaaq. Marka la garqaadayo si loo dhaqaajiyo. Sida oo kale marka ratigu saangaabiyo adna aad doonaysid in uu dheereeyo waa in aad dhahdid oho, oho, oho [...] ama Soco ama Sooqaado.

**Tuuh:** Fuul. Marka ritiga hasha loo haynayo. Gobollada qaarkoodna waxaa la adeegsadaa erayga JUUH. Halka gobollada qaarkood laga adeegsado - taf, taf, [...].

**Joo':** Istaag. Marka awrta galaha la keenayo, si loo istaajiyo, waxaa la dhahaa Joo'.

**Burrrrrr:** hab qoraaleedka ugu soo dhawi waa midkaan, balse waxaa laga hadalsiinayaa bishimaha halka qoraalku carrabka ka hadalsiinayo.

**Fogayso:** Marka aad seetada u kala fogaynasid balse uu lugaha isu soo dhaweeyo, si loo kala fogeeyo waxaa la dhahaa -Fogayso.

## UUN LA HADAL!

*AQOONTA sahashay in aadanuhu la xiriiraan xoolaha oo aan lahayn hadaaq ay wadaagaan aadanaha waxaa la dhahaa "Uun la hadal", aqoontaas waxaa soo gasha in aadanuhu la xiriiro noole ka baxsan xudduudda aadanaha. In badan waa aad maqashay "Hebel, waa waraabe la hadal", ama "Hebel waa shimbiro daaq", dhammaan dadkaasi waxa ay la hadlaan noole ka baxsan xuduudda aadanaha. Aqoontaasi waxa ay sahashay, in aadanuhu la xiriiro xoolaha uu dhaqanayo.*

Asaga oo sagaal sano jiroo saadda geri yeeshay,
Oo wixii la saaraba inuu sida ad moodeynin,
Waxba kuma simeen awr ninkii sal u yaqaanaaye
~ Cabdi Muxummud Aw Magan, Galayax.

Cabdi Muxummed Aw Magan - [Cabdi Galayx], waxa uu noo sheegay in awrku xilliga uu ugu xoogga badan yahay ay tahay marka uu 9 sano jirsado.

SAWIRKA: NICHOLE SOBECKI | National Geography

# GAAL GOHAW GURBI DHALE

~ MAAHMAAH

Geel go'ayaa awr buu dhalaa. Haddii geel la badsanayo, waxaa la tarmiyaa dheddigga.

Soomaalida dhexdeeda waxaa ka jira xeer aan qornayn oo ah kan ugu muhiimsan ee xoolaha lagu dhaqo kaas oo haddii ay awood rabbaani ah u lahaan lahaayeen ay sidii sa u fulin lahaayeen kaas oo ah in geeloodu nirgo u dhalo kal walba, Balse, tai waa cagsi, aadanaha waxaa ku dhalasho badan dheddigga halka xoolaha sida la aamminsan yahay ay ku badan yihiin labku. Ratiga nirga dhalka badan waa la kala ergistaa oo qoor ahaan baa loo kala qaataa. Waxa aad ka garan kartaa maahmaahdaan Maayga ah; "Gaal gohaw, gurbi dhale"., Geel go'ay awr buu dhalaa.



**Dig:** Ubadka yaryar marka la xereynayo ama halaha laga dhex soocayo ayaa la adeegsadaa.

**Dig.** Waxaa jirta maahmaah la dhaho - "Digna dhaaf, doohna ma gaarin". Oo lagu foorjeeyo qofka miyiga na ka soo tegay, magaala na aan gaarin, si kale haddii loo dhaho reer tuulaad.

**Dud:** Marka aad doonaysid in aad dhaqaajiso adiga oo kaxaynaya oo ka dambeeya.
Sin: Ratiga, marka la rarayo in badanna uu fadhiyo wuu daalaa, gees gees buu na isu dhigaa, si loo toosiyo waxaa lagu dhahaa - Sin, oo ma micne ah isisin ama istoosi.

**Isugee:** Marka la qabbirayo ratiga, lugu na u kala fogyihiin waxaa ku dhahaa - isisaar ama isugee si uu isugu soo dhaweeyo ama isusaaro lugaha.

**Karabo:** Ratiga oo iska daaqaya marka aad rabtid intaad kaxaysid in aad rati kale ku soo dirtid, iskaraw/karabo ayaad ku dhahaysaa, markaas buu bilaabayaa in uu shuuqo ama doobbiyo. War-ka-tag: Marka ratiga la doonayo in laga bajiyo, ama rati kale loo bajiyo.

**Sug:** Marka ratiga aad kaxaynasid oo uu galaha dhaafo asna uu dheeraynayo oo aad doonaysid in uu gaabiyo, waa in aad dhahdid - Sug, sug, sug [...]. Halka meelaha qaarkoodna laga dhaho - Sig, sig, sig [...].

Awr la hadalku keliya kuma xirna hawraarta waxaa se jirta suugaan nooc badan leh oo lagu la hadlo awrta qeybaheeda kala duwan - Buub ahaayaa, raray tabargal ah noqoyaa, hayin dirgada joogyaa, ama layli haama laaya noqoyaa waxa ay leeyihiin hab suugaaneed oo loogu weriyo xogta loo sheegayo. Hannaan suugaanneeda awrta lagula hadlo marka la rarayo waxaa loo yaqaan - Salsal.

Awrka hayin noqda, ee badanaa ah mid dhawr sano la rarayey, waxa la saaraa oo lagu aaminaa dadka jilicsan (Carruur iyo Cirroolaba), maqasha adhiga iyo alaabada guriga ee jiljilicsan ee gurgurka loo yaqaan. Waa lagu dhaamiyaa oo waxa la saaraa haamaha waaweyn ee biyahooda mudda dheer la shafeecsado. Awrkaas hayinka ahi waa ka gaadiid loogu jecel yahay ee ninka lihi, bixin iyo qalid toona aanu u quudhin. Waxana si wacan oo kalsooni ku jirto loo adeegsadaa kolkii la guuro, oo dad, duunyo iyo agabba isaga ayaa lagu aaminaa. Waa lagu dhaansadaa oo dhul fog ayuu biyo ka soo qaadaa isaga oo sida haamaha waaweyn oo buuxa, oo muddo toddobaad ah uu la soconayey isaga oo qatan. Socodkaas dheer iyo gaajada iyo oonkana wuu u adkeystaa, oo si nabadgelyo ah ayuu ku fuliyaa adeeggaas.

Awrtu waxa ay martaa heer nololeed ku suntan yihiin ilaa laga , waxa ay ka kooban tahay dhawr qeybood oo aan u kala sooci karno:

01. **Kagoys:** Marka hasha laga gooyo.
02. **Qurbac:** Inta u dhaxaysa 2 - 4 sano.
03. **Qaalin [-ka]:** Qurbac xoogaystay 5+ sano.
04. **Layli:** Marka la soo qabto si loo xarig baro.
05. **Buub:** Waa xarig bartay laakiin weli lama qabso rar.
06. **Raray:** Marka uu buubka ka baxo.
07. **Hayin:** Marka in muddo badan la rarto ratiga.
08. **Madhuudhaa:** Hayinnimuu, xoog ku darsaday.
09. **Caddaysin:** Rati aan la rarin, inta badan.
10. **Karinle:** Rati kasta oo la rarto.
11. **Koron:** Rartiga la dhufaanay.
12. **Qoor:** Rati aan la dhufaanin.
113. **Baarqab:** Ratiga geela lagu daro.
14. **Duq:** Rati gaboobay, oo aan cidina raran.

Ratiga caddaysinka ah, inta badan waxaa lagu xiriirshaa arta kale isaga oo aan rarnayn. In ratiga caddaysin laga dhigo waxaa keenta dhawr sababoob, tan koowaad oo maankaaga ku soo degaysa waa in loo waayey wax la saaro, midda xigta waa in xanuun looga reebay rarka, kiisiina loo kala qeybiyey arta kale. Kuwa kale waa lexejeclo, dhaawac, gaadiidsiin, iyo hayaamin. Waxaa se inta badan ugu mudan tan xanuunka, haddii ratiga ay ku dhacan labo xanuun: Shafgoys iyo garbab, waxa uu noqdaa ratigaas mid heeryada laga daysto. Labadaas keli ah ma ahane, waxaa jira kara xanuunno badan oo ay ka mid yihiin uhda, legedka, shimbirta, dhuldhaska, roorka iyo xanuunno kale oo badan.

Maxaa ka xusuusataa agabka awrta lagu raro ee aqalkeenna Soomaaliga?



*Awrta hayinka ah inta badan reer miyigu waxa ay ku raraan maqasha, waayeelka socon waaya, alaabta jabaysa, iyo carruurta.*



# SALSALKA AWRTA

**Hobow, helelli hoobow**
**Hobow, helelli hoobow**

**Haddaan dheelli kuu raro,**
**iyo dhoomo laallaad,**
**igu dhiibis baad tahay,**
**Oo waadan ii dhalan.**

QEEXID | AF AHAAN

Af ahaan la waxa uu la bog yahay Lallabid, dedejin, fududayn, Sal dhabaababadin, faradeey, dhaqso iyo in shaqo loo qabto si degdeg ah.

QEEXID | MAANSUUR, 1980

Salsal[1]: Hees awrta loogu heeso.
Salsal[2]: Caano yar oo garoor ah, kuwaas oo lagu daro dhayda si degdeg loogu garooriyo, Khamiir.
Salsalid[3]: Hannaanka u heesidda awrta.

**SALSAL:** Af ahaan la waxa uu la bog yahay Lallabid, dedejin, fududayn, Sal dhabaababadin, faradeey, dhaqso iyo in shaqo loo qabto si degdeg ah. Maaddaama lagu dhaqsanayo lana boobayo raridda agabka guriga waxaa la qaatay in qeyb suugaaneed gaar ah laga dhigo kolka awrka la rarayo erayada suugaaneed ee lagu hadlayo. Waa qeyb ka mid ah heesaha, gaar ahaan hees hawleedyada, kuwooda gaagaaban.

Sawirka: pixelbay.com





Awr la hadalku keliya kuma xirna hawraarta waxaa se jirta suugaan nooc badan leh oo lagu la hadlo awrta qeybaheeda kala duwan - Buub ahaayaa, raray tabargal ah noqoyaa, hayin dirgada joogyaa, ama layli haama laaya noqoyaa waxa ay leeyihiin hab suugaaneed oo loogu weriyo xogta loo sheegayo. Hannaan suugaanneeda awrta lagula hadlo marka la rarayo waxaa loo yaqaan - Salsal.

**Salsal**: af ahaan la waxa uu la bog yahay lallabid, dedejin, fududayn, sal dhabaabadin, iyo in shaqo loo qabto si degdeg ah. Maaddaama lagu dhaqsanayo lana boobayo raridda agabka. Salsalka iyo awrta guriga waxaa la qaatay in qeyb suugaaneed gaar ah laga dhigo kolka awrka la rarayo erayada suugaaneed ee lagu hadlayo. Waa qeyb ka mid ah heesaha, gaar ahaan hees hawleedyada, kuwooda gaagaaban. Marka ratiga la soo arrumo, lana bilaabo in heeryada lagu heenseeyo, yaa wixii rag joogay ku giisayaan, erayo dhextaal iyo bilow u ah salsalka;

**Hobow, helelli hoobow**
**Hobow, helelli hoobow**
....

Mar haddii uu san haysan wiil gurgurka iyo guriga u qaada oo abaar ka rara sida ratiga waa in uu ammaan huwiyaa, una ballan qaado arrimo badan sida dadka.

Waa kan leh;

## BACADLE YAA BUN KUU DUBA,
## BAFTO KUU HAGOOJIYA,
## BILCAAN KUU NIKAAXIYA,
## WAN BARAARA KUU QALA.

Mar kale waa kan u ballan qaadaya, in uu si hagaagsan u rarayo, kaga na dhabaynaya maahmaahdii ahayd - "Awr xammil badan waa qaadaa, xarig xun se ma qaado".

Waa kan leh;

**Haddaan dheelli kuu raro,**
**Iyo dhoomo laallaad,**
**Igu dhiibis baad tahay,**
**Oo waadan ii dhalan.**

Mar kale waa isaga ammaan iyo duco la kor jooga isaga oo kor u sida dhoon biyeysan , duco aan qaarnayn, duco dhan oo ludda iyo laabta ka soo duxday.

**Waqaan shalow lagaa mudin,**
**Shillal dheer laguu dhigin,**
**Habro kugu shaloombiyin.**

Mar kale isaga oo u sheegaya in uu ku nastay hanfarkii iyo hawshii adduun, ratigaas daraaddiis waa kan ku maaweelinaya erayo dhegtiis ku diirsanayso.

Waa kan leh;

**Habeenkii lay dhalay,**
**Adna lagu dhaqaaleeyaa,**
**Dhib layska meel dhigay.**

Heeryaduu hab ku siiyey, karbaashkii ama kebeddii marka uu saaray buu hararadii ama dirintii u dabo marshay, intaas oo dhan ma uu san dareemine waa yeeleeyey, dabageliskii iyo baydduu ku u jiiday, si uu san u cayn wareeginna garkuu u soo jiiday - So' inta uu yeri buu samaydii ama caynkii ku soo xallaqay, markaas buu bilaabay in uu cabaado. Wax ba isma ma uu san dhibine, inta uu eraydiisii dhextaasha ahaa cod deggan ku yiri buu u sheegay in dhibka uu la dareemayo.

Waa kan leh;

**Waa kaa cabaadaayee**
**Ma cad baa u ceeriin?**
**Sida caynku kuu gubaa**
**Cagtu ii daloshaa!**

Si loo ogeysiiyo deegaanka iyo dalka loo socdo, hiyiga na uu u gashado buu u weydiinayaa in uu halkaas xiisaynayo iyo in kale?

Waa kan leh;

**Bacadlow bad loo guuryee**
**Barbaraari maku hayaa?**

Marka colaad laga ambanayo, baa loo sheegayaa in colaadi jirtee uu saanta soo boobo;

Waa kan leh;

**Raggayaga raggii qabayeey**
**MIyaa laga rooray Riiraash?**

Keliya awrta lalama hadlee waa goob waano oo barbaarta awrta wax ka raraysaa lagu jarbeebshaa.

Waa kan leh;

Ninkii sino u dheelmaday
Ama soof agoomeed
Sibiq-sibiq isaga cunay
Sakaraadka aakhrio
Wax baa lala sugaayaa!

Mar kale isaga oo islaantiisa ku xamanaya dabeecado areebonnimo ah waa kan ku dhego jaaqaya, xusaya na dabeecadahaas silloon;

Waa kan leh;

**"Bacadlow baali naagood**
**Bar ma kaaga sheegaa?**
**Mise wayga badisaa?**
**Ariga bar maqan yahay**
**Aqalkaa bilbiliq badan**
**Carruurtaa baroor badan**
**Afkay budo ku leedahay".**

Marka uu rarka ku dhammeeyo buu soo kor istaagayaa ratigii gurgurshaaga ahaa, kolkaas buu ogaysiinayaa in guruda loo sameeyey ay u harsan yihiin carruurtii guriga.

Waa kan leh;

**Irmaan golongolaayiyo,**
**Goldheer gabari nuugtiyo,**
**Gabannaa guriga kuu jira.**

Ninka reer miyiga ah, waxa ugu adag ee uu maareeyo waa baad iyo biyo u hellidda ubadka aan aabbow mooyee, eray kale aqoon. Marka uu culays ka dareemo dhankooda waxa uu kula soo ciiraa ratigii, waa na kan leh;

**Oonleydaad ogeydeen,**
**Aagaan laysa siinaynin,**
**Yaa aabbow leyga leeyahay.**

Oon dheereyaasha oo ay ku jiraan guulka iyo cokanguulku, waa hawkar aan ka dhicin hayaanka. Reerku marka uu ka fogyahay ceelka, waa ceelka loo sii guulaa, isaga oo muujinaya dhibka ratigiisa haysto oo uu ka waayey socodkii uu rabay buu ku leeyahay;

**Shaluu taagan ahaa,**
**Xaluu tiirka ku xidhnaa,**
**Waa tagoogo casoobay,**
**Oo dhulkuu taakinaayaa!**

Xilliyada abaarta iyo hawkarku jiraan xoolahaoo dhammi waa ildaran jilicsan, waxaa se aan abaartu karin geela gaar ahaan awrta. Iyaga oo lagu guurayo oo la dhaansanayo yaa kuriskoodu dhoomo yahay. **Maalinguur** - Subax ilaa maqrib. **Minqaad** - Maalinguur barkiis.

*Toban hore hal baa dilayeey!*
*Hammada mawti baa dilayeey*
***Hayinna** aqal xun baa dilay*
*Hadalka sii dheh baa dilayeey*
*Hilibkana hunguraan laayee*
*Geelana tuurgahaa jira ee*
*Alla hanka taagtay baa dilayeey*
*Hablaha nimaan ku toosnayneey*
*Alla casar is humbulayeey*
*Runtii ku hagoogtay labo suufeey*
*Alla haasaawiyaa dilayeey*
*Heellana nimaan faceed baraneey*
*Sidayada u tirinayneey*
*Midka tororoglaa dilayeey.*

***~ Heello, Ciyaar.***



*Ubbo, waylaalis, lool, qobtol/abjaad, ilxir, xargo, dhigo, saamo, dermo, raro/hararo, duubashi, karbaash, abxado, kolayo, doobiyo, dheriyo, maw, weel, tebbedo, fandhaallo, haamo, haamo, weymbaarro, sibraarro, saytuuxyo, qarbadyo, qabaallo, iyo gurgurka hoose intu ba waa agabka iyo alaabta lagu raro awrta xilli gurgursiga. 90% ka mid ah agabkaan waxaa sameeyo dumarka.*

## GUUL

*Haddii carshintu ka fogaato ceelka, waxaa lagu khasbanaadaa in laga guuro deegaanka u dhow ceelka. Mar walba na waxaa hubaal ah in biyo iyo safarba loo baahanyahay. Masaafada u dhaxaysa reerka iyo ceelka waxaa lagu cabbiraa minqaad ama guul/dhax, inta badan xoolaha iyo safartu isku socod ma ahan, waxaa dhacda in safartu u sii dhaxdo ceelka labo habeen labo kale na ka soo dhaxdo, sidaas awgeed waxaa la dhahayaa - xeradani waa labo guul, ama afar minqaad. Dhexda lagu sii/soo dhaxayo waxaa loo yaqaan **guul**. Intii ratigu ka daalayo oo lagu nasiya na waxaa la dhahaa - **Minqaad**.*

*Waxaa xoolaha lagu sii xareeyaa xero loo yaqaanno - xeroguul, marka ay xooluhu ceelka u sii socdaan waxaa la dhahaa - Guul oomman, marka ay soo cabbaar ee dhexda ku guulaanna waxaa la dhahaa - Guul cokan.*

***Guul oomman** xeroo soogashee*
*Golof iyo hal gudhan godoshee*
*Godontoo galgacal Gooni kuuxidhee*
*Gugoo da'ay alahayoow*
*Gamashiii alahayoooow*
*Gaadhi mayside*
*Waxaa kula gudboon*
*Inaad ka gaabsataayoo*
*Nafta samir ugaysee*
*Nafta samir ugaysee*

*~ Maxamed Cali Kaariye, 1973. Heestaan, waxaa wada qaaday labada fannaan ee Tubeec iyo Maandeeq, waxa ayna soo baxday sannadkii 1973.*



## AFARREEY NIN DHAANSADAY AFAR WIIL ADEEGSADAY AFO YAW ISLAAMOO AFKA LOO DHAWEEYAA!

~ Salsal, hees.

Nolosha miyigu waa midda ugu adag dhanka dhaqaalka, waxa ay ku tiirsan tahay istaakulayn, is ogaal iyo tabantaabo gacal. Nin walba waxa uu ku taamaa in uu helo ciidanka ugu faraha weyn, dhan gurgur iyo gurbood ba. Nin baa la weyddiiyey maxaa u guursan weyday, markaas buu ku jawaabay, heestaan noqotay salsalka awrta, oo ku sheegayo in uu goobayo nin awr badan leh, ragna dhalay berri dirirta iyo dacdarrada ka xigsada. Waa qaacido nololeed bulsho oo laga dheehan karo qaabkii ay awrtu saamaynta ugu lahayd hab nololeedka bulshada. "Abaar waxaa ka baxa - nin awr iyo afo san leh". Waa na inta heestani sheegayso.

# GAALA GAL GAROOR KA SHEEN

~ MAAHMAAH

*GEEL GAROOR LAGAMA LISO*. Waa qaacido weyn oo sheegaysa in aan geela ciir laga lulan. Ninkii aan aqoon u lahayn maahmaahdaan wuxuu ku lug go'i doonaa sidii uu caano geel u lulan lahaa.

Ninkaan ku salsalay, lahjadda Maaygu, waxa uu ratigiisa kula dardaarmayaa in uu adkaysi yeeshay maaddaama ay labadoodu ba u adeegayaa dhallaan dhibaataysan.

Wuxuu yiri;

**Dhuubow,**
Dhuldheera injeedne,
Dhaanqa ennaa,
Dhillaa isla dhalniyaa,
Dhibbood haaye,
Dhafar i dhidhamis,
Dhinniggoo isku dhignooy.

Awrta la rarto, inta badan geela intiisa kale ee qaanka iyo qaalinweynta ah waa laga reebaa, oo waxa ay har iyo habeen ku jaanxiran yihiin maxasta [Dumarka, ariga, waayeelka iyo carruurta] si markii loo baahda ba loo soo garqabto. Awrta, galab walba waa la soo dheelmaa haddii aysan hadimmo/gafar ahayn. Kurayada waxaraha raaca ama waayeelka reerka ayaa galabtii inta seetada ama dabarrada ka soo furaan u soo dheelma galahooda oo loo yaqaan - Gala-awr. Inta badan xero looma dhigo awrta, gaar ahaan marka uusan aaggu dilaa subaaca dilaaga ah lahayn. Balse, haddii aaggu leeyahay bahallada sare, waxaa loo dhigaa xero hadba le'eg khatarta degsiimada ka jirta.

Awrta, habeenkii marka la keeno galaha waa la qabbiraa [*labada jeeni baa inta la isu keeno xarig lagu dhuujiyaa*], subaxdii na waa la seeteeyaa [*Jeenyahaa loo kala durkiyaa*], kuwa baxsadka ah ama buubka ah ee laga cabsi qabo in la qaban waayo ama la soo dheelmi waayo, ayaga suulashaa loo kala duwaan ama ba qabbarkiisaa loo daayaa waxaa na loo yaqaannaa - Qabbir-ku-daaq.

*Ariguu la daaqaa ma tago ebedki laagtaase*
*linigii ma galo togagga iyo ayda bahalaade*
*Markii uu baxsado awr kalaa la ag goobaaye*
*Ifka waxaan u jecelahay intaan aagga uga jeedo!*
***~ Salaad Dooyo, Mudug.***

Marka roobku da'o oo ay biyuhu harqiyaan cid walba iyo cood walba, baryo Eebbe baa gacmaha loo taagaa, markaas baa lagu yoto'aa; "***Eebbow, araraha iyo awra daaqeenka***", Eebbe ha naga fogayn, naga na naga kor leexi, oo noogu hoori awra daaqeenka.



# RAKUUB AWR

ASKAR CALI

Geyi kaa fog meel dheer marbay kaa gashaa daniye,
Inkastaad gaadiidkiyo hadhkiyo guure soconayso,
Oo aanad geed qudha hadhgelin ama gabbaad seexan,
Gabbal-dhiciyo waabberi haddii aad gucle uroorto,
Halkii aanad dhawr godol orod ku gaadhaynin,
Mid loo gaatay fuullaan markaad keeno soo geliso,
Eeaadgarbahakagadhacdeecidhibtagaadhsiiso,
Waa gelin intuu kula socdaa aad ku gudubtaaye,
Rabbina gumagaabsho e nin raga quruxdi waa geele.

# BACAD JIIR

Bacadlaha nin guuraaba wuu garan yaqaannaaye
Geeddiga markii lagu malmalo oo garka u qaado
Giddigood ba haamaha markii lagu gurada loo saaro
Gurgur iyo dhigoodkiyo markii gaashi llagu boobo
Isagaa ku gaardinahayoon cidina gaarayne
Ciidduu ka gugurtaa siduu baal gudayaaye
~ Cali Makaar, Ximan.

Soomaalida oo ah dad islaamka ku yoto'a, waxyaabaha ay aamminsan yihiin waxaa ka mid ah in ay jirto il iyo illaaco lala eegto awrta, afkoo lagu mudo, iyo eray la raacsho ba waa laga ilaashaa. Dumarku, waxa ay sameeyaan agabta guriga, awrta buubka ahina waa burburisaa, kolkaasay habaar iyo hadal la eegataa, ninkii lahaa baa kolkaas ku yiri;

**WAA AGOON KORISOO,**
**WAA ADDUUNYO TIIRKEED,**
**EREYGA NAAGOOD IYO,**
**ISHA AADANOW DARANOO,**
**WAA LAGA ILAASHAA!**



***CABDI-GALAYAX** — Waxa uu ahaa abwaankii ugu gabayada badnaa ee dhanka geela, gaar ahaan ammaantiisa iyo dhaqashadiisa.*

Mar waa qurbac aan xarig la surin, mara waa layli, mar waa buub, mar waa karinle, mar waa hayin marna waa Saaddagerile madhuudhaa ah oo haddii aqalka dhan la saaro aan juuceey aqoon. Waa sagaal jir, marka uu ugu qaalisan yahay ratigu, waa marka la kala siisto halaha dhawr ka ah. Waxaa taas noo tilmaamaya abwaankii geela ku falnaa - Cabdi Galayax.

Wuxuu yiri;

*Asaga oo sagaal sano jiroo saadda geri yeeshay,*
*Oo wixii la saara ba inuu sida aad moodeynin,*
*Waxba kuma simeen awr ninkii sal u yaqaanaaye,*
*Markabka nimanka Soomaali Suubey adigaa leh!*
*~ Cabdi Muxummad Aw Magan "Cabdi Galayax".*



Maahmaahdaan oo ah kuwa ugu caansan kuwa Soomaalidu, waxa ay ku jirtaa maahmaahyada qaddiimiga ah ee edbinta ubadka. Markii la arko curadka reerka oo leelleel ah, waxa ay waalidku ku soo qabsadaa maahmaahdaan iyga oo leh;

**AWRBA AWRKA KA HORREEYA SAANQAADKIISUU LEEYAHAY!**

Sawirka: www.pixabay.com.



# CIMILO WAREEN

Aadane la aragyaa, dhib la arag! Isbeddel cimilo adduunkaan kama jiree, cilmilo weerar baa ka jira. Aadanuhu weerarkii ugu weynaa ayaa uu ku qaaday cimilada waxa uuna ku wareemay lakabyadii iyo dahaarradii lulanka sare ee hawada. Haddii aad u haysatid in dagaalkii ugu weynaa uu ahaa kii la isu adeegsaday qunbuladaha nuyugleerka, waa aad mala habawday! Waxaa kaa hoos baxay mid soo taxnaa tan iyo maalintii aadane la uumay. Qof la dilo, waxaa ka daran cimilo la dilo! Haddii cimiladu dhimato qof walba oo adduunkaan ku nool markii uu neefsan waayo marinnada hawada na ay buuxiso qiiq ka soo butaacay dhuumaha warshadaha waaweyn ama ay inta kale laayaan abaaro aan kicin, waxa aad ogaanaysaa in cimilo wareenku yahay dagaalkii ugu weynaa ee aadane qaado, tan iyo uumankiisii.



Ma jiro ISBEDDEL CIMILO, balse waxaa jira - CIMILO WAREEN! Isbeddel, waxaa aad uga habboonayd CIMILO BEDDEL, sababta oo ah cimiladu haddii ay ahaan lahayd sidii Eebbe u uumay weligeed isma beddesheen, balse, taas beddelkeed waxaa bannaanka uga yimid xoogag ku khasbay in ay cimilada iyo nooleyaasha dhulka ku uumani ay u dhaqmaan qaab ka geddisan sidii loogu talo galay. Aadanuhu markii uu qiiqiyey warshado waaweyn oo dhakada sare ka siiddaynaya kaarboon labo-ogsayd, kaas oo biirinaya kii aadanuhu sanka ka fatahayey, waxa ay ugu sii dareen gubaalka shay'yo kala duwan - dab la shido, duugowga walxaha, meyd-garaaca dhirta, qurminta iyo qashinka aag walba quban, intu ba waa aadane falaadkiis. Hadda ba ma jirto cimilo isbeddeshaye, waxaa jirta cimilo la weeraray weli na lagu hayo weerarkii iyo kii ka sii daran. Waxa iman doonta maalin lagu dagaallamo cimilada lafteeda oo ay noqoto hubka waxgumaada! Xalka keliya ee loo hayo waa in aadanuhu ka tanaasulo horumarka ku dhisan qiiqinta $CO_2$, dantu na waa in loo laaban doono halkii shalay laga yimid.

Cimilo Wareenku, waxa uu noqon doonaa hubka ugu dambeeya ee aadanuhu isu adeegsan doono. Maalinta dhirta la dhammaysto, hawadu na qarsoonto qiiq aawadiis, mid uu arki waayo kan kale uuna neefsan waayo, xaggee loo guurayaa! Maanta waxa aan u joognaa in ay adduunka ka dhacayaan dhulgariirro tiro beel ah, sidbashada dhulka iyo hawada sumeysan. Waxa aad u soo joogtay in dhulgariirkii ugu weynaa uu ka dhacay waddanka Haiti, dhawaa na waxa aad arkaysay dhulgariir kale oo ka dhacay Turkiye, kuwa kale oo aan aabboyeelinna waa ay dhici doonaan! Waa aad maqashay kala xadididda roobabka, waa aad maqashay, dejinta roobka, waa aad maqashay warshadaynta iyo webiyada guriya, waa aad maqashay warka dhiillada leh ee weerarka cimilada! Maanta waxa aan ku sugannahay qarka god dheer oo uu aadanuhu ku dhici doono, kaas oo mingaafka iyo majarafadaha lagu qoday ay yihiin shaqooyinka cimilo wareenka ee uu aadanuhu ku foognaa tan iyo maalintii la taagay.

Muu ahaado, mid sida xoolaha oo kale quudkiisa iska doonta oo aan ku fekerin xirribihii iyo xeeladihii uu ku wareemi lahaa cimilada nagu dahaaran ee adduunkaan. Waad u joogtaa abaaraha dalkeenna kor hoganaya, oo sugaya maalin uun in ay ku soo da'aan, mana beeraysid hal geed ah in aad jartid mooyaane! Waa aan kula yaabay aadane!



# MAGAALAYN

Dalkeenna waxaa ku nool duunyo aad u badan, in ka badan 51% geela caalamku waxaa haysata Soomaalida kaas oo tiradiisu u dhexeyso 8 — 11 milyan oo neef. Haka sheekayn ariga cadka, idaha gorodda madow, lo'da, dameeraha iyo ugaadha jaadgoonida ah ee dalkeenna ku nool. Dadku waa noolaha keliya ee yaqaanna tabo iyo xeelado kala duwan oo lagu la soo baxo quudka, balse intaas oo noole ah halaq leh, gabsas leh, ugaar leh, ari leh, kalluun leh, geel leh, lo', dameeyo iyo xasharaad ba leh waxa ay u fananaan raadinta quudka, dhulka korkiisa yaal. Balse wareenka cimiladu waxa uu keenay abaaro isdabojoog ah, xaalufka keymaha, kul sare, bacaad guuraya, bus duulaya, xanuunno aan jirin oo la socday kulka siyaaday iyo abaaraha. Magaalaynta waa dhibka ugu weyn ee haysta dhulka Soomaalida. Ma jiraan xeerarka xakamaynta degaamaynta, haddii ay jiraa na cidi ma fuliso.

Iyada oo uu jiro cimilo wareen aan dunida inteeda kale la qabno, hadda na Soomaalida waxaa gaar u sii noqday degaamaynta xargoggoyska ah ee aan loo meel dayeyn. Seerihii ugaadha, dhul daaqsimeedkii xoolaha, aagaggii dalxiiska, ceelashii qaddiimka ahaa, iyo dhulkii ay ku noolaayeen xayawaannada dalkeenna ka sii dabargo'aya dhammaan waxaa laga taagay magaalooyin yaryar, oo aysan jirin faa'iido ay ku fadhiyaan. Nin walba halkii uu xoolaha daaqsan jiray buu ka taagay buush iyo balbalo ugu dambayntii horseeday in ay buburo dhulkii xooluhu ku dhaqmaadi jireen. Dad aan lahayn aqoon magaalayn iyo qorshe magaaleed toonna ayaa dhididbada u aasay meelaha aan maanta u naqaanno TUULOOYINKA.

Markii la dhidbay tuulooyinkaas waxa ay aagaggii oo dhan ka fogeeyeen duurjoogtii, ilaa ugu dambayn ay miciinsadeen in ay isaga baxaan xuduuddaheenna oo ay galaan dalalka deriska ah. Kuwaas oo maanta aynaan ku dacwiyi karin, maaddaama aan ilaashan waynay.

# CIMILO GOBOLEEDKA DEEGAANKA SOOMAALIDA

Cimilada iyo Cimil-gooreeddu waa kuwa jaangooya abbaarsamida deegaanka iyo ayligiisa. Waa astaanta midxisa muuqa deegaanka, cimilada iyo Cimilo-gooreeddu waxa ay ku kala duwan yihiin dhanka waqtiga iyo dhererkiisa. Mid waa kooban yahay, midna muddo ayaa uu ku samaysmaa.

Cimilo ahaan deegaanada Soomaalidu waa u kala gaar, mid walba waxa uu leeyahay cimiladiisa gaarka ah. Waxaa se jira deegaanno loo aqoonsaday deegaan cimileedyo gaar ah.

Afeeftayadu, waa in aannaan baaritaan buuxa aannaan ku samayn dhammaan deegaannada Soomaalida balse xaqiiqadaani ay ku fadhido baaritaannadii juquraafi ee ay samaysay dowladdii Kacaanka Soomaaliya (1969 — 1991).

**Cimilo-gooreed:** Waa xaalad uu deegaan ku sugan yahay xilli gaaban. Sida Wajiine, Toddob, Qabow, kuleyl, huur, Karan iwm.

**Cimilo:** Waa xaalad uu deegaan ku sugan yahay xilli dheer, sida; Lamadegaan, roobley, dhulbare, Nugaal, Guban iwm. Cimiladu celcelis ahaan waxa ay ku samaysantaa muddo xilliyeed aan ka yarayn 33 sano. Halka cimilo-gooreeddu ku saxanto ugu yaraan maalin iyo habeen. Soomaaliya haddaan u eegno dhul daaqsimeed ahaan, waxaa loo kala qaybiyaa Toddobo gobol dabiiciyeed oo kala ah;

1 **GUBAN:** waa dhulka xeedan badda cas iyo gacanka Barbera (Cadmeed), waa dhul biya yarood ah, kulul, badanaa xoolaha ku dhaqani waxay qaayibeen hayaaminta iyo naq raacinta gobol kale loo naq raacsho. dhulkaani wuxuu kasoo bilawdaa barkulanka badweynta hindiya iyo badda cas, ilaa laga gaarayo magaalo xeebeedda degmada Lughaya.

2 **GOLIS:** Waa dhulka ay ku fadhiyaan Silsiladda buuraha Golis sida oo kale waxaa loo yaqaannaa buuraha Karkaar, ilaa ay kaga xirmayaan buuraha dhaadheer ee bariga Afrika gaar ahaan kuwa Abasiiniya, dhulkaani wuxuu la qabsaday buuro culus, jeexooyin, togag durdurro leh iyo roob aan xilligoodii kasoo horumaray iyo roobab aan ka da'in goboladda kale ee dalka sida roobka loo yaqaanno Karanka, dhulkaan xoolaha ku dhaqani waa xoolo ladan inkastoo biyahiisu kuraar yihiin meelaha qaarkood oo aysan Lo'du ku dhaqmaadi Karin. Dhulkaan waxaa aad ugu dhaqmaada Adhiga siiba riyaha. Qaybo ka mid ah oo bannaanley ah sida Xadeedka Gobolka Sanaag waxaa aad ugu dhaqmaada Idaha iyo Geela, Lo'da ruuxeedu kama marna maadaama dhulkaani cawsleey yahay biyana leeyahay. Dhulkaan buuralayda ah soomaalidu deegaan ahaan waxay u kala qaybiyeen afar qaybood oo kala ah;

I **RAACIN:** waa buuraha qallalan ee aan lahayn geedaha, roobkuna ku yaryahay, badanaa buurahaani waxay xigaan bari siiba gobol dabiiciyeedyada loo yaqaanno Nugaal iyo Oogo, Waa dhulka labaad ee ugu xoolaha yar marka laga soo tago casha joogga sarraysa, joogga dhulkani waxa uu la kordhayaa mar kasta oo loo sii dhawaado dhan badda, marka laga reebo hoobadka badda ee xeebta xiga (*eeg sawirka midigta*).

II **CAL:** Cashu waa buuraha waaweyn ee roobban oo waligoodna aan cagaarka dhigin, casha waxaa loo qaybiyaa laba qaybood oo kala ah, Calcad iyo Calmadoow. Calcad laf ahaanteeda waxaa loo sii kala guraa — Calmiskaad iyo Calbari. Waxaa jira dhul bannaan oo u dhexeeya labada calood oo ay xooluhu aad ugu dhaqmaadaan waxaa na loo yaqaannaa **UURCALEED**.

Waa dhul daaqsimeed aad loo dego, Hud ama Hudcaleedna waa la dhahaa. Cashu badanaa waa dhul roobleey ah, qaboow oo cagaar badan. Dhulkaani wuxuu kaloo caan ku yahay daruuro iyo roobab joogto ah oo qabow sare leh. Dhulkaani Doog iyo Jiilaalba waa isku mid, waa dhulka ay ku badan yihiin durduradu, wuxuu dhaqaal ahaan aad u wacan yahay ariga, lo'da iyo geela casha.

III **RAGAR:** waa qayb ka mid ah casha balse waa qaybta xigta xeebta amase Gubanta waa dhul cagaaran balse wuu kulul yahay waana roobban yahay, wuxuuna caan ku yahay geedka loo yaqaanno Xijigga. Waa dhul daaqsimeed aad ugu habboon meesiga aricadka/ri'yaha. Waxa inta badan laga helaa oo dega jeesas reer miyi ah. Maydiga loo yaqaanno Mayddi Xaysimaadka ayaa ka baxa, waa na nooca ugu xabagta yar marka laga barbar dhigo xiji caleedka ka baxa figta sare ee buuraha.

IV **XEEB:** dhulka aan u naqaanno gubanta ee xeebta saaran, wuxuu caan ku yahay oo aad uga baxa timirta. Waana dhulka dhanka xeebta uga rogan Ragarka, qaybtaan waxaa ku dhaqmaadi kara nooc kasta ee xoolo ah xilliyada qaar, siiba geela.




*Sawirkaan waxa uu muujinayaa, qeybaha casha iyo dhulka ku xeeran buuroleydaan oo ah fiiqa ugu sarreeya dhulka.*

3 **OOGO:** dhulkaani waa dhulka taagga ah ee kasoo rogan Buuraleyda Golis ee Waqooyiga iyo Bariga Soomaaliya, dhulkaani wuxuu dhereran yahay ilaa laga gaarayo Nugaasha fidsan ee bartamaha gobollo dabiiciyeedka, dhulkaan roobkiisu ma badna

wuxuuse si saxa u helaa labada xilli ee kala ah Guga iyo Deyrta. Deegaankaan waxaa hoos yimaada deegaan hoosaadyo kale sida; Soosha & Gaaridiga.

4 **DEEX:** dhulkaani waa dhulka bannaan ee ku dhereran Badweynta Hindiya, dhulkaani wuxuu gudaha berriga usoo fidsan yahay ilaa in lagu qiyaasay 40 km, waa dhul maa- lintii qaboobe ah, habeenkiina waa kuleyle huur wata, badanaa ma roob yara waxaa kusoo weecda dabaylaha waaweyn ee ka yimaada badweynta hindiya kuwaasoo xambaarsan biyo ay kasoo qaadeen oogadda baaxadda leh ee badweynta Hindiya, dhulkaan waxaa aad ugu dhaqmaada ariga gaar ahaan idaha, waxaana loo yaqaanna dhulka badda kasoo rogan Iyax. Balse, marka uu u durko dhanka koonfurta waxa uu yeeshaa magacyo kala duwan waxaa se ugu caansan - **cadduun**.

5 **NUGAAL:** gobolkaani waa gobolka ugu weyn gobol dabiiciyeedyada Soomaaliya dhulkaani wuxuu taxan yahay ilaa gobolka galgaduud lagana soo bilaabo gobolka Sool, dhulkaan waxaa la sheegaa inuu ku nool yahay geela soomaaliya ugu badan marka. laga reebo goboladda Dhoobeyda ah, ee koonfurta iyo Gobolka Gedo oo ah Gobolka ugu geela badan Soomaaliya oo dhan, waxaa soo labeeya Gobolka Nugaal, oo uu geelu ka helo geed dhaneed iyo biyo dhano ah, sida geed loo yaqaanno Daranta oo ah geed dhanaan oo geelu jecelyahay.

Iyaxda waxaa loo qeybiyaa labo qeybood oo waaweyn; Iyax geedgaaban iyo Iyax hoose. Dhulka Nugaashu, waa deegaan bannaan gal ah oo qabow. Waxaa ku yaalla dooxooyin waaweyn oo ay Soomaalidu in badan ku hirato xoolaha na u leh caws iyo carshin. Balse waxaa ka fog biyaha.

Dooxooyinka ku yaalaa waxaa ugu caansan - Ladego, Waabo [Waab Gure, Waab Xammur, Waab Doocle, ikk], iyo dooxada caanka ah ee Ceemaad. Sida oo kale Nugaal waxaa ku yaalla dhul hoosaadyo kala jaadad ah oo ay ka mid yihiin; Dullo, iyo Medad.
Dooxada Nugaaleed iyadaa waxaa loo qeybiyaa 2 qeybood oo kala ah;

**[1].** Kobo/Barinugaaleed - waxaa ka mid ah magaalooyinka dhaca; Xallin, Kallis iyo Garoowe.

**[2].** Jedad/Nugaalgibin - Bannaannada Iyaxdu meesha ay ku kulmaan waxaa ka soo samaysma dooxooyin godan oo biyo qabad leh ceelal badana ay ku yaallaan. Markii dhanka badda looga baxo,



waxaa la fuulayaa bannaannadii Iyaxda.

Markii ay Majeerteenku ka dhaceen geelii ay ula baxeen Soodadab, Daraawiish dhexdeedana looga yaqaannay Miinanle, Sayidku waxa uu tirshay gabay dhiiggu da'ayo, oo ku carrabaabay dooxada caanka ah Ceemaad.

Wuxuu yiri;

Ciilow ba'ay! talo xumaan, cudur ka weyneyne
Markaan soo ceshooy iri, rag bay caasiyoo raraye
Cabdul iyo waxaa igala tegey, caabuqii wadaye
Haddeeyan cadceed subax u rarin, cidi ma qaaddeene
Ceemaad agteediyo hadday, cirifka noo joogto
Curcuraha Nugaaleed3 hadday, caday ka foofeyso

~ Sayid Maxamed Cabdille Xasan

**5 HAWD:** Gobolkaan waxaa loo kala qaybiyaa laba qaybood oo kala ah *Hawd gaab* iyo *Hawd dheere*, oo dhulka ugu rogan Galbeedka Gobolka Waqooyi Galbeed Soomaaliya, gobolkaas wixii ugu rogan koonfurta ilaa uu kaga darmayo Nugaasha waa Hawd gaabta koonfureed. Gobolkani waa gobol aan yarayn, waxa uu salka geliyaa gobolladda buuroleyda ah ee gobolka Jarar, badi gobolka Doollo ee DDS waa Hawd.

**6 DHOOBLEY:** waa gobollada koonfurta uga rogan Gobolka Galgaduud ilaa laga gaaryo salka dambe ee qariiradda Soomaaliya ku fadhi- do ee Kamboodi, dhulkaani waa dhulka ugu bar- waaqada badan, waayo waxaa mara labada Webi ee Jubba iyo Shabeelle, sidoo kale wuxuu helaa celceliska roobka ugu badna Soomaaliya oo ah 250 – 500mm sannad kasta. Gobolkaan waxaa ka mid ah gobol dabiiciyeedka Waamo ee ay ku nooshahay lo'da ugu badan ee Soomaaliya, sidoo kale dhulkaan waxaa ku dhaqmaadi kara nooc kasta oo ka tirsan xoolaha Soomaaliya.

Waxa uu dhulkaani caan ku yahay keymaha waaweyn, 4 xilli roobaad iyo dhiiqo. Gobolkaan waxa uu u kala qeybsamaa dhawr deegaan hoosaad sida; Dooy, Waamo, & Dhulbaraha oo ah dhul roobley, keyma- ha habdhameen.
Waxaa jira gobol dabiiciyeedyo aan lagu xusin gobolladaan oo kala ah; Ban, Dhadhaab, Cawsley. Banku, waa gobol dabiiciyeed aad u weyn oo ay dhacaan badi deegaannada Faafan (DDS) iyo gobolka Awdal ee Soomaaliya (Soomaaliland). Ma jiraan aqoon cimileed lagu sameeyey deegaanna- da oo dhan Jibuuti, DDS, NFD & Soomaaliya way wadaagi karaan dabeecado baaniyaal ah, balse aqoon baariseed rasmi ah laguma samayn, waa na baahi taagan. Dhulka dhadhaableyda ahi waxa uu u badan yahay gobollada Jibuuti iyo qeybo ka mid ah gobolka Bari oo hadda dhammaantiis ku wada jira Golis.

Dhulka Soomaalida markii aad u soo raacdid dhanka koonfurta waxaa koraya mugga iyo muuqa noolaha, maaddaama ay aaggaas maraan webiyada. Dhirta iyo xooluhu ba koonfurta ayaa ay u waaweyn yihiin, balse waxaa hubaal noqotay in sannadihii dambe nolosha laga dayey dhulkii la ilaalin jiray ee seerayaasha dowladda. Keymihii roobbanaa, Canjeelkii dhifta ahaa ee waqooyi-bari waxaa laga shiday dhuxul.




CIMILADU waa xarigga ugu weyn ee saamaynta ugu badan ku leh nolosha Soomaalida. Waxa ay tirsadaan afar xilli iyo kuwo ku dhex jira oo loo yaqaan xilli-hoosaadyo. Xilliyada waaweyn waa Doog [Gu' iyo Deyr] Jilaal [Xagaa' iyo Diraac]. Roobku waxaa uu sii siyaadayaa mar kasta oo loo durko dhanka koonfurta gaar ahaan dhulka xiga badweynta Hindiya ilaa laga gaarayo keymaha rooleyda ah ee Waamo — Dhoobleydu waa dhulka ugu roobka badan, waxaa la qiyaasaa in uu sannadkii helo 500 mm roob ka badan, halka Gubanta oo ah xeebta ku dhereran Gacanka Berbera/Cadan uu yahay kan ugu roobka yar kaas oo hela inta u dhaxaysa 50 - 150 mm oo roob ah sannadkii. Dhulka xiga Koonfurta galbeed waa dhul inta badan isugu jira dhul nooc kala duwan, waxa se uu helaa roob u dhexeeya 320 - 500 mm. Dhulka waqooyigu waa kan ugu roobka yar marka laga reebo dhulka taagga sare ee buuraha Golis/Karkaar.

Heerkulka waddanku waxa uu u celcelis ahaan gaaraa 20º ilaa 40º. Balse, Waqooyigu [Bari/Galbeed] waxa uu noqdaa 30 - 45º, xilliyada qabowga [December - February] buuruhu waqooyiga waxaa daboola ceeryaamo gaarsiisa heerkulku in uu u soo dhaco 10º - 14º. Marka loo kaco dhanka koonfurta heer kulku waa soo dhacayaa isaga oo gaara 20º — 40º, bilaha koonfurta ugu kulul waa 2 — 4'd. Dhulka Gubanta bilaha 3 - 9 heerka huurku waxa uu gaaraa 40% maalintii, halka habeenkii uu kor ugu kaco ilaa 85%. Dhanka koonfurta huurku waa uu sarreeyaa maaddaama uu maro dhulbaruhu gaar ahaan dhulka xeebaha heerka huurku waxa uu sigaa 60 — 70%, xataa haddii lagu jiro xilliyada dabaylaha qallalan ay ka dhacayaan badweynta Hindiya. 60% dhulka Soomaalidu waxa uu ku habboon yahay beerashada, walow beeruhu u badan yihiin koonfurta iyo cirifka waqooyiga.

1 GUBAN
2 GOLIS
3 OOGO
4 DEEX
5 NUGAAL
6 HAWD
7 DHOOBLEY

# XIDAARKA AFKEENNA

## AFSOOMAALIGA IYO XIDAARKA

*Maxamuud Cali Aadan [Hoorri]*




*"Haddii aan sarsarriigo*
*Ama aan surmaseejo*
*Amaba aan sixi waayo*
*Ama aan ka salguuro*
*Amaba laygu saluugo*
*Soomaalida i maqlaysaay*
*I su'aala hadhow!"*

*— Cabdillaahi Suldaan Timacadde, AUN.*

# AFARTA DAW EE *SANNADKA*

1 GU' 2 XAGAA' 3 DEYR 4 DIRAAC

## 1 GU'GA

GU'GU waa xilli barwaaqo ah, dhulkuna yahay mid leh doog, ugbaad, ilwaad, cosob ama cagaar san-ku-neefluhu ku ildoogsado. Marka aan joogno kiltirsiga gu'ga waxa mudnaan leh in aan sheegno bilaha Soomaalidu wax ku tirsato, gaar ahaan bilaha la xidhiidha aqoonta cilmi-felegga (xidaarka) oo kala ah: Seermaweydo (Seegmaweydo), Dirircawl (Candha-qoys) iyo Dirirsagaalle (Dirirsagaaro) oo wadartoodu tahay 91 maalmood.

Gu'gu (الربيع) waxa uu ku beegan yahay 21ka Maarso ilaa 21ka Juun. Waa xilliga uu dalku ugu roobka badan yahay, waxa uuna u dhexeeyaa labada dabaylood. Sidoo kale, waa xilli barwaaqo ah. Kaltirsiga Soomaalidu waa mid xanbaarsan aqoon, kuna qotama waaya-argnimo xeeldheer. Kolka la joogo xilli-hoosaadyada godadka roobka gu'ga waxa aan ka soo qaadan karnaa: Lixda Bila-dirir, Mehrajaan, Toddob (Dirirtoddob), Aminla', Samuulad, Qawqawle iyo Gu'soore.

## 2 XAGAA'

XAGAAGU waa xilli jiilaal ah oo ku suntan saddexda bilood ee kala ah: Xagaa-cadde, Xagaa-madoobe (Sama-laho) iyo Karan, waana 91 maalmood iyo habeenka dabshidka oo dheeri ah. Waxaa dhacda marar badan oo la isku khaldo diraacda iyo jiilaalka, haddaba, waxaa xusid mudan in degaannada qaar jiilaalka looga yaqaan xagaaga iyo diraacda oo la isku daray; halka barwaaqada looga yaqaan gu'ga iyo dayrta oo la isku daray; mar kalana waxaa jiilaalka loo yaqaannaa diraacda oo kaliya oo waaba tii hoobalkii Soomaaliyeed lahaa:

*"Inan yahay diraac iyo*
*Dirir hooray kala wacan*
*Adoo doog arkaayana*
*Lama dego abaaree!"*

Halka diraacdana gobollada qaarkood looga yaqaan xilliga barwaaqada ah—oo waa tii uu heesaagii kalana inantii uu xodxodanayay ugugu heesay:

*"Sida dalkeennooy diraacdu haysoo*
*Ama dhul doog laad qalbiga deeqdee*
*Dahab-La-Moodyeey dumar filkaagii*
*Adaa u door roon halbaha Deeqeey!"*

Xagaagu (الصيف) waxa uu ku beegan yahay 21ka Juun ilaa 21ka Sebteenbar.

## 3 DEYR

DEYRTU waa xilli barwaaqo ah oo ku suntan saddex bilood oo kala ah: Dayrhalabood, Dayrdanbarsame iyo Dayrgudban, waana 91 maalmood.

Dayrtu (الخريف) waxa ay ku beegan tahay 21'ka Sibteenbar ilaa 21ka Diseenbar. Waana xilliga labaad oo uu da'o roobku, waxaa dalka badidiisa ka da'a roobab aad u faro badan soona saara degaan iyo tigaadba. Qeyb kaltirsiga dayrta waxa ka mid ah: Lixda Bila Danbarsame ee xagaa iyo dayrba leh sida: Habar-ari, Diraacgood, Ximir, Turayo, Wajiine iyo Axal.

*Cirka mawjaddiisii haddaad, meelo ka xisaabo*
*Midkee curad ah meecaadda iyo, godanta moolkeeda?*
*Kobta qaalibkeedii ka maro maalintii Axada*
*Xageebaa dawaarku u maraa falaga meeraaya*
*Meeshay Aljaws ka marmaan, ma aad taqaaniin dheh?*
*Ma ekayne saacaduhu ways, daba maraayaane*
*Meelaha dharaartii badnaa, ma'a taqaaniin dheh?*
*Ayaanta iyo manaasiisha iyo, magac siyaariinta*
*Midba siday mid ugu waafaqaan, ma'a taqaaniin dheh?*
*Mushtarkii mariikhii haduu, meelo ka khilaafo*
*Macnahay tarbiica u noqdeen, ma'a taqaaniin dheh?*
*Cisho qudha dayaxu waa maraa, naas madoobaha e*
*Suxalkuna marxaladooyin buu, bilo dhex maaxaaye*
*Orodkoodu waana isku mide, ma aad taqaaniin dheh?*

*— Faarax Caytame.*
*Tixdaan oo aan weli la helin cid furta, waxa uu abwaan Faarax Caytame uga qeyb galay silsiladdii kaftanka u badnayd ee Halac-dheere. Silsiladdaan oo gobolka Mudug ka ollatay sannadkii 1918'kii waxaa bilaabay Cali Sharmaake oo ahaa abwaan iyo maqaddinnadii saldanaddii Hobyood. Rag badan oo ay ka mid ahaayeen — Goonni Faarax Xaaji, Sayid Maxamed, Cali Sharmaake, Qamaan Bulxan iyo Cali Dhuux, in ay fureen tixdaan lama sheegin. Ragga qaarkiis waa ay la safnaayeen Faarax, halka ragga lagu xirtay ay ahaayeen — Goonni Faarax, Cali Sharmaake iyo Cali Dhuux.*

## 4 DIRAAC

Diraac: Waa xilli jiilaal ah oo ku suntan saddex bilood oo kala ah: Xays, Toddob iyo Diraac, waana 91 maalmood.

Diraacdu (الشتاء) waxa ay ku beegan tahay 21'ka Diseenbar ilaa 21'ka Maarso, waana xilliyada ay aad u qabowdo cimiladu, waxaana dhaca dabaylo faro badan oo aad u kulul, taas oo ka soo dhacda Saxaraha Carbeed, iyada oo ka soo dhabata Waqooyi-Bari Afrika (kaliil).

*Roobkiina waa kaa u da'ay, duraha jiilaale*
*Waa kaa dalkoodii ballidu, wada duraabtaaye*
*Waataa arladii daahirtee, diib ka soo kariye*
*Cawskii dumayoobey baa, doog ka soo baxaye*
*Dallaqyadiyo dooxooyinkiyo, diisha iyo qaare*
*Dunqaarihiyo xamashkaa sidii, diriq la moodaaye*
*Maalkii diraacdii dhalaa, doobte loo culanne*
*Duunyada wax laga maalayaa, daranii caanoode*
*Rabbigii dawaa'iga sidaa, deeqi noo ridaye*

*— SAYID MAXAMED CABDILLE XASAN*

*Isbeddelka xilliyadu waa mid ay keeneen wareegga ayaamuhu, isdhaafka iyo isgudubka xilliyadu waxa ay ku qotomaan raacdo rabbaaniya ah, roob hibitiqa, mid qayooda, mid xi-ifa iyo mid weecdaba waa doonista eebbe weyne.*

*Mar kale;*

*Hanfi iyo hunguri soo dhiciyoo, hinif dabayl baa leh*
*Hanqar iyo hillaac biligliyo, halalac roob baa leh*
*Cir habqamay xareed laga harqaday, Haradigeed baa leh*
*Xiin hawle iyo heego curan, hogol daruuraa leh*
*Hir doogliyo caleen hamasha iyo, habatac ciid baa leh*
*Maal hooray ciir laga hanfaqay, seben hagaagaa leh*
*Caana had iyo jeera iyo, heeshi ramag baa leh*
*Qumbo lala hagoogtiyo hilbiyo, hawl yar ari baa leh*
*Hiyinnimo wax lagu qaato iyo, ku hinji awr baa leh*
*Habaqliyo harraad iyo kulayl, hilin abaar baa leh*
*Haddii hadowgu geedood engago, horasho ceel baa leh*
*Hagahagi hunguri duulayiyo, hogo kaliil baa leh*

*— SAYID MAXAMED CABDULLE XASAN*
*Sayidku gabaygaan waxa uu noogu soo koobay badi erayada loo adeegsado roobabka iyo xilliyada, bal wax uun ka garo; Hanfi, hinif, hunguri, hanqar, hillaac, bilig, halalac, Cir, xareed, Xiin, heego, hogol, daruur, hir, hamash, habatac, hanfaq, seben, ramag, heeshi, habaqle, hilin, abaar, hadow, horasho, haghagi, hogo, kaliil [...]*



# BILAHA DAYAXA

## *AQOONTA & OGAALKA MAGACYADA BILAHA DAYAXA*

*Soomaalidu waxa ay leedahay sooyaal facweyn oo la jaanqaaday dhammaan aqoonta kaltirsiga iyo cilmi-felegga (xidaarka) dunida laga adeegsado. Marka aan taxno magacyada bilaha waa sidatan soo socota: Sako/Dago (المحرم), Safar (صفر), Mawliid (ربيع الأول), Rajalhore (ربيع الثاني), Rajaldhexe (جمادي الأولى ), Rajaldame (جمادي الآخرة), Sabbuux (رجب), Waaberis (شعبان), Soonqaad (رمضان), Soonfur (شوال), Siditaal (والقعدة) iyo Carrafo (ذو الحجة).*

إِنَّ عِدَّةَ الشُّهُورِ عِندَ اللَّهِ اثْنَا
عَشَرَ شَهْرًا فِي كِتَابِ اللَّهِ يَوْمَ
خَلَقَ السَّمَاوَاتِ وَالْأَرْضَ مِنْهَا
أَرْبَعَةٌ حُرُمٌ ۚ ذَٰلِكَ الدِّينُ الْقَيِّمُ ۚ
فَلَا تَظْلِمُوا فِيهِنَّ أَنفُسَكُمْ

سورة التوبة الآية (36)



# MAGACYADA MAALMAHA

*Magacyada maalmaha toddobaadka inta badan la iskuma raacin, lagumana heshiin, waana arrin u baahan baaris dheeraad ah iyo in laga furo doodo iyo gorfayn ku dhisan cilmibaaris iyo wadar-oggol bulsho. Haddii se aan soo qaadanno magacyada uu ku afnaqay abwaan Xasan Sheekh Muumin (AUN) maalmaha toddobaadka waxa ay kala yihiin: Sooroga oo lagu afnaqay(يوم السبت) , Koobin oo lagu afnaqay (يوم الأحد), Laamin oo lagu afnaqay (يوم الإثنين), Labtako oo lagu afnaqay (يوم الثلاثاء), Koodaar oo lagu afnaqay (يوم الأربعاء), Hakis oo lagu afnaqay (يوم الخميس) iyo Hakisbila oo lagu afnaqay (يوم الجمعة) .*

# TIRSIGA MAALINTA & HABEENKA

*Halkan waxa aan ku soo bandhigayaa habtirsiga maaalinta iyo habeenka ee Soomaalida iyo habtirsiga Carabta oo isbarbar yaalla. Haddaba, wixii saluug ah ama dhaliil ah waxa aan codsanayaa in la saxo oo lagu sameeyo raadraac iyo cilmibaaris dheeraad ah. Sababta oo ah, waa ogaal u baahan cilmibaaris iyo u kuurgalid salka ku haysa aqoon hufan.*

01

## TIRSIGA HABEENKA

*Marka aan eegno tirsiga iyo habeenka labadiisa galin waxa innoo soo baxaysa inuu yahay mid ku fadhiya aqoon iyo waaya-aragnimo mudan in la dhowro, la kaydiyo, lana baro dhallinta iyo faca soo koraya. Waxa ay kala yihiin: qorraxdhac (الشفق), fiid (الغسق), fiid-horaad (العتمة), cawysin (السدفة), habeenbar (الجمهة), saqhore (الزلة), saqdhexe (الزلفة), saqdanbe "indha-gube" (البهرة) iyo hiraab/saxuur (السحر). Intaas waxa ka danbeeya waxa loo yaqaan subax (الصبح والصباح).*

02

## TIRSIGA MAALINTA

*Marka aan eegno tirsiga maalinta iyo labadeeda galin waxaa noo soo baxaysa aqoon aad u ballaaran, una baaxad weyn, oo weliba u baahan in lagu sameeyo cilmibaaris iyo raadraac mug leh. Sidaas darteed, waxaa mudnaan iyo muunaynba mudan in la baro dhallinta Soomaaliyeed iyo faca soo koraya. Waxa ay kala yihiin: hiir/oog (الشروق), waaberi (البكور), aroor (الغدو), subax (الاضحى), barqo (الهاجرة), xigsin (الظهيرة), dadiid/hargal (الرواح), galab (العصر), casarliiq (الأصيل), qorraxdhac (القصر او العشي) iyo maqrib (الغروب) . Af Soomaaligu waa af hodon ah oo leh ereybixin xooggan, waana hubaal in uu yahay af leh xeerar sugan iyo dalayn farshaxamaysan. Bal aan eegno mar kale qaabka uu u cabbiray afkeennu amminta: dorraad, shalay, maanta, berri, saaddanbe, saakuun iyo sidataal. Waa hubaal in uu kaga hodansan yahay afafka kale ee dunida.*

# GODADKA DAYAXA

## *AQOONTA & OGAALKA GODADKA DAYAXA!*

*Dayaxu waxa uu leeyahay godad iyo wadiiqooyin (المنازل) uu kaladuwan marinnadiisa gaarka u ah, waxa uuna maraa 28 god. Mid kasta oo ka mid ah godadkaas waxa ay qorraxdu (الشمس) martaa ama fadhisa 13 habeen. Markii lagu dhufto 13*28 god waxa ay soo baxaysaa wadartu 364 habeen iyo habeenka dheeriga ah—waana habeenka dabshidka loo yaqaan. Sidii guud waxa aan dhihi karnaa xididku waa afar god oo mid kasta ay ka farcamaan toddobo kale, marka lagu dhifto 7*4 waxa ay wadartu soo baxaysaa 28 god. Haddii aan faahfahin kooban ka bixinno waa: Godcirir iyo God-dirir oo loo yaqaan Maluug, halka godka Faraacida iyo godka Naafada loo yaqaan Meecaad. Si kale oo kooban haddii aan u iftiimiyo jaalle nuxurku waa:*

**1 GOD-DIRIR:**

Waxa uu ka kooban yahay toddobo god oo loo yaqaan *"Dirirro"*, waxa ay kala yihiin: *Babac, Bayaxow, Gabro, Gudban, Libcas, Madhan iyo Mareega-dheer.*

**2 GODCIRIR:**

Waxa uu ka kooban yahay toddobo god oo loo yaqaan *"Cirirro": Faruurcir, Jidgabarre, Jidbarbaar, Jid-dhiriqle, Jidcanbaar, Rabhore iyo Rabdanbe.*

**1 FARAACI**

Faraacidu, waxa uu ka kooban yahay toddobo god oo loo yaqaan *"Faraaciyo": Foocaar, Godan, Godxoor, Laxo/Lixo, Laxmar, Agaalli-waranle iyo Agaalli-caanood.*

**2 NAAFO**

Naaf waxa uu ka kooban yahay toddobo god oo loo yaqaan *"Naafo": Afagaalle, Naafcadde, Naafmadoobe, Tar, Kudxin-awr, Kudxincawo iyo Mijin.*

*Waxa aan qormadan ku soo afmeerayaa tixraacyo iyo raadraacyo ay tahay in akhristuhu in uu ka dabatago oo uu si gaar ah u shanshadhuuxo, waxa ayna kala yihiin: Taariikhdii Soomaaliya: Dalkii Filka Weynaa (Punt) ee uu qoray Maxamed Ibraahin Maxamuud (Liiqliiqato); Hirarkii Taariikhda iyo Halgankii Soomaalida ee uu qoray Khaalid Cali-Guul Warsame; Fiqu al-Luuqa ee uu qoray al-Sacaalibi; Xidaar ee uu qoray Muuse Xaaji Ismaaciil Galaal; iyo kuwo kale.*



*Sawirka: Wired, UK.*



*Duqeydii dhamaatey tolow,*
*dirirka yaa eegi?*

*Dab-shidkii hadduu galo*
*ayaa dhuxulihii daadin?*

*Ayaa daaha laantii ku xidhi*
*,qudhac intuu diiro?*

*Degmo tuhun ma guurtee*
*ayaa, sahanka loo dooran?*

*Reerkoo yagleel degay ayaa,*
*guri u soo deyri?*

*Hangoolkiyo degsaarku*
*ayaa, gudin u soo daabi?*

*Haddii geelu deyr dhalo*
*ayaa‘ doobiga u qaadan?*

*Dugaagiyo qaniinkiyo ayaa,*
*daabka ka ilaalin?*

*— Xaaji Cabdi Cabdullahi*
*Muuse, Burco Togdheer.*

# CAWSHA

*AQOONTA & OGAALKA*
*UGAARTA — CAWSHA*

***CABDIRAXMAAN JAAMAC XASAN***
*[ODINGA].*

Cawshu waa yeris ugaareed, waana iran iyo deex ku nool oo sida idaha oo kale waa seel daaq oo salool ma taqaan sida garanuugta. Cawsha dheddig masaal baa la yiraahdaa labkeedu waa jaxeer ama cawl waana kan sahanka u ah goosinkii cawleed ba. Masaashu way asooshaa markuu jaxeerku arko masaashoo asool ka muuqdo oo iyana hadba dhashada dheeg ka marinayso buu caasha kor u qaadaa oo dhulka ka fuqaa jaxeerkuna waa cir-awaal cimilada garan og, malluugiye fagaaga sare eega kana garta waxay sannadaasi noqonayso iyo xilliga sidka u roon oo masaashu ayna ku dhibtoonayn, haddii uu ka yamxeerana ma saarto oo yaxdaddowga masaasha iyo lexejeclada ubadka buu saas u yeelayaa iyaduna jaguugnimadeeda bay hadba isku jitaysaa.



Masaashu waxay leedahay sid idaad mana dhasho xilli aan gu' ahayn gaar ahaan milayga cawli-ku-dhashayda oo gu'ga bartamihiisa dhacda deegaanada qaarna looga yaqaan candho-qoys ama dirir-cawleed waxayna rintaa bilawga jiilaal. Odoroska iyo xiddiginta jaxeerka baana loo aaneeyaa inay dirir-cawleed uun masaashu dhasho oo ma saarto ilaa uu ogaado xiliga la taagan yahay iyo gu'ga soo fool leh siduu noqon doono ee jeenyuhuu ku maaweeliyaa.

Goosin kastaa waxaa u qabbaana hal jaxeer oo ma ogola in jaxeer kale ka arimiyo goosinkaa dhexdiisa haddii jaxeer doola soo galana oo ka adkaado abbaankoodii cawshaasi waa firxataa oo kala yaacdaa oo mid ba meel ka baxdaa oo dibad joog aan goosin ku jirin noqotaa cawl dibadeed baana la yiraahdaa.

*Rag caddaalad waayaa sidii, cawsha kala yaacye*
*Caarrow shabeel iyo Dhurwaa, nalagu cawreeye*
*Canka nagu gur bahal Goodiroo loo cimaamadaye.*

*— FAARAX LAANJEER.*
*Faarax Laanjeer oo ka soo jeeday qoys toleed talada tolka gooya, waxa ka talo wareegtay taladii qoyska (Gaashaan- buur), waxa na taladii qabtay nin kale oo la dhaho - Geeldabar, oo caddaalad darro badan laga tirsaday, baa reer Faarax Jaamac Aadan xoolo ka bar- gooyey, ka dib markii walaalkood nin ina adeerkiis ah dilay. Faarax oo taas ka xanaaqsan baa gabaygaan kore u marshay suldaankii reerka - isaga oo sheegaya in qoyskii Gaanshaanbuur- tu uu kala firxaday caddaalad darro awgeed. Sidaas ayuu ku baxay beydka maahmaahda ah ee; "Rag Caddaalad waayaa sidii cawsha kala yaac". Faarax waxa uu ahaa badmax ku noolaan jiray carriga Ingiriiska xilliyadii Ingiriisku gu- meysan jiray Soomaalida waqooyi.*

*Cidla yuurur bay dilay sidii cawsha debadeede"*
*— SALAAN CARRABEY.*



## *CIBNRADA CAWSHA*

*Markuu Cawlku Cawlaha orgayn, wa u cibaaroone,*
*Cishaday ku uuraysatiyo, caadaduu garane,*
*Cashaday calool gelahayaan, canugga beertiisa,*
*Carcurradiyo lawyada intuu, ku cuskaduu saaro,*
*Cirridiyo cagaar miday ku dhalan, caadka kor u eegye,*
*Hadba cirirka loo nuuriyuu, ku cimro-qaataaye.*

*— CALI AADAN GOROYO [CALI DHUUX]*
*Sida ay qireen abwaanno iyo afwaanno badani, Jaxeerku waxa uu Masaasha ku orgeeyaa keliya in uu garanayo xilliga uu dhalanayo ilmaha, sidkeedu waa 5 bilood, haddii saadaaliyo in sannadka soo socda abaar noqonayo ma orgaynayo, haddii kale na waa siduu rabay.*



# AGABKA & HABABKA XOOGSIGA BADDA

*AABBOW, AAKHIRO KALLUUMAYSI MA JIRAA? MAANDHOW NINNA MAAN LA'AAN MEEL UMA FADHIYO!*

***CALI SAALAX SICIID, BAARGAAL SOOMAALIYA***



*"NIN BAD ARKAY WAXNA ARAG WUXUU SHEEGAYNA MA YAQAAN!".*

*— MAAHMAAH, BAD DHAC!*

Baddu waxa ay ka mid tahay, ilaha dhaqaale iyo dheefeed ee uu dalkeennu ku tiirsanyahay, waxana u xoogsi iyo xamaal taga tiro badan oo ummad Soomaaliyeed ah, kuwaas oo si toos ah iyo si dadban ugu tiirsan.

Si la mid ah, ilaha kale, baddu waxa ay leedahay hab iyo agab u gaar ah oo loo adeegsado ka xoogsigeeda, kuwaasi oo ay ka mid yihiin, agabka kalluumaysiga, agabka ku safarka badda iyo kuwo kale.

Hadaba, waxa aynnu qormadan yar kaga faalloon doonnaa, qaybo ka mid ah agabka kalluumaysi ee ay adeegsadaan dadka badda ka xoogsada iyo mid walba goorta iyo goobta loo adeegsado. Haddii aad aragtid ereyo qallafsan iyo magacyo kugu cusub oo u muuqda in afyow kale laga soo amaahday, halla yaabin! – waa sax – oo bad-maaxdii hore iyo reer xeebeedku ba waxa ay xiriirro ganacsi iyo isdhexmar sooyaal fog leh la lahaayeen dalal iyo dadyoow ay Carabta, Hindida iyo Sawaaxiligu ka mid ahaayeen.

Xiriirkaas ganacsi waxa uu keenay in ereyo badan oo afafkaas ka soo jeeda ay u soo gudbaan Soomaalidii xeeb-joogta ahayd, ka dibna ay sidaas curufka badda ku galaan ilaa maantana loo adeegsado. Marka la joogo xeebaha, dadka deegaan ahaan ku nool meelaha xeebta u dhoow waxa loo yaqaannaa “REER XEEBEED AMA XAAFEEY” – waa dad si uun ugu tiirsan badda wax soosaar shaqo iyo mid cunno intaba, lagana yaabo in ay meesi xoolaadyada kale wax ka dhaqdaan. Waa dad inta badan aan guurguurin ee ku neg deegaannada xeebta kulaala.

# XOOGSAT0

Ninka badda u xoogsi taga, ee aadka u yaqaanna xirfadda kalluumaysi waxa loo yaqaan “bad-dhac”. Halka shaqaalaha kale ee doonta ama gaadiid badeedka ay ka koobanyihiin:

### 1 RUBBAAN:

*Sida oo kale waxaa loo yaqaannaa Naakhuude, waa wadaha gaadiid badeedka. Rubbaanka/Kabtanka inta badan waxa loo adeegsadaa qofka maraakiibta ama doonyaha waaweyn kaxeeya ama dekedaha/marsooyinka ku soo xira.*

### 2 SARANJI:

*Kaaliye Naakhuude/Saranji: qof ka mid ah baxrida oo uu naakhuuduhu u wakiisho kaxaynta iyo maamulka hawlaha gaadiid badeedka, xilliyada uu naakhuuduhu hurdo ama shaqada ka maqanyahay.*

### 3 BAXRI:

*Baxri, shaqaalaha muruq-maalka ah ee ka xoogsada gaadiid badeedka. Sida oo kale waxaa loo yaqaannaa bad-dhac. Waa na dadka inta badan badda ka xoogsada. Waxaa iya na jira dad loo yaqaanno Bad-dhaac, oo ah reer miyiga, beeroleyda, xijiyeysatada, ama tuulooyinka ku yaalla aagga u dhow badda. Bad-dhaacdu, inta badan waa dadka ugu dambayn noqda bad-dhaca. Beryihii dambe markii ay badda ku soo bateen dadka ka xoogsada, eraygii baxri waxa uu ku haray xoogsatada quusayaasha ah.*

### 4 SUQAYAR:

*Suqayar, kuray shaqa barad ah oo aan weli gaarin baxrinnimo sababo la xiriira xirfaddiisa badeed iyo xooggiisa oo aan weli buuxsamin. Waa halka uu dabodhoonku ugu jira geeljiraha.*

### 5 KUUG/KARIYE

*Dabbaakh/kuug/Kariye: qofka shaqaalaha doonta ama gaadiid badeedka cuntada u kariya.*

*Gaadiidka badda lagaga xoogsado iyo agabkiisu marka ay dhamaystiranyihiin waxa loo yaqaan “ Qashamad”, waxaa na gaadiid badeedka ka mid ah:*

### I HUURI

*Huuri, waa gaadiid badeed yar oo inta badan qaada labo ilaa saddex qof kana samaysan alwaax masaamiir iyo qaynbaar la isugu qabtay, ka dibna siifad lagu dahnay si ay uga ilaaliso dildilaaca ugana difaacdo biyaha gudaha u soo gelaya huuriga.*

- *Huuriga waxa lagu ka wadaa “Muqdaaf” – waa qori afka alwaax ballaaran lagaga lakabay, ka dibna inta biyaha caarada hore loogu rido si xoog leh la isu dhafiyo, isliska biyaha iyo muqdaafka ayaa sababa in huurigu horay u dhaqaaqo. Waxa sida oo kale huuriga gadaal lagaga rakibaa alwaax ballaaran oo shukaan la yiraahdo – kaas oo naakhuudaha/wadaha huuriga ka caawiya in uu maamuli karo xilliyada uu huurigu waddaca ama mawjadda raaco si uu dhimo xawaaraha, ama uu si sahlan huuriga jihada socodka uga bedelo.*
- *Xilliga hadda la joogo ma badna adeegsiga huurigu, maadaama la helay saxiimado yar yar oo matoor leh, kuwaas oo ka dheeraya kana qaad badan.*

### II BEDEN

*Beden, waa gaadiid badeed ka yara weyn huuriga, kaas oo inta badan qaada 5 ilaa 7 qof oo baxri ah iyo naakhuudahooda, inta badana laga sameeyo alwaax.*

- *Inta badan bedenka waxa lagu kaxayaa qoray loo saantay oo loo yaqaano “Seeb”, ama “Shiraac” – maro weyn oo lagu xiro qori dakhal loo yaqaano oo laga taago bedenka dhexdiisa, si inta dabayshu gasho ay bedenka ugu kaxayso jihada ay dabayshu u dhacayso.*
- *Bendenka qudhiisu xilliga aad ugama shaqeeyo xeebaha maadaama ay kalluumaysatadu heleen saxiimado matoor leh oo aad uga dheeraya, ugana hawl yar.*

### III SAXIIMAD

*Saxiimad/Baarafoorde: nooc ka mid gaadiid badeedka yaryar oo matoor leh loona adeegsado kalluumaysiga iyo safarrada gaagaaban.*



### IV DOONI

*Dooni, gaadiid badeed aad u gura weyn, markabkana ka yar, taas oo loo adeegsado xamuulka, daabulka shixnadaha, kalluumaysiga iyo safarada dhaadheer.*

- *Doonta inta badan waxa laga samayaa alwaax(khashab) iyo faybar la dhalaaliyey, kuwooda kalluumaysiga loo adeegsadona waxa lagu soo rakibaa qaboojiyeyaal u sahla in ay muddo ku jiri karto hawlaha kalluumaysi iyada oo wixii la qabto lagu keeydinayo qaboojiyeyaasha doonta.*
- *Doonta waayihii hore waxa lagu kaxayn jiray shiraac balse waayadan dambe wax la adeegsadaa kuwo matoor uu wado.*

### IV MARKAB

*Markab, waa gaadiid badeed doonta ka weyn, kaas oo loo adeegsado dhoofinta shixnadaha ganacsi , kalluumaysiga iyo safarrada. Markabka waxa kaxaya matoor weyn waana uu ka shaqaale badanyahay dhammaan qaybaha kale ee gaadiid badeedka.*

- *Gaadiid badeedku inta uu shaqada ku jiro maahane inta kale waxa lagu xiraa goobo gaabaad leh sida marso ama deked, kuwooda yaryar sida hawaarida, bedennada iyo saxiimadahana bannaanka badda ayaa loo saaraa.*
- *Gadiidka badda dhex taagan waxa loo xiraa bir culus oo **BARROOSIN** loo yaqaanno, taas oo geeso laaban oo ay ciidda badda ku gaadato leh, gaadiidkana u diidda in ay qulqulka biyaha iyo dabayshu booskiisa ka dhaqajiyaan.*

KALLUUMAYSI waa magac guud oo loo adeegsado hannaanka la soo baxidda bad kunoosha kala duwan, waxana jira dhawr hab oo kala duwan oo loo kalluumaysto taasi oo ku xiran hadba nooca kalluun ee uu doonayo kalluumaystuhu in uu soo dabto.

Bad kunoosha waxa inta badan loo qabtaa saddex ha boo kala ah:






# HABABKA XOOGSIGA BADDA

**BAD KUNOOSHA WAXA INTA BADAN LOO QABTAA SADDEX HA BOO KALA AH:**

## 1 SHABAAGAYSI:

***SHABAAGAYSI**, waa in shabaag/shabaq badda loo dhex dhigo si bad kunoosha socotada ahi u gasho dabadeedna sidaas lagu soo qabsado, waxana jira dhawr hab oo kalluunka shabaagta loogu qabto, waxana ka mid ah:*



- ***DHIGAAL**, waa hab inta shabaagta hoos dhagxaan looga xiro dushana wax muuqda oo lagu arki karo badda la dhex dhigo, kadibna looga soot ago, ka dibna si maalinle ama maalin dhaaf ah loo baaro.*
- ***MALGO** waa shabaq il yar leh, hereerahana ay nuxaas la dhalaaliyey kaga xirantahay, taa soo marka la arko xirmo kalluun yaryar ah oo xoonsan, si kedis dusha looga tuuro, ka dibna lagu qabsado.*
- ***XAAWI** – waa hab inta dhawr shebeg la isku xiro ay laba sixiimadood geesaha qabtaan, ka dibna jiidaan si wixii kalluun iyo noole kale ah ee agagaarkaas maraya ay u qabsadaan.*
- ***JIIDMO** – waa hab kale oo inta shabaago badan la isku dabo, saxiimadu galabkii badda kula carroowdo kadibna ay habeenkaas oo dhan la maqnaato, subaxdii shabaagaha iyo wixii ay qabteen ba isku soo qaadato.*
- ***JIRIIF** waa hab shabaago xargo adag ka samaysan, oo qaarkood biro qarka u jebiya wata badda lagu jiido iyada oo la adeegsanayo markab, shabaagahaas inta badan waxa dallaca oo badda ka soo qaada wiish markabka ku rakiban.*

## 2 JILLAABASHO:

*waa hab inta badan kalluunka lagu qabto taas oo ah in bir qaroofan inta cad yar lagu mudo badda lagu dhex tuuro, kadibna uu kalluunku cadkaas inta cun damco uu jilibka sidaas ku liqo. Cadkaas jilibka lagu qariyo waxa loo yaqaannaa **LACAAF**. Waa tii uu abwaanku lahaa **"Kalluunku ba lacaaf lagu hoduu, hadiyad moodaa"**.*



- ***IDAADDA** – waa hab bir qaroofan af badan inta xarig dhuuban oo xoog leh lagu xiro, gabal yar oo cad(lacaaf) ah la geliyo, kadibna inta badda loo tuuro kalluunka lagu soo dabaa.*
- ***DEJIS** – waa hab jilbo badan oo kuwa kalluunka ka waaweyn inta la isku daxo meel durugsan oo badda ka mid ah lagu soo daadiyo, iyada oo loo xirayo baroosin culus si aysan booskooda uga dhaqaaqin. Jilba dejiska qudhooda waa la lacaafa, waxana lagu qabtaa libaax badeedka oo inta lacaaftaas arko jilibka ku liqa.*
- ***TASBIYAD** – Iyana waa hab kale libaax badeedka lagu jillaabto – taas oo ah in inta jilbo badan la lacaafo ay saxiimadda ama doontu badda ku yaaciso, kadibna ay gees kaga xirtato sidaasna badda loogu daayo muddo habeen iyo maalin ah.*
- ***SHAAYAD**: - waa hab jilbo lammaan(labo ah) oo laf cad ku rakiban inta xarig-jilaabeed dheer lagu xiro, sixiimaddu si xawaare sare leh ay badda ugu jiiddo. Kadibna inta kulluunku arko laftaa uu u malayo cayddi ama kalluun yar oo badda ciyaaraya dabadeedna inta cayrsado sidaas ku liqo. Habka noocan ah waxa inta badan lagu qabtaa kalluunka ooga roorka ah ee dheeraya sida Tarraaqadda, Tabadiinta iyo Saynuubta.*



## BACAADKA XEEBAHA!

Cimilo wareenku waxa uu keenay, in si degdeg ah ay u faafaan astimihii waaweynaa ee lagu garan ogaa isbeddelka cimilada. Marka laga soo tago, daaqa yaraaraday iyo roobabka gedmaday, waxaa si xawli ah xeebaha uga dhacaya bacaad aan kala joogsi lahayn. Sida dadka deegaanku sheegeen, bacaadka waxaa keenay;

- *ABAARO — Ciidda waxaa dhejiya/naba waa roobabka, marka ay ciiddu qallasho waxa ay durba bilaabaysaa in ay dhaqaaqdo.*

- *GABBAAD LA'AAN — dhirtu waa dugaalka iyo gabbaadka ciidda, haddii roob la waayo geed ma jirayo, taasina waxa ay horseedday in ciidda ka kacda Laasqoray ay ku degto Maydh oo hadda na isi sii qabsata ilaa Lughaya! Haddii aan dhir lagu beerin ama ba aan loo kicin waxaa la maqli doonaa magaalooyin magac leh oo laga waayo khariiradda caalamka.*

- *DADKEEN — Aadane la aragyaa, dhib la arag! Markii uu dhirtii gabbaadka ahayd jaray, oo daldalooliyey sanbabbadii caalamka, waxaa la waayey roobkii oo isna wax walba ay ku xirnaayeen.*



**ISBITAALKA TUULADA KULUB, MUDUG.**
2003, waxaa aasay sunaamidii weynayd. 20 sano ka dib waxa ay la ildaran tahay bacaad aasay.

Magaalada Shalaanbood oo ka tirsan gobolka Shabeellada Hoose, waa magaalo beereed, waxaa se sannadihii 1970'dkii ku ku habsaday ciid ka soo kacaantay xeebta badweynta Hindiya oo ay kaabiga ku hayso magaaladu. Waxa ay burbursheen dalaggii jidadkii na waa ay jareen. Waxaa se taas u guntaday dowladdii kacaanka oo tabarteedii iyo aqoonteedii isugu gaysay sidii dadka degmada Shalaanbood looga celin lahaa bacaadka. Ciid ku jirta sallado ka samaysan qabo ayey isu dhiibayaan dadka oo ku jiro hilqo dheer oo aan kala go' lahayn ilaa laga soo gaarayo meesha ciidda bacrinsan ee dhoobo madowda ah lagu shubayo, ciiddaas oo gobolka gudihii looga soo daabbulay baabuurta ciidanka, waxaa isu dhiibayey dad maalmaha jimcaha ka kala yimid degmada Baraawe iyo aagga u dhow si ay u joojiyaan bacaadkaas Oogada sare ee ciiddaa lagu nabay ciid madowda bacrinsan, waxaa korka looga sii beeray geed abaareedyada uu ugu horreeyo Tiintiinku. Waxaa loo beeray geedahaas qaab hal xarriiq toosan ah, laba xarriiqood dhexdooda na waxaa lagu sii daadshay dalagga cowska kaas dugsi kasii dhigay aaggii.

Maanta waxaa degmooyinkii iyo magaalooyinkii badweynta Hindiya harqiyey bacaad ka imaanayo loolasha sare ee hirarka badda. Badaysha Banaaddir ka soo lalisa ciidda waxa ku soo tuurasaa godannada gobolka Nugaal iyo qararka xiran. Ciiddaan oo la cabbiray socodkeeda waxaa lagu qiyaasay 20 km/saac. Magaalooyinka xabaalmay waxaa ka mid ah; Dhinawda, Ceeldhanaane, Shalaanbood, Kulub, Bullaxaar, Laasqoray, Maydh [...].



## COOFEY

*Bahda Biciid waxa ay muuqaal ka sameeyeen shimbirtia Coofeyda la dhaho oo ah nooca cuna kalluunka caydiga la dhaho. in ka badan hal milyan oo hayaan ah. Waxa ay timaaddaa xeebaheenna dibna waa uga laabataa marka la gaaro bilaa Nov/Dec.*

## LINGAXA:

*https://www.facebook.com/Biciidmagazine/videos/585575479583201*

## YAA KALE OO KU NOOL KALLUUNKA?

*Aadanaha keli ahi kuma noola kalluunka, waxaa jira nooleyaal kale oo noloshoodu ku tiirsan tahay kalluumaysiga. Waxaa ka mid ah shimbirta la dhaho Coofeyda oo gurata kalluunka caydiga ah, iyo Cawlan oo ah shimbirtaan kore oo nolosheeda dhammi ku tiirsan tahay gurashada kalluunka — Waxaa loo baxshay Boqorka Kalluumaysatada [Kingfisher]. Kalluunku isaga ayaa sida oo kale isku dhex nool, mid ba mid kale ayaa uu cunaa.*

## NOOLE WALBA OO BAD KU JIRA MA KALLUUN BAA?

**3 QUUSID:**

***QUUSADU*** *waa hab, qof dabaasha iyo muquurashada biyaha aad u yaqaani inta uu quuso soo qabsado kalluunka yaryar, aragoosatada, sannaanida iyo waxyaabo kale oo uu gus-badeedku ka mid yahay. Inta badan kalluun qareedka waxaa lagu soo qabtaa habkaan, oo ah hababkii ugu horreeyey ee ay aadanuhu tijaabiyeen in lagu soo qaban karo kalluunka.*

Bad ku noosha gaara haan libaax badeedku waxa uu leeyahay hab iyo qalab u gaar ah oo lagu qabto, maadaama uu kalluunka kale ka weynyahay bad-dhacdu farsamooyin gaar u ah ayeey u adeegsadaan. Tusaale, marka libaax badeedku uu jilibka cuno, waa ay adagtahay in saxiimadda ama doonta si sahlan lagu soo saaro – waa haddii uu noolyahay e.

Si uusan baxrida wax u yeelin, waxa ay bad-dhacdu adeegsataa in badda lagu dhex dilo ka dibna isaga bakhti ah doonta la soo saaro. Agabka loo adeegsado si libaax badeedka loo bakhtiiyo waxa ka mid ah in Damrad lagu dhifto, damraddu waa bir sida waranka oo kale u samaysan inta nin gacan miisaaman oo xoog lihi isla kala jiido libaaxa wadnaha ugu shubo.
Waxa kale oo la adeegsadaa in inta libaaxa duufaanka saxiimadda madaxa loo soo saaro, rootaal madaxa lagala dhaco . rootaalku waa ul aad buuran oo libaax badeedka lagu garaaco.

Hababka kale ee libaax badeedka lagu qabto waxa ka mid ah adeegsiga Nastaca. Nastacu waa bir sida jilibka oo kale u qaroofan, balse aad uga xoogan ugana dheer taasi oo inta libaaxa la soo dhoweysto qamanka laga soo suro, ka dibna la rootaaliyo ama saxiimadda lagu soo saaro.

REER XEEBEEDKU waa dad dhiirrigelintu qanjaha joogto. Mid baa maanta doonanaya kalluun, gorof maran buu la soo laabanayaa. Markaas buu subaxdii kale ku celinayaa, wuu soo waayayaa. Subaxii dambe buu ku kallahayaa, isaga quus jooga, subaxaasna waa soo bayl qaadayaa.

Markaas buu go'aan ku gaarayaa in meeshaas xeebta ah ee tolkiis iyo taagtiis mid oollin in uu isaga tago, raggii wadaygiisa ahaa baa darfaha qabsanaya oo dhahaya — “BAD LAGAMA DUDEE, WAA LOO DUDAA”, oo la micne ah, marka bad wax ka soo weydid markaas bay ugu caano badisaaye ku laabo oo ha rajo dhigine ku dud oo ayada ku caro, meeshii aad shalay wax ka soo weyday baad maanta shabaag buuxda kala imaanaysaa.

Mar kale mid ku dhahayaa;
“BAD XARIG BAA KU DHAMMAADEE XUUD KAMA DHAMMAADo” — Maahmaah, Bad-dhac.

Oo la micne ah — “badda xargaha gargoorrada iyo shabaagtaa ku dhammaadee ama gunteeda gaari waayee, xuud/libaax-badeed kama dhammaado”.

# BAD DHAC MALUU KU HURDAA.

— MAAHMAAH,
BAD DHAC.





> MAGAC BILAASH UMA BAXO.
>
> — MAAHMAAH SOOMAALIYEED.

# MAGAC BIXINTII

## HORE EE SOOMAALIDA



# BALLAYSIN

## *IBRAAHIM AXMED CALI*

Waxay Soomaalidu ku maahmaahdaa "ballaysin bir ka adag". Iyaga oo u jeeda cawada iyo ayaanka qofku uu leeyahay ee uu ka dhaxlo xilliga iyo saaca uu kaga soo beegmo maalinta koobaad ee bilawga u ah noloshiisa adduunka. Waatii gabadh Soomaaliyeed oo heello-maal ahayd ku buraanbur ku tidhi, iyada oo reerkooda ammaanaysa:

*Xuweerada gacalka xidid bay u leeyihiin, Ragga qawaaxdiisa qayb bay u leeyihiin,*
*Qaalmo deer, deeran qayb bay u leeyihiin,*
*Qaanka heylaha leh, qayb bay u leeyihiin,*
*Dhallinyar qoodhaadha qayb bay u leeyihiin,*
*Dumarka tii quruxsan qayb bay u leeyihiin,*
*Heey waa buruudkood oo waa ballaysinkooda.*

***BALLAYSIN:*** waa labo iyo toban walxood oo ka mid ah Urjiga Alle samada ku qurxiyay. Alle wuxuu ku yidhi, Suuratul Buruuj "والسماء ذات البروج", waxaan ku dhaartay fagaagga ballaysinka leh. Buruud iyo ballaysin na, waa wax keliya Afsoomaali ahaan na wuxuu ka dhigan yahay, meel la tilmaamsado ama la eegto si looga anboqaado oo saddex jaad kala ah:

- ***BALLAYSIN ODEY:*** ballaysin odayadu waxay ku macneeyaan inuu yahay meesha ay bishu ku dhalato. Waana god ama aqal ka mid ah 28 meelood ee dayuxu u hoydo.

Markuu ambo dhigto, dhulka iyo ciddii laga abuuray ba, wuxuu ku reebaa raad-dhaqan21. Raadkaas baa wax ku abuura qofka bishaas dhasha oo sidaas ayuu xidhiidh weyni uga dhexeeyaa, dabeecadda dhulku uu ku dhaliyo ama uu ku raadeeyo iyo waxa dhulka ka soo bilqama ee aadamuhu ka midka yahay oo intuba meeshaas bay ka soo unkamaan. Markay sidaasi dhacdo, ayuu meeshaas dabci gooni ah u yeelaa oo leh midab laga falkiyo. Magacyada labo iyo tobanka ballaysin, jaantuska hoos ku xusan baan ku sheegi doonaa iyo siday weliba u kala baxaan. Ballaysinadu waxay ka bilaabmaan afarta mudug oo midkiiba saddex buu u sii kala baxaa. Arrintaas oo ka dhigan labo iyo tobanka bilood in midkiiba leeyahay saddex guntin ama saddex tobnaad oo waxay sidaas ku noqdaan 36 dabeeco oo isku ab ah ama isku isir ah. Tobanka hore dadka dhashi, waa isku mid, sidaas oo kale uun bay labada xidhmo ee kalena yihiin. Sannaddadu na sida bilaha uun bay yihiin isku xidhmo oo tobankii sano ba waa isku mid.

Ballaysin kasta ba wuxuu leeyahay bil, muuqaal, min iyo waliba summad u gaar ah. Labo iyo tobanka summadood ee ballaysinnadu leeyihiin, way la

shaqeeyan summadaha oo waxa lagu akhriyaa minanka faalka. Waxan habkaas ku dhigaalay qoraalka aan ugu magac daray *"Miisaan iyo Magiigane"* oo ka dhigan habka summadaha loo akhriyo. Ninka faalka yaqaani wuxuu helaa akhrista 16 ka summadood ee ay ka kooban tahay fartii hore ee Soomaalidu waana sidaan rumaysanahay 22. Lix iyo tobanka *MIN* ee *FAALKA* waxay Ballaysinadu ka heleen 13 aqal ee minanka k a mid ah. Marka la isku akhrinaayo faalka iyo ballaysinada na waxa loo yaqaan (dhigaal-dhigane). Sidaan ognahay markay sidaas wax yihiin dhigaal-dhigane waxa ka maqan 19 kale oo kala ah:

- ***QABQABLE:*** *waa min arliya ah kana maqan, wuxuuna helaa tiro lix ah.*
- ***DAAXIG:*** *waa min naari ah kana maqan, wuxuu helaa tiro toddoba ah.*
- ***DAAXIG:*** *waa min naari ah kana maqan, wuxuu helaa tiro toddoba ah.*
- ***MINSUBAGLE:*** *waa min hawaa'i, ah kana maqan, wuxuu helaa tiro lix ah waxayna ka koobanyihiin19 dhagax.*

| MUDUG | MALLUUG | BALLAYSIN |
| --- | --- | --- |
| CARRO | DIIMAALE | 2 *Dibi*<br>6 *Gabar-ugub*<br>10 *Orgi* |
| DAB | WOOBLE | 1 *Wan*<br>5 *Libaax*<br>9 *Qaansoole* |
| DHARAB | DABYLE | 3 *Mataano*<br>7 *Miisaan*<br>11 *Biyoshub* |
| DHALO | DUSA | 4 *Carsaanyo*<br>8 *Dabo-aleel*<br>12 *Kalluun* |




*Jaantusku qaabkuu u qoranyahay, waxa lagaga faa'iidaystaa saddex-xagalka ballaysannada oo ah marin-walaxeedka ahna tan sameysa dabeecadda. Saddex-xagalku waa godka 9aad iyo ka 5aad. Tusaal;,*




Sidaan kor ku soo sheegnay, waana meesha sannadka ku keenta isbadalka oo ah kan nooluhu u baahanyahay kaas oo ku xidhan jiritaankiisa oo ballaysannadu sidanbay kala yihiin. Ballaysinnadu ama buruujtu markay sidaas yihiin, waxaan halkan ku soo qaadanaynaa qaabka soo galaha, sii baxaha iyo meelahay kaga kala sugan yihiin fagaagga.

*■ **BALLAYSINKA WAN** markuu soo baxo, waxa dhaca ballaysinka Miisaan. Ballaysinka Orgi xilligaas wuxuu joogaa badhtanka samada. Ballaysinka Carsaanyo ayaa isna xilligaas ku beegan dhulka hoostiisa.*

*■ **BALLAYSINKA DIBI** markuu soo baxo, waxa dhaca ballaysinka Daba- Aleel. Ballaysinka Biyo-shubna fagaagga sare badhtankiisa ayuu joogaa. Ballaysinka Libaax uu hooseeyaa oo dhulka hoostiisa ayuu ku jiraa.*

*■ **BALLAYSINKA MATAANO** markuu soo baxo, waxa dhacaballaysinka Qaansoole. Ballaysinka Kalluunna xilligaas cirka badhtankiisa ayuu taagan yahay. Gabadh-ugub na, dhulka hoostiisa ayay joogtaa oo way hooseysaa.*

*■ **BALLAYSINKA CARSAANYO**, markuu soo baxo, waxa dhaca Ballaysinka Orgi. Ballaysinka Wan na xilli gaas wuxuu joogaa cirka-badhtankiisa. Ballaysinka Miisaan na uu hooseeyaa.*

*■ **BALLAYSINKA GABADH-UGUB**, markuu soo baxo waxa dhaca Ballaysinka Kalluun. Ballaysinka Mataano waxay joogaan samada badhtankeeda. Ballaysinka Qaansoole wuxuu joogaa dhulka hoostiisa.*

*■ **BALLAYSINKA MIISAAN** markuu soo baxo, waxa dhaca ballaysinka Wan oo Ballaysinka Carsaanyo na wuxuu joogaa badhtanka fagaaga sare. Ballaysinka Orgina wuxuu joogaa dhulka hoostiisa.*

*■ **BALLAYSINKA DABA-ALEEL** markuu soo baxo, Ballaysinka Dibi ayaa dhaca. Libaaxna wuxuu joogaa fagaaga sare badhtankiisa. Ballaysinka Kalluuna na dhulka hoostiisa ayuu joogaa.*

*■ **BALLAYSINKA QAANSOOLE** markuu soo baxo, waxa dhaca Mataano, Ballaysinka Carsaayo wuxuu joogaa fagaaga sare. Ballaysinka Kalluuna dhulka hoostiisa ayuu joogaa.*

*■ **BALLAYSINKA ORGI** markuu soo baxo, Carsaanyo ayaa dhaca. Ballaysinka Miisaana na fagaagga sare ayuu joogaa. Wan kuna dhulka hoostiisa ayuu joogaa.*

*■ **BALLAYSINKA BIYOSHUB**, markuu soo baxo, ibaax ayaa dhaca. Ballaysinka Dabo-aleel na fagaagga- sare badhtankiisa ayuu joogaa. Ballaysinka Dibina dhulka hoostiisa ayuu joogaa.*

*■ Ballaysinka Kalluun markuu soo baxo, Ballaysinka Carsaanyo ayaa dhacda. Ballaysinka Qaansoole fagaaggasare badhtankiisa ayuu joogaa. Ballay- sinka Mataano dhulka hoostiisa ayuu joogaa.*

*■ Ballaysinka Libaax markuu soo baxo, BallaysinkaBiyoshub ayaa dhaca. Ballaysinka Dibi na fagaaggasare badhtankiisa ayuu joogaa. Ballaysinka Kalluunku na dhulka hoostiisa ayuu joogaa.*

*Afar gees ku waa godka 4aad iyo ka 10aad.*




*Lix geesku waa godka 3aad iyo kan 11aad.*






# MAGAC BIXINTA

*MUNA AXMED CUMAR [MULLAAXO]*

***MAGAC*** Waa astaan jabaqeed lagu kala sooca nooleyaasha iyo ma nooleyaasha lagu na siiyo summad gooni ah, si looga garto mid ba midka kale.

Soomaalidu, marka ay magac bixinta samaynayaan waxa ay u maraan habab dhawr ah, hab waa kitaab-fur, hab waa okolasho lala jeclaado magac uun, hab waa ballaysimo, habna waa sammin iyo saado raac. Ballaysimuhu waa u eegista burjiyada qofku dhashay iyada oo loo eegayo hadba jiminta uu ka dhashay, godadka dayaxa ama cadceedda. Habkaan waxa aad ka xusuusataa magaca - **DIRIR** oo ah godka 16'd ee dayaxa kaas oo ah god ay ragga ku sabcan yihiin. Habkan, qaabka loo eego waxaa la dhahaa TAAWIL/TAAWIN, waa na hab loo eego qofku godka uu dhasho, taas oo lagu xagliyo burjiga godkaas iyo inta uu ka sito.

## MAGAC BIXINTU LABA HAB AYAY MARI JIRAY, LABADAAS HAB OO KALA AH: HABKA KITAAB-FURKA IYO HABKA MAGAC SOOMAALI BIXINTA.

— HABABKII MAGAC BIXINTA EE SOOMAALIDII HORE.

Dowladaha caalamka qaarkood waxaa ka jira buugga magaca, oo ay dowladdu soo saarto kaas oo aan ilmaha loo bixin karin magac bannaanka ka ah. Haddii qof uu wato magac ka geddisan kan ku qoran buugga magacyada dhaladka ah, dowladdu ayaa la wareegi jirtay xuquuqda magac bixinta buugga na uga soo hei jirtay magac ay la jeclaato, haddii waalidkiisa ku adkaysta na waxaa dhacda in aan la siin wax dhalasho ama aqoonsi ah. Waxaa in dhawaale Soomaalida ku soo batay magacyo laga soo minguuriyey filimaanta carabta, Turkida iyo reer galbeedka. Waa musiibo aad u weyn in laga guuray magacyadii Soomaalida ee asalka ahaa. Magacyada Soomaalida waxaa lagu heli qaabab kala duwan sida aan kor ku soo xunayba. Bal maanta aan galno magacyadii hore ee ay la bixin jireen Soomaalidu iyada kuwaas oo ku fadhiyey micne la garanayo.

*Afar qofoo wallaalo ah haddii ruuxba beled aado*
*Mid waliba akhlaaq gooniyuu kala imaadaaye*
*Arrinna kuma heshiiyaane way kala irdhoobaane*
*Mid waliba adaa toosan bay ula ekaataaye*
*Sidaasay barkood u eg yihiin inamadeenniiye.*
*— XAAJI AADAN AFQALLOOC, CEERIGAABO.*

***SOOMAALIDII*** hore magaca ay u bixinayaan ubadka way u meel dayi jireen waxaana loogu doori jiray sabab cad. Magacbixintu may ahayn wax sahlan ama magac inta meel laga arko ama laga maqlo loo bixiyo ilmaha. Waxa ay ahayd wax macno ugu fadhiya reerka ama ujeeddo cad leh. Magacyadii hore waxa ay ahaayeen qaar aan meel kale laga soo rarin ama cid kale laga soo xigan. Waxa ay ahaayeen magacyo asal ahaan Soomaali ah ama qaar lagala soo baxay diinta Islaamka.

Magacbixintu laba hab ayay mari jiray, labadaas hab oo kala ah: habka kitaab-furka iyo habka magac Soomaali bixinta.

## KITAABFUR

Habkan koowaad ee magacbixintu waxa u uahaa mid ku salaysan diinta islaamka maadaama Soomaalidu yihiin dad muslimiin ah. Habkan marka la raacayo magaca waxa laga soo qaadan jiray magacyada ku xusan Qur'aanka kariimka ah, magacyada Anbiyada iyo Rususha, magacyada ubadkii Anbiyada, magacyada Saxaabadii Rasuulka (NNKH), magacyada malaa'igta, magacyada dumarkii rususha iyo magacyo kale oo quraanka lagu xusay.

Magacyada ku yimaadda habkan kitaab furka waxaa ka mid ah kuwan hoos ku xusan:

- ***CABDILLAAHI, CABDIRAXMAAN, CABDISHAKUUR... IWM.*** *Magacyadan MACNAHOODU: waa addoonkii alle. Waa magacyo aad loola baxo illaa maanta, asalkooda iyo habka la raacayna ay yihiin qiritaanka addoonimada Alle iyada oo la raacinayo sagaal iyo sagaashanka magac ee Ilaahay mid ka mid ah.*
- **MAXAMED, IBRAAHIM, MUUSE, CIISE, NUUX, AYUUB IWM:** *Magacyadan oo ah kuwo illaa maanta lala baxo waxa asal ahaan laga keenay Qur'aanka waana magacyadii Anbiyadii iyo Rusushii Ilaahay.*
- ***JIBRIIL, MAKAAHIIL .... IWM:*** *magacyadan waxa asal ahaan laga keenay magacyada malaa'igta lagu xusay Qur'aanka kariimka ah.*
- **CISMAAN, ABUUBAKAR, CUMAR, BILAAL.... IWM:** *magacyadan waxa laga keenay asxaabtii Nebi Maxamed (NNKH).*

- **QAASIM, IBRAAHIM, FAADUMO.... IWM:** *Magacyadan waxa laga keenay ubadkii Nebi Maxamed (NNKH).*

- **CAA'ISHA, KHADIIJA, SAYNAB, SAFIYA... IWM:** *magacyadan waxa laga keenay dumarkii ama xaasaskii Nebi Maxamed (NNKH).*

- ***XAAWA, MARYAN ..... IWM:*** *magacyo kale oo quraanka lagu xusay.*

# XERUDHALAN

Marka laga yimaaddo habka kitaab-furka oo magacyada ilmaha dhashay loo bixinayaa ay ku salaysnaayeen kuwo xidhiidh la leh diinta Islaamka, waxa kale oo jiray hab labaad oo Soomaalidii hore magaca ula bixi jirtay.

Habkan labaad waxaa la eegi jiray dhinacyo badan oo ay ka mid yihiin, xilliga uu dhashay ilmuhu, astaamaha uu leeyahay, iinaha uu leeyahay, quruxdiisa, midabkiisa, maalinta uu dhashay, saadaal/duco iwm.

## 01 XILLIGA

xilliga ama goorta uu dhasho ilmuhu ayaa loogu halqabsan jiray, tusaale ahaan u fiirso magacyadan:

- ***COLAAD, GULUF, LOOYAAN IYO DIRIR*** *waxa loo bixin jiray ilmaha dhasha goor lagu jiro colaad ama xaalad dagaal.*

- ***GEEDDI*** *waxa loo bixin jiray ilmaha dhasha iyada oo lagu jiro geeddi ama reerku guurayo.*

- *Geeddi dheer iyada oo lagu jiro ilmaha dhasha ee wiilka ah waxa loo bixin jiray:* ***HAYAAN, KAYNAAN, QAYAAD IYO KUNNI.***

- *Goor habeenimo ah oo la guurayo ilmaha dhashana waxa loo bixin jiray:* ***GUURRE.***

- *Ilmaha dhasha waagu marka uu baryo waxaa loo bixin jiray: Salaad, Waaberi,* ***WAASUGE IYO WAA-DHAWR.***

- *Dharaar cad ilmaha dhashana:* ***GADIID, DHARAAR AMA CADCEED.***

- *Ilmaha goor fiid ah dhasha waxa loo bixin jiray:* ***FIIDOW, CAWAYS AMA GALAB.***

- *Iyada oo uu roob da'ayana:* ***ROOBLE, XAALI, RAYS, XAREED(O), COSOB, IYO HANQAR.***

- *Waxa sidoo kale loogu magac dari jiray ilmaha maalinta uu dhasho. Tusaale ahaan:* ***JIMCAALE, ISNIINO IYO AXADO.***

## 02 IIN AMA ASTAAN

waxa kale oo tixraac laga dhigan jiray astaan ama iin uu ku sifoobay ilmaha magaca loo bixinayaa. Xagga iinta marka aynu eegayno, magacyadan baa ka mid ah:

- ***BARRE, BAROW AMA BEYLE:*** *waxa loo bixin jiray ilmaha ku dhasha bar jidhkiisa meel ka mid ah ku taalla.*

- ***BURAALE:*** *ilmaha dhasha isaga oo leh buro ku taalla wejigiisa ama jidhkiisa.*

- ***FOOD:*** *Ilmaha soo dhasha isaga oo leh food yuuban oo hore u soo taagan.*

- ***XAYD:*** *Ilmaha timihiisu dib u xaydan yihiin ama u faydan yihiin.*

- ***XAAD, DHOGOR, HALAB:*** *ilmaha dhasha isaga oo jirkiisu xaad tiro beel ah leeyahay.*

- ***SHAQLAN, SHAQALLE:*** *ilmaha dhasha isaga oo mandheertu ku maran tahay.*

- ***DHAASHANE/SUBKANE, SUBKAN/ DHAASHAN:*** *ilmaha dhasha isaga oo jidhkiisu dhalaalayo oo aanu engegnayn.*

- ***SUGULLE, MEYGAAG, QUULLE, HAYBE, GEYDHE, BEYLE, DHUGUS, MAAHIR, YUSUR, JINOW, HIRA, ADAR:*** *Ilmaha leh midab madow.*

- ***BIIXI, CADDUUR, CARAB, XOOSH, CADDAANI, CADDAAWE, XAASHI, DHUUXO, CUDBI, DHOOL, TIRIIG IYO SIRAAD:*** *ilmaha leh midab cas ama midab furan marka uu dhasho.*

## 03 SAADAAL

*Marka laga yimaaddo xilliga ilmuhu dhasho iyo astaanta oogadiisa ka muuqata, waxa kale oo magacbixinta loo cuskan jiray iyada oo ilmahaas wax wanaagsan loo saadaalinayo. Tusaale ahaan magacyadan hoos ku xusan oo dhami waxa ay ahaayeen magacyo looga danleeyahay in ilmahaas loo saadaaliyo khayr, hanti/xoolo, aqoon/cilmi iyo wanaag/dad-la-socod:*

***SAMATAR, SAMAKAAB, BUUNI, SHARMAARKE, BARKHAD, GEELLE, KHAYRE, LIIBAAN, BARWAAQO, AYAANLE, SAMAWADA, HODAN, HIBAAQ, SAREEDO, QUMMAN, MULLAAXO*** *iwm.*

## 04 AMMAAN

*Magacyada ammaanta ah ee ilmahaas quruxdiisa, qorqornaantiisa ama hilboonaantiisa lagu ammaani jiray waxaa ka mid ah:*

*Maydhane, Qorane, Xalane, Miigane, Hufane, Shuuriye, Taani, Buux, Qalinle, Saluugla, Saxarla, Midhifla, Qamaansha, Xaddiyo, Idil, Cosob, Dahabo, Indhodeeq, Baar, Xaadsan, Haweeya, Cawrala, Ceebla, Maandeeq, Dhudi, Dhilan, Shuun/Ugaaso iyo Qoran.*



## 05 UJEEDDO KALE

***UJEEDO KALE:*** *Intaas marka laga soo tago waxa jira magacyo kale oo tiro badan oo loola bixi jiray ujeeddooyin kala gedgedisan. Waxaa ka mid ah magacyadaas: Kadiye, Mire, Gaaxnuug, Gaas/Guutaale, Cabsiiye, Keenadiid, Sooraan, Ileeye, Qawdhan, Bulxan, Habbane, Abtidoon, Magan, Nageeye, Kulmiye, Dhimbiil, Mihiya, Batuulo, Xuubey, Faayo, Degmo, Mahado, Kaaha, Sureer, Milgo iyo Weris.*

*Waxa jira magacyo dad badani ku qaldaan in ay yihiin asal Soomaali ah ama ay raacsan yihiin labadan hab mid ka mid ah balse aan shaqo ku lahayn. Magacyadan badankoodu waa soo galeeti dibedda inagaga yimid oo aynaan hiddo iyo dhaqan toona u lahayn. Macayadaa waxaa ka mid ah: Yurub, Sitiin, Istanbuul, Istarliin, Iglan, Qamar, Shamis, Dayax, Ismahaan, Cabiir iwm.*



# TIXRAAC


- *Barwaaqo, Cabdiraxmaan C. Faarax. Magac Bilaash Uma Baxo: Ujeeddooyinka magacyada iyo naanaysaha Soomaaliyeed. 2016, Hal-aqoon Publishers.*
- *Cabdalla Cumar Mansuur, Annarita Puglielli. QAAMUUSKA AF-SOOMAALIGA. 2012, RomaTrE-PRESS.*

# GEEDKA DACARTA

*DACAR IYO DHUNKAAL LA ISKU DARAY DAAWO LAGA DOON!*

***MAHAD JEBIYE***

### GUUDMARKA DACARTA

Waxaa jira boqolaal nooc oo dacar ah oo dunida daafeheeda ka baxa, noocyo badan ayaa jira waxay ku kala duwan yihiin midabka qaab dhismeedka dhererka iya dhumucda laamaha, waxaan jira jaadad badan oo dhulkeena u gaara kuwaasoo culimada dhirtu ay siiyeen magacyo soomaliyeed iyo magaca goo- bo gaar ah.

Qof Soomali ah kolkii uu maqlo dacar waxaa maankiisa ku soo dhacda kharaarka dacarta uun, hase ahaatee sheekada dacartu intaas waa ka dheer tahay, weligiis banii aadamku waxaa uu u isticmaali jirey daweynta, qarniyadii geddoomey iyo dadyowgii hore ee bilowga ahaa, Masaaridii hore ayaa kaga tegay raadad ilaa dhawr kun oo sano ka hor meelihii ay wax ku sawiri jireen kuwaas oo muujinaya inay qayb ka ahayd dacartu hab dhaqankoodii maalinlaha ahaa, waxa ay ugu yeeri jireen GEEDKII WAARIDDA.

Waxyaalaha la isu hadiyeeyo xilliga baroordiiqda dhimashada iyo aaska ayuu ka mid ahaa. Dacartu waxay kaalinta kowaad kaga jirtaa aduunyada isqurxinta, iyo daryeelka maqaarka dadka, ka samaynta waxyalaha lagu dhaashto, lagu daryeelo maqaarka iyo dawooyinka dabiiciga ah, waxa ayna qayb ka tahay boqollaal nooc oo kareemo iyo dhaashi badan oo maanta dunidan aad loo jecel yahay kuwaas oo lagaga maarmay kuwa dhigooda ah ee kimikada ah.

Hooyooyinkii hore ee Soomaaliyed waxa ay caan ku ahaayeen inay ilmahooda nuujiyaan ilaa uu ka koro kolkaas oo uu ilmuhu aad u qabatimo nuugista hooyadiis ilaa uu welef badan ka qaado oo ay adkaato in laga jaro naaska, tabta ugu fiican waxay ahayd in hooyadu naaska dacarta dhacaankeeda ka mariso ibta, markii uu dhadhamiyo na waxa uu la kulmayaa dhadhan ka duwan kii uu u bartay.

Guryaha ayaa lagu qurxiyaa iyadoo weel gudihiis lagu beero markii la qallajiyo laameheeda oo la gubo cayayaanka gaar ahaan kaneecadu guryaha wey ka fiigtaa, shinnidu aad bay u jeceshahay dhabaqda dacarta, mlabka ay ka samaysana wuu ka qaalisan yahay noocyada kale.

Cawda laga sameeyo dermooyinka iyo gogosha kale ayaa lagu midabeeyaa casaan ama madow iyo weliba midabka hibaaqa loo yaqaan taasoo abuurta naqshado qurxoon oo ildoogsi leh.

Marka laga soo tago dawo dhaqameedda Soomaalidu u adeegsato dacarta waxaa jira adeegsiyo kale oo shaacsane ah kuwaas oo dadyowga caalamku badi ay qaayibeen waxaa na ka mid ah;

Finanka Wejiga oo lagu daweeyo, Cuncunka maqaarka oo lagu daweeyo, Qarasfaal, duumada, yaraynta heerka sonkorta ama macaanka, suuska ilkaha, cirrid dhiigga, Gubashada sahlan, yaraynta sunta jirka, dacarta waxaa ku jira - waxaana ka mid ah fitamiinka A, C,E, Folic acid, Choline, B1, B2, B3, B6 iyo B12. Waxaa kaloo ku jiro macaadin-ta muhiimka ah sida Calcium, Magnesium, Zinc, Chromium, Selenium, Sodium, Iron, Potassium, Copper iyo Manganese. Kordhinta difaaca jirka, yaraynta caabuqa (bararka nabarrada).

Ugu dambayn dalkeenna waxaa ka baxa in ka badan 30 nooc oo dacar ah, gobollada waqooyiga iyo galbeedku waa deegaannada ugu badan ee ay ka baxdo dacartu. Noocan guduudan ee halkaan ka muuqda waxaa loo yaqaannaa — DACAR-MAROODI waxa ay aad uga baxdaa gobolka Bari, Sanaag & Waqooyi-galbeed.

*DACARTU BA MAR BAY MIID DHASHAA MUUDSATAA DHABAQE!*

*— QAASIM QAASIM WAQOOYI.*







# QUDUN QUUTO

*SIDII QUDUNQUUTO QAAXO YAREEY*
*MARKAAN KU ARKAAN QABOOBAA!*

*AXMED SOOMAALI*



## QOROFROFLE

Sida la sheegay qudunquutadu biyaha ma cabto waa shimbiraha nooca dhexe ee gayigeenna laga helo waa midho cun sidoo kalena cayayaanka cunta Waxay leedahay afdheer oo u sahla inay si degdeg ah cuntada u liqdo, waa shimbir dadka la nool oo aan guryaha laga magaalooyinka, si fududna u rabbaysmi karta.

Qudunquutadu waa laba jaad, [1]. Nooc jin yar oo af gud- uudan waana ta ugu caansan iyo [2]. Nooc kale oo qaro weyn, lagana helo dooxooyinka, harooyinka, jabaddada, iyo toggagga. Waxa keliya ee ay ku kala duwan yihiin labadan nooc waa midabada afafkooda. Magacyo kala duwan ayay leedahay sida; *qudunquuto, soodaf, honqororofle, qororofle, caano-doox iyo horog*. "MA AF QUDUNQUUTUU SITAA" waxay Soomaalidii hore dhihi jireen qofka qaata ama jeebka ku rita af qudunquuto, iyada oo la aamminsanaa in qofkii qaata qalka Qudunquutadu uu san waxba waayin sida; waxyaabaha ka luma iwm, waa se caado hoosaad aan dadka dhammi wada gaarsiisnayn. Siday dadku sheegaan Qudunquutadu waxay saadaalisaa SADCAAL, haddii ay subax hore ama galab guriga reerka aad uga cido waxaa la fishaa qof sadcaala oo reerkaa ku soo wajahan. Waxay leedahay ci' u gooni ah wayna isu jiibiyaa badanaa laba-la- ba ayay u wada ciyaan, iyaga oo baalasha kor u qaad-qaada.

Waa shimbir gaabisa marka ay duulayso hadba geed ayay sii fuushaa xitaa haddii ay masaafo dheer u socoto. Marka ay dhulka soconayso ma tillaabisee way kadlaysaa, micnihii wa bood booddaa. Waa shimbir caqli badan, waa fariid basar fiican, dhasheeda waxay dhigataa dalool ay ka xorodday geed adag oo sal weyn ama duddun aad u dheer meel afkeedu geli karo uun bay ka daloolisaa waxayna dusha ka marisaa saxaradeeda, halkaas ayay ka quudisaa isku si ayay u xannaaneeyan labkeedu iyo dheddigeeduba dhashooda yar ilaa inta ay ka korayaan wayna la socdaan intii muddo ah waxayna badanaa dhashaa laba ukumood markiiba.



Haddii godku afkiisy weyn yahay, waxa geesaha uga soo dhistaa xaarkeeda, marka uu qallalana waxa uu noqdaa shayga ugu adag ee shimbiri samayso. Geesaha ayey ka soo ururisaa, meel aad u dalool yarna way u bannaysaa.

Sida la arkay, bahallada ay ka mid yihiin halaqyadu uma soo dhawaadaan. Waxaa la aamminsan yahay, xaarka Qudunquutadu ay ku darto dheecaanno adkeeyo oo ayada gaar u ah, dheecaannadaas oo sidoo kale halaqyadu ka caaggan yihiin.

Midab ahaan waa shimbir dusha madaw iyo tiix-tiix caddaana ku leh hoostana cad waxay leedahay af soo rogan oo guduudan, kuwo kalena waxa ay leeyihiin af madaw ama hurdi ah, cunaheeda waxaad mooddaa in laga xagtay ama diirka laga qaaday, waxa ay leedahay lugo tabaraysan oo awood badan, marka ay dhulka marayso way boodbooddaa, Waxaa aad looga helaa dhulka ciidda ah ee xagarka badan. Liishaanka indhaheeda waa xagal fidsan (180), fogaan araggeedu ma xooggana balse waa mid ilooti badan aad na u dhiifoon.

Marka uu gabbalku gaabto ayay carrawdaa, marka ay is dilayso waxaa ka dhex dhaca dagaal ba'an, afkeeda dheer ayay isla gashaa oo is waydaarisaa weli makusoo baxday laba qudunquuto oo dagaallamaya ama mid la dhul dhigay?

Waxay isu raacdaa koox-koox waxa ayna caan ku tahay inay goonka, duddumo goofyada, bawdka xeryaha, geedaha waaweyn hoostooda, iyo casaska oo ay qodato dhulkana farato

Mid baa yiri, isaga oo ammaan la kor istaagaya inan uu caashaqsanaa;

"SIDII QUDUNQUUTO QAAXO YAREEY,
MARKAAN KU ARKAAN QABOOBAA".
— DHAANTO.



# GODADKA MAANSADA

WAA CILMI KALA SHEEGA
TIXDA DHAN IYO DHANTAALAN.
— MIISAASNKA MAANSADA

CALI ILEEYE

## GUUDMAR

Tixda Soomaalidu waxa ay u qaybsantaa laamo kala duwan oo loo yaqaanno godadka maansada. Godadka maansada ee tusaalayaasha loo heli karaa waa ay badan yihiin, bal se qaar ka mid ah ayaynu qormadan ku soo bandhigi doonaa.

Godadka maansadu baho baho ayay isu raacaan, intii isku tafiir ahna waxa loo yaqaannaa dir maanso. Baadhistaan waxa ku jira in ka badan 5 dir oo waaweyn, oo ay ku bahoobeen in ka badan 60 god maanso.

## ERAYFUR

- ***SHAQAL:*** Waa xarfaha alifba'da intooda shanqadha leh ee shibbenayaasha codka u sameeya. Waxa ay u qaybsamaan shaqal gaab:[a, e, i, o, u]; shaqallo dhaadheer: [aa, ee, ii, oo, uu]; iyo shaqallo dhexe: [aw, ay, ey, ow, oy]. Miisaanka marka la joogo shaqallada dhexe waxa loo tiriyaa sida shaqaldheeraha.

- ***ALAN:*** Waa xubnaha dhawaaq ee erayga. Waxa ay u qaybsamaan alan-gaaban sida: ab, ba; iyo alan-dheer sida: aab, baa.

- ***DHERER:*** waa tirada shaqallada ama alannada meerisku ka kooban yahay. Godadka qaar waxa la tiriyaa shaqalka, kuwo kalena alanka.

- ***HABDHAC:*** Waa habka alannadu isuraacaan meeriska dhexdiisa oo tiro lagu muujiyay.

# JIIFTADA & WALAALAHEED

***JAANTU*** Waa habka erayadu isu raacaan meeriska dhexdiisa, oo cod lagu muujiyay. Jiiftada iyo walaalaheed ama dirka jiiftadu, wuxuu ka kooban yahay godad farabadan bal se waxa aynu ka xusi doonnaa 8 god oo ka mid ah, kuwaas oo kala ah: mooyaha, guuguulaha, maqaley, mullaaxda, jiiftada, haanta, masafada iyo gabayga.

## MOOYAHA

Mooyuhu waa godka ugu gaaban dirka jiiftada, waxa uu ka unkan yahay afar shaqal ama laba alan-dheere oo midoobay (Hoo+beey).

***DHERERKA:*** *4 shaqalle*
***JAANTA:*** *Hoobeey*
***HABDHACA:*** *2:2 Midhaha*

*MOOYAHA* ee asalka ahi waxa ay ka soo jeedaan hees-dhaqameed la qaado marka hadhuudhka la tumayo. Iyada oo haweenku tibaha talantaali mooyaha ugu tumaya ayaa ay heestan ku luuqeeyaan.

*Mooyaha*
*Malablaha*
*Magicii*
*Mooyaan*
*Ciiltire*
*Calaliye*
*Ragga dhaye*
*Dumar dhibe*
*Tibahana*
*Cabban iyo*
*Culus baa*
*La dhahaa.*

Mooyaha marka lagu daro hal shaqal ama hal alan-gaab oo gaaban (yo) waxa inoo soo baxaya godkii guuguulaha (Hoobee+yo).

## GUUGUULE

Midhaha guuguuluhu waxa ay ka soo jeedaan heeso lagu xifaalayn jirey doobabka xilliga barwaaqada, iyaga oo hab qofeyn ah, oo guuguulaha la soo marayo loogu sheegayo in ay guursadaan.

***DHERERKA:*** *5 shaqalle*
***JAANTA:*** *Hoobeeyo*
***HABDHACA:*** *2, 2 (1)*

*Guuguule*
*Guugii da'*
*Kakac guurso*
*Geel raadso*
*Gabadh doono.*

Guuguulaha marka lagu daro laba shaqal ama alan-dheere (beey = 2) waxa inoo soo baxaya godkii Maqasha (Hoobeey/ ho+beey).

## MAQALEEY

Maqaley waxa ay ka soo jeedaa midho la tiriyo marka maqasha, geela, iyo riyaha la foofinayo.

***DHERERKA:*** *7 shaqalle*
***JAANTA:*** *Hoobeey hobeey*
***HABDHACA:*** *2 2 (1) 2*

Maqaleey warlaay Malaguu waramay Ina Cumar la dilay Oo Cali la dilay Oo dhiig qulqulay Oo waran dhul galay Maqaley marka hal shaqal ama alangaaban lagu daro (yo ), waxa inoo soo baxaya godkii mullaaxda (Laago) (Hoobeey/hobee+yo) .

## MULLAAXO/LAAGO

Maydhaxda marka ay diirayaan haweenku ayaa ay isku maaweelin jireen heeso ku aroora godka *mullaaxda*. Waa laga yaabaa in duluc kale oo badan isla godkan loo adeegsan jiray, balse, magaca waxa uu ku qaatay midhahan maydhaxda ku saabsan oo ah kuwa ugu guunsan ee godkan laga hayo. ***MULLAAX*** waa maydhaxda inta ugu wacan.

***DHERERKA:*** *8 shaqalle*
***JAANTA:*** *Hoobeey hobeeyo*
***HABDHACA:*** *2 2 (1) 2 (1)*

*Naa laago laago*
*Naa laan galoola*
*Naa meeyla diiran?*
*Kula diiran mayo*
*Anba weeyska diiran.*
*Oo maxaad ku diiran?*
*Gees-goodirkayga*
*Wuu kaa gammuurmi.*

Mullaaxdii marka lagu daro hal shaqal ama hal alan-gaab (oy) waxa inoo soo baxaya godkii jiiftada (Hoobeey/hobeeyo+oy).

## JIIFTO

Jiiftadu waa god ka mid ah kuwa ugu baahsan, ee loogu adeegsi badan yahay laamaha maansada. Badi hees-muusigga Soomaalidu waxa uu ku arooraa jiifto. Jiiftada markii hore waxa isku maaweelin jirey geeljiraha jiifa ardaaga geela marka ay cawaynayaan. Jiiftadu sidaa oo kale waa midhaha ciyaar-dhaqameedda jaandheerta iyo botorka.

***DHERERKA:*** *9 shaqalle*
***JAANTA:*** *Hoobeey hobeeyooy*
***HABDHACA:*** *2 2 (1) 2 2*

*Sida dahabka Maarseey*
*Ama Carabta reer Suur*
*Ama calanka doonyaha*
*Ama qoriga Liiswaar*
*Qalinkiyo dawaadda le*
*Burco qoorta kaga yaal*
*Quruxdaadi lala yaab.*

Jiiftada marka hal shaqal ama alan-gaab lagu daro (bal) waxa inoo soo baxaya godkii haanta (Hoobeey/hobeey/hoo+bal) .

## HAANTA

Caanaha marka ay haweenku lulayaan waxa ay isku maaweeliyaan heeso door ah, heesta ugu caansan ayaa godkan midhihiisa laga soo qaatay. Caanaha oo keli ah looma tiriyo godkan, balse, duluc kasta waa loo adeegsan karaa. Maansada Sirta Nolosha ee Hadraawi waxa ay ku socotaa godka haanta.

***DHERERKA:*** *10 shaqalle*
***JAANTA:*** *Hoobeey hobeey hoobal*
***HABDHACA:*** *2 2 (1) 2 2 (1)*

*Naa baayo naa baayo*
*Naa baayo beesheennu*
*Waa beelo ceebeede*
*Yaan subagga leey bidine*
*Yaan soo bax leey odhane*
*Yaan bilistu ii shirine*
*Baayooy bullooy ii bax*

Jiiftada marka la labanlaabo waxa inoo soo baxaya godkii masafada.

## MASAFO

Masafo ama Jiifto-culimeed, waa god ay isku bah yihiin jiiftada. Dhisme ahaan, masafadu waa jiifto la labanlaabay. Culimada ayaa caan ku ahaa in ay godkan wacdiga iyo waanada ku curiyaan. Sayid Maxamed ayaa lagu xusuustaa tixo badan oo dardaaran ah oo masafo ah oo uu curiyay.

***DHERERKA:*** *18 shaqalle*
***HABDHACA:*** *2 2 (1) 2 2 2 2 (1) 2 2.*
***JIIBTA:*** *Hoobeey hobeeyooy hoobeey hobeeyooy*

*Nin aqdaamo Ferenjiga, maantiyo Abuurriin*
*Ama aaladda u sida, ama awrta ba u rara*
*Ama adhiga ba u qala, ama laba ugaadhsada*
*Ama uba ilaalaa, ama uurka kala jira*
*Ashahaado beeniyo, Islaamnimo ha lagu dhaqo*
*Eebbena namuu odhan, anna ma oggolaan karo!*

## GABAY

Gabayga waxa loo yaqaanney boqorka maansada Soomaalida. Ma jiro god ka mudan gabayga— sooyaal ahaan. Suugaanta ugu badan ee raggii hore innaga soo gaadhay waxa ay u badan tahay gabayo. Gabayga dhisme ahaan waa haanta oo la labanlaabay.

***DHERERKA:*** *20 shaqalle*
***HABDHACA:*** *2 2(1)2 2(1) 2 11(1)2 2(1)*
***JIIBTA:*** *Hoobeey Hobeeyooy Hobeey Hoboye Hoobeeyo.*

*Tix gammuuran oo gaaban oo ceeynka lagu giijay*
*Waxan arar gadaanka ugu sudhi ama u guud saaray*
*Suubaan galgalineed kolkuu marayo geeleennu*
*Say awrtu ugu guuxdo ooy halo u goojaane*
*— CABDULLAAHI M. DHOODAAN.*

# *HEELLADA & WALAALAHEED*

*HEELADA IYO WALAALAHEED* ama dirka heeladu, wuxuu ka kooban yahay godad farabadan bal se waxa aynu ka xusi doonnaa 5 god oo ka mid ah, kuwaas oo kala ah: caddaloolka, saarka, sabaalaha, heellada iyo buraanburka.

## CADDALOOLKA

CADDALOOLKU waxa uu ka soo jeedaa ciyaar habeenkii carruurtu dheesho. Inta garoon la jeexo, ayaa qori astaan leh la tuurayaa. Qofkii qoriga soo hela ee xarriiqda la soo gala ayaa dhibco loo qorayaa. Duluc kasta waa loo adeegsan karaa godkan.

***DHERERKA:*** *8 shaqalle*
***JAANTA:*** *Hobeey hoobeeyo /Hobeeya hobeeya*
***HABDHACA:*** *(1) 2 11 2 (1)*

*Maroodi maroodi*
*Maroodi cadhoole*
*Haddii col la sheego*
*Cadaadda ku meere*
*Hashii cosob waatan.*
*Cabban iyo*
*Culus baa*
*La dhahaa.*

Caddaloolka marka lagu daro laba shaqal ama hal alan-dheere waxa inoo soo baxaya godkii saarka (baarcadde).

## *SAARKA/BAARCADDE*

Saarku waxa uu inta badan qabtaa dumarka; qofka uu haleelana waxa la yidhaah- daa 'saar baa haya', waana laga tumaa qofka, iyada oo la adeegsanayo heeso, durbaan, ciyaaro, xoolo la qalo, iwm. Midhaha saarku waxa ay ka soo jeedaan heeso la tirin jiray xilliga laga tumayo qofka saarka. Baarcadaha ayaa ay isna suugaantiisu isla godkan la mid yihiin.

***DHERERKA:*** *10 shaqalle*
***JAANTA:*** *Hobeey hoobeey hobeey/ Hiddii diiyooy hiddii*
***HABDHACA:*** *(1) 2 2 2 (1) 2*

*Sidii xuurtaan lalaa*
*Lalaayoo lalansadaa*
*Daruurtaan la hadhsadaa*
*Xareedda cirkaan cabbaa.*

Saarka marka lagu daro hal shaqal ama hal alan-gaab (yo) waxa inoo soo baxaya godkii sabaalaha.

## *SABAALE*

***SABAALAHA*** – oo sida oo kale loo yaqaanno hees-ta dhallaanka ama hees kooleed, waxa ay midhihiisu ka soo jeedaan suugaan ay hooyooyinku ilmaha ku sabaan, sidoo kalena ay afka ku baraan. Duluc iyo dan kasta oo suugaaneed ayaa loo adeegsan karaa godkan iyo kuwa kale ee maansada ba.

***DHERERKA:*** *11 shaqalle*
***JAANTA:*** *Hobeey hoobeey hobeeyo/ Hiddii diiyooy hiddiiyo*
***HABDHACA:*** *(1) 2 2 2 (1) 2 (1)*

*Ma geelii baa arooray*
*Arooroo oon ku raagay,*
*Ma naaskii baa gudhoobay*
*Gabnoobood godol ka weyday.*

Saarka marka lagu daro afar shaqal ama laba alan dheere (hoobeey) waxa inoo soo baxaya godkii heellada.

## *HEELO*

Wiglo, hirwo, balwo iyo heello waa isku mid dhan-ka miisaanka, magacyadu- na waa kuwo taariikheed oo kolba mid loo yaqaannay.

***DHERERKA:*** *14 shaqalle*
***JAANTA:*** *Hobeey hoobeey hobaaleeyoow/ Hellooy helleleooy helaaligayeey*
***HABDHACA:*** *(1)2 2 2 (1) 2 2 2*

*Waxaan kacay daakiraadiiyoo*
*Waxaan shiday dogobyo waaweyneey.*
*[Eeg cutubka 2'aad — Wilgo/Hirwo]*

### *BURAANBUR*

*Buraanburku waxa uu ku jiraa godadka ugu caansan. Waxa inta badan caan ku ah curintiisa haweenka. Iyaga ayaa isku maaweeliya, aroosyada ka tiriya, isku waaniya, oo duluc kasta iyo dan kasta u adeegsada.*

***DHERERKA:*** *18 shaqalle*
***JAANTA:*** *hoobaloow hoobaloow, hoobaloow haddaba.*
***HABDHACA:*** *(1) 2 2 2 (1) 2 2 (1) 2 (1) 2*

*Maxaa ley waanshayeey waabaryiyo aroor*
*Maxaa guur waa kolee kaadso laygu yidhi*
*Maxaan kacayoo kufee keligay tashaday*
*Maxaan karhadoo naftayda kohaday!*
*Kariimow Allow, naftaydaa kalmee!*

## *GEERAARKA WALAALAHIIS*

Geeraarka iyo walaaladii ama dirka geeraarku, wuxuu ka koo- ban yahay godad farabadan bal se waxa aynu ka xusi doonnaa 2 god oo ka mid ah, kuwaas oo kala ah: geeraar-gaabka iyo geeraar- ka.

### *GEERAAR GAAB*

Godkan geeraar-gaabka, dad- ka qaarna ay u yaqaannaan mooye II waa god aan aad u tisqaadin suugaanta casriga ah ee Soomaalida. Midhaha salka ah ee godka waa kuwo inaga soo gaadhay hawraarta tumista hadhuudhka iyo sidoo kale rarista awrta.

***DHERERKA:*** *6 alanle*
***JAANTA:*** *Hobaleey hobaleey*
***HABDHACA:*** *11 2 (11) 2*

*Adagaa adagaa*
*Adagaa ma bir baa*
*Ma bakaar subax baa*
*Ma bidaar oday baa.*
******

*Inta doonida qaad*
*Sida daad u sabbee.*

### *GEERAARKA*

*Geeraarku, waa godadka ugu guunsan. Rarista iyo geeddiga awrta ayay inaga soo gaadhay suugaanta geeraarku. Waxa kale oo jirta suugaan badan oo la xidhiidha tumista had- huudhka oo isla geeraarka loo adeegsaday.*

***DHERERKA:*** *7 alanle*
***JAANTA:*** *Hobaleey hobaleeyo*
***HABDHACA:*** *11 2 (11) 2 1*

*Shaluu taagan ahaaye*
*Xaluu tiir ku xidhnaaye*
*Wuu tagoogo casoobay.*
*****

*Ma caddee ha caddaado*
*Caano geel haw ekaado*
*Culimaa cuni doonta.*

*CILMIGA KALA MADDAYNTA IYO JINJIMINTA MAANSADA SOOMAALIDA. — MIISAAN.*

---

*XOG INTAAN KA FAAHFAASAN, OO WADATA TUSAALEYAAL BADAN WAXA AAD KA HELI KARTAA BUUGGA XABAG BARSHEED EE UU QORAY — CALI ILEEYE.*

# TAAWIL

## *KA MOORAYNTA GODADKA EE DAYAXA*

*XOOSH DOCOL*
*CURDAN — GAROWE*

IYADA oo aysan habbanayn in la isku tooxiyo laalanayaasha iyo waayaha dahaaran, haddana waxaa lagama maarmaan ah in dhaqanka Soomaalida la beego lana shaqshaqo, waxa keliya ee aad ku shaqshaqi kartidna waa maankaaga oo ah kan kuu sheegaya waxa saxan iyo waxa silloon. Godadka dayaxa dayrtu waxa ay Soomaalida dhexdeeda ku leeyihiin micno gaar ah iyo fasiraado ka turjumaya xeel dheeraanta dhaqanka Soomaalida, waxaana ka mid ah;

### 01 NAAF-CADDO

*"NAAF-CADDO REERKAAGA BI'I". Habeenka uu dayaxu fadhiyo godkaan qofkii dhasha waxaa loo qaban jiray in uu yahay mid aan taran ka tegin. Haddii la arko qof dhashay Naaf-caddo oo dhal yeeshay waxaa la dhahaa "HEBEL CAWAA U BILKATAY, OO DHAWRTO UU BIXIYEY BAA EEBBE KU BADBAADSHAY". Naaf-caddo reerkaaga bi'i waa habaar, micnihiisu yahay gablan noqo oo gabanno ha gardaadin. Ninka dhasha waxa la ogaaday in hantiyeysto marku uu da' gaaro, inta uu dhallinta yahayna uu leeyahay hanti aan jeebkiisa ka badnayn. Xiddigaha firiqsan agagaarka dayaxu waa sababta loogu magac daray caddaanta, jiiskii caddaa.*

### 03 TAR/AFQAYS

*TAR — waa faafin, badasho, siyaadin iwm. "NAFTAADANA NAAF U DHALO, TOLKAANA TAR U DHALO", qofkii dhasha habeenka uu dayaxu fadhiyo godkaan Soomaalidu waxa ay u taawishaa in uu qofkaas noqon doono qof tolkiisa u roon dhanka talada, garab istaagga, taakulaynta, duullaammada, ilaalinta sharaftiisa, dhanka tarantana badiya, waxaa la aamminsan yahay ragga guursada dumarka badan, dhalana carruur tiro dhaaf ah in ay dhashaan godkaan. Dayaxu waxa uu la fariistaa afar xiddigood oo middood tahay Cirjiirta, haddii uu dayaxu inta badan la fadhiyo cirjiirta iyo godka xiga ee Majin, waxaa la aamminsan yahay in ay saadaal wanaagsan u tahay roobab joogto ah iyo barwaaqo sidii dhacday 1968'dii (Galaal, 1970).*

### 02 NAAF-MADOOBE

*Habeenka dayaxu fadhiyo godkaan qofkii dhasha Soomaalidu waxa ay u taawisaa in uu noqonayo qof hoggaamiye, aftahan ama sharaf ku leh bulshada dhexdeeda. Godkaan waxaa dhashay sida uu ku xusay buuggiisa odeygii xiddigo yaqaanka ahaana sheegay Madaxweynihii koowaad ee Puntland ahaana madaxweynihii dowladdii KMG'ka Soomaaliya CABDULLAAHI YUUSUF YEY. Sidoo kale waxaa la taawiyaa in uu noqonayo maalqabeen inta aysan timihiisu cirraysan, balse haddii uu da' gaaro, waxaa la arkaa isaga oo hoos u gurmaya. Naaf-madoobe waxaa loogu bixiyey dayaxu agagaarkiis dhan wax xiddigo ahi ma soo fariistaan lagumana arko.*





## 04 MIJIN

*MIJIN – Habeenka uu dayaxu fadhiyo godka MIJIN ama DHAYLAHA, qofkii dhasha waxa ay Soomaalidu u taawishaa in uu noqon doono qof dhabcaal ah oo aan naftiisa u quurin quudka dadka kale na kala bakhayla xoolaha Eebbe ku siiyey. Mijin, waa lafta hoose ee aan lud iyo baruurta toonna lahayn ee la tuuro xoolaha marka la qalo.*

## 05 KOXDIN/KOODXIIN

*KOXDIN – Habeenka uu dayaxu godkaan fadhiyo, qofkii dhasha Soomaalidu waxa ay u taawishaa in uu noqonayo mid aan geela ku sabcanayn oo uu san u badan, haddii kun la siiyo iyo haddii kow la siiya ba isku si buu u dhaafayaa geelu, xeradiisana kuma negaado.*

## 05 GUDBAN

*GUDBAN – qofkii dhasha Soomaalidu waxa ay aamminaayeen in uu noqoyo aftahan ama shiishyahan aan farta loo taagin. Inta badan qofka loo xulayo nabaddoonka ama maqaddinka reerka waxaa laga illayn jiray in uu dhashay godkaan. Sidaas si la mid ah qofka abbaanduulaha ah iyo colwadeennada ba godkaan baa loo eegi jiray.*

## 06 DIRIR

*DIRIR — Habeenka dayaxu uu fadhiyo godkaan qofkii dhasha waxaa la aamminsan yahay in uu yahay aad u nasiib badan, haddii xoolihiisu ka baxsadaan bahal ma laayo ama iyaga oo soconayey xeradoodii ku soo laabtaan, haddii geeliisa ama gammaankiisa la dhaco nasiib buu ku baxsadaa, wuxuuna noqdaa mid xoolaha ku samcan.*

## 07 BAYAXOW

*BAYAXOW – Qofkii dhasha waxaa la aamminsan yahay mid leh Baruud ama Burji gaar ah, haybad looga haysbaysto, waxaana la aamminsan yahay in uu yahay mid shay gaar ah Eebbe haybad ama buruud/ballaysin ugu siiyey.*

## 08 GARBO

*GARBO – Qofkii dhasha dayaxa oo godkaan fadhiya, waxaa la aamminsan yahay in noqonayo mid aad geesi u ah, la isuna sheego geyiga dhanna carrabka looga qabto, sub-axda habeenkaan odeyaasha reerka ee xiddigiyeyaasha ahi waxa ay isugu yimaadaan goobaha ay ku kulmaan waxaana la is warsadaa "War caawa yaa wiil u dhashay?", "Hebel buu u dhashay", "Nin cawo iyo ayaan leh weeye, wuxuu noqon doono sidii la arki jirey mid geesi ah, oo aan birta ka gabban".*

## 09 GUDBAN

*GUDBAN – Waxaa la aamminsan yahay in nin kasta oo aftahan ahi godkaan dhashay, ninka geedka ka sheegan, garta qaada, haddii la is mari waayona dadka kala furdaamiya, xaajo yaqaanka aan carrabkiisu xaaddu saarnayn, midka geedka markii la isugu yimaado mudaciga dhegaha xujo ka leefsiiya, waa midka godkaan Gudbanta dhasha.*

*DAYRTU waa 91 habeen, 7'da god mid walba dayaxu waxa uu fadhiyayaa 13 caanomaal sidaas ayuu ku noqday 91 casho (7×13 = 91). Gododka dayaxu fariisto oo idil waa 28 god. Haddii aad 28 ku dhufatid 13'kii uu fadhiyey, wadartu waa 364 (28×13 = 364) caanomaal oo sannad buuxa ah. Ka dibna waxaa gadaal looga daraa habeenka 183 oo ah habeenka sannadka kala bara oo loo yaqaan MAHRAJAANKA sidaasna waxa uu ku noqdaa 365 habeen.*

---

*MAHRAJAANKA – Waxaa kaloo yaqaannaa habeenka kala bara sannadka Soomaalida. Si kale haddii aan u dhigo waa habeen 183aad marka laga soo tiriyo Dabshidka. Wuxuu kala baraa lixda bilooda ee Bilo-dambarsame (Xaagaa' iyo Dayr – 1 – 182, marka laga soo tiriyo dabshidka) iyo lixda Bilo-dirir (Diraac iyo Gu' – 183 – 365 marka laga soo tiriyo dabshidka). Habeenkaan inta badan lama xisaabiyo xisaabaha sannadka waxaana loo qaataa xisaab dheeri ah, waxaana gadaal laga raaciyaa marka sannadka tiradiisa la dhammeeyo, waa 364 maalmood iyo habeenka Mahrajaan, sidaasna wuxuu ku noqonayaa 365 habeen.*

*XOG DHEERAAD AH OO KU SAABSAN TAAWINTA, WAXA AY KU SOO BIXI DOONTAA BUUGGA AFARTA MEESI EE QORAAGU SOO SAARAYO.*



# MEERTADA DAYAXA

*Dayaxu – waa xiddigga ugu dhow xiddigaha samada sare. Dayaxu waxa uu bishiiba soo baxaa 28 habeen, habeen kastana waxa uu fariistaa godad loo yaqaanno Manaasil. Dayaxa habeen kasta waxa uu la fariistaa xiddig taas oo habeenkaas lagu magac-dhabay. Haddii dayaxu fariisto labo xiddigood dhexdood oo uu san midna la fariisan waxaa loo yaqaannaa Karan. Haddii uu mid u dhow yahayna taas lagu taawiyaa. Habeenka uu san uu dayaxu soo bixin waxaa loo yaqaannaa dibbad/dubbad. Haddii bishu dhalato ayada oo aan buux-samin tiradii godadku waxaa loo yaqaannaa Toomman. Dayaxu sannadka dhan waxa uu fariista 28 god (Waa afar xilli – Diraac, Gu', Xagaa iyo Deyr oo midkiiba leeyahay 7 god), god kasta oo ka tirsan 7-daas god dayaxu waxa uu fadhiyaa 13 habeen, sannadkuna waa 365 maalmood oo ka timid (28×13 = 364), ka dib waxaa buuxiya habeenka sannadka kala bara oo loo yaqaanno Mahrajaan, sidaas na waxa ay ku noqdaan 365 maalmood. Manaasisha dayaxu waa kuwaan;*

*1). Godan/Faraaci, 2). Listan, 3). Laxo/Urur, 4). Cadaad, 5). Agaalli-waranley/Agaalli-cas, 6). Agaalli-caanood, 7). Afogaal, 8). Naaf-cadde, 9). Naaf-madoobe, 10). Tar, 11). Majin, 12). Koxdin-awr, 13). Koxdin-naaso-gaal, 14). Dirir, 15). Garbo, 16). Bayaxow, 17). Gudban, 18). Libcas, 19). Xoorrey, 20). Mareego-dheer, 21). Maran, 22). Faruur-cirir, 23). Jed kabaarre, 24). Jed dhirirqle,25). Jedgacale, 26). Jed dukbuqle, 27). Duganti iyo 28). Farangaag.*



*Cirkaan di'in abaar daalliyaad , dunida oo qiiqday*
*Dayax ururta daariga ka maray, dirirka oo liiqday*
*Maruun baa daruuraha cusayb, soo dibbiriyaaye*
*Deyraanka curashaa ku xigi, daacigii sebene*
*Maruun buu darroorraa Intuu, daadka soo roga e*
*Bal dayooy duraabtaa horuu, daafta mariyaayey**

*— SAYID MAXAMED CABDILLE XASAN*
*[*] DAALALLI AMA DAALLALO – waa godadka dayaxa ee ka bilowda 18 – 21, waxaa la sheegaa in dumarku ku sabcan yihiin godadka Daalallida.*

*"Hadduu roob dib dhoco oo dib dhoco oo Daalalli haleelo,*
*Dooxada biyaha waa geshaa,Deyr ka qadan roone".*
*— GABAY.*

*Cirirrada is dhinacyaalla iyo halalo noo dhooban*
*Dhoolashaas waqooyaan arkaa, taan ka dhaansadaye*
*Dirirradu ninkay dhibi jireen, wayska dhaafeene*
*Mariikhiyo, wax mareego dheer, la isu soo dhiibo*
*Dhaxal aabbe waxaa looga dhigay, inay ku dhaataane*
*Faraacida markaan dhaaday een dhab u ilaaleeyey*
*Saxal dhugadka dheeftiisa iyo dhaayahii Godanka*
*Dhaaxaan iraahdaa irdaha yuu ka soo dhicine!*
*Dhamacdaan u qaataa kolkaas oo dhidibka aastaa!*
*Dhulka aabbe iyo hooyaday, dheefta lagu siiyey*
*Dheel-dheel in aan uga haraa, waa wax aan dhicine*
*Xiddigaha haddaan dhaagay oo dhinac walbaw eegay!*
*Waxaa dhayga ii galay inaan maalin soo dhicine!*

*— CABDI SALAAD XADE*
*Ammintu waa 1970'dkii, Cabdi waxa uu degga ku sitaa qori Xakiim ah oo dowladda Masar ku hubaysay ciidankii kacaanka. Waxa uu hammi ugu jiraa in uu maalin soo dhicin doono dhulkii Keydka ahaa ee Ethiopia lagu wareejiyey 1954. Intii aan awood la isla gaarin waxa uu kor u eegay taawinnada ka soo lusha samada, markaas baa u soo baxday maalin uun in uu gacantiisa soo geli doono dhulkaas. Kolkaas buu gabaygaan tirshay.*



*SAWIRKA:*
*https://www.quora.com/What-are-the-28-lunar-phases*

# AWDAL

*BOQORTOOYADII SOOMAALIDA*
*EE BARI & BOGOX!*



*Bilowgii hore reer Sa'ad Din waxa ay ahaayeen madaxda ugu sarraysa iyo aasaaseyaashii boqortooyadii IFAT. Saldanad yar oo ka tirsanayd Saldanooyinkii Saleebaaniyada lana oran jiray DWAT I, ayaa ku soo duushay Adal, ciidankoodii Adalna halkaas baa lagu jebiyey, sida oo kale waxaa la dilay suldaankii ahaana aasaasihii boqortooyada Adal, Sa'ad ad Din II. Ka dib, ubadkii iyo eheladii reer Sacaadaddiin waxa ay u fakadeen Yemen oo ay asal ahaan ka soo jeedeen, halkaas oo ay mar kale ka soo abaabuleen dhismaha iyo soo labo kacleynta boqortooyadii Adal.*

*Ugu dambayn Saldannaddii Adal/Cadal, waxa bullaashay sannadihii 1415 — 1577, oo ahaa waayaheedii dahabiga ahaa. Waxaa saldanaddaan mar kale dhidibbada u taagay nin wiilkii suldaankii hore oo la oran jiray — Sabar Ad-Diin II oo uu dhalay caalimkii weynaa Sacaada Diin, oo ilaa maanta loogu magac go'ada [Jasiiradda] Sacaaddaddiin. Sida oo kale boqortooyadaan waxaa loo yaqaannay Bar Sa'ad Diin. Waxa ay ka talin jirtay xeebaha galbeedka ilaa bannaannada Herar, waxa ay ayna caynaanka qabsatay ka dib markii ay duntay boqortooyadii ka horraysay ee IFAT, taas oo ka soo ifbaxday dhulka maanta uu ugu muunadsan yahay Herar.*

*Boqortooyadaan ayaa siyaasad ahaan iyo dhaqaale ahaan ba salka ku haysay boqortooyadii guunka ahayd ee Cismaaniyiintan [Ottoman Empire].*

*Sida la sheego AWDAL waxa uu ka yimid Eidal ama Aw Abdal oo ahaa amiirkii Herar qarniiga 11'd. Markii ugu horreysay magacaan oo Soomaaliyeysan waxaa warqadihiisa ku daabacay qoraa carbeed ee al-Dimashqi ka dib markii habdhaca erayga ka yeersaday dadkii Soomaalida ahaa ee degganaa deegaankaa, sidaas si la mid ah waxa uu sheegay in magaalo xeebeedda Saylac ay u ahayd magaalo madax. Dadka boqortooyadaan waxaa loogu yeeri jiray ADALITES ama Cadaliyiin.*

*Boqortooyadii markii dhidibbada loogu taagay, waxaa salaaddiin ka noqday awlaaddii Sa'ad Ad-Don II, ee kala ahaa — Sabr, Mansur, Jamal, Badlay, Mahzum, Abu Bakr, Garad Abogne, Umar Din iyo Azxmed Gurey. Markii dib loo soo kiciyey boqortooyadaan waxaa saldhig magaalo madax looga dhigay magaalada Dakkar oo u dhow Herar. Dagaallo badan oo lagu hoobtay kuwaas oo loo bixiyey — DAGAALLADA ISKACAABBINTA GAALADA ABASIINIYA ayaa waxa ay ka dhaceen buuroleyda Itoobiya, ugu dambayn dagaalladaas waxa ay keeneen in Herar ay la wareegaan reer ADAL lagana dhigo caasimadda boqortooyada.*

*Boqortooyadaan waxa ay gaartay ilaa deegaannada la Cape Gardafui [Bari], ilaa Koonfurta Soomaaliya oo ay canshuur ka qaadi jireen Suldaankii Muqdisho [Ajuuraan]. Boqortooyadaan ayaa bixisay eray GARAAD iyada oo markii ugu horreysay u bixisay — "Garad Abogne" oo uu dilay Imirkii Abu Bakr. Markii Imam Axmed Gurey uu isu cimaamaday saldannada wuxuu dilay Abu Bakr, waxa uu na ku beddelay walaalkii ka yar Umar Din. Ugu dambayn boqortooyadaan oo sii diciifaysa waxa abaabushay gulufkii ugu weynaa kaas oo markii dambe quwadihii caalamka ee gaalada ahaa ay u soo hiilliyeen Abasiiniya. Dagaalladaan ayaa loogu wanqalay — Furashadii Xabashida.*

*Purtegees'ka oo is hayn waayey dano badanna ka lahaa badweynta Hindiyaa ayaa caawiyey Xabashidii, iyagii na waa lagu jebiyey ilaa markii dambe laga dilay hoggaamiyahooda iyo dhulmareenkii caanka ahaa ee — Cristóvão da Gama. Balse, waxaa soo rogaal celiyey Purtegees'kii oo dagaal kharaar reer Adal kula galay harada Tana dagaalkaasna waxaa la oran jiray Dagaalkii Wayna Daga, Febraayo 1543, dagaalkaasna waxaa ku dhintay Imamkii u dambeeyey ee Adal Imaam Axmed Gurey. Markii la dilay Axmed Gurey, boqortooyadani waxa ay lumisay dhul badan oo gacanteeda soo galay waayihii baraaraha oo ay ka mid ahaayeen Baali, Harar, iyo Buuroleyda qaniga ah.*

*Ugu dambayn waxaa axan loo dhigay 1562, markaas oo lagu kala dareeray boqortooyadii guunka ahayd reer Adal. Sida ay xuseen boqortooyadaan keliya ma ahayn Soomaali, balse waxaa ku jiray — Carab, Canfar, Harariin iyo Itoobiyaan faro ku tiris ah sida Bahru Zewde.*




THE MOGADISHU BOOK FAIR
Tadamun Social Society | TASS
Biciid Magazine